**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

# Mashruuca Adkeysiga Biyaha Soomaaliya ee Barwaaqo

# (P177627)

**HABRAACA MAAMULKA SHAQADA**

## 20-Jan-2023

TUSMADA


1. HORDHAC ....... 4
2. DULMARKA SHAQAALAHA MASHRUUCA ....... 12
3. QIIMAYNTA KHATARAHA SHAQADA EE MAANGALKA AH ....... 15
4. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN SHARCIGA SHAQADA: MUDDADA IYO SHURUUDAHA ....... 18
5. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN SHARCIGA SHAQADA: CAAFIMAADKA IYO BADQABKA SHAQAALAHA....... 21
6. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN SHARCIGA SHAQADA: TAKOORKA IYO XADGUDUBKA ....... 23
7. DOORKA IYO MASUULIYADAHA SHAQAALAHA MASHRUUCA ....... 29
8. SIYAASADDAHA IYO HABRAACYADA....... 33
9. HABKA CABASHADA....... 39
10. MAAMULIDDA QANDARAASLEYDA ....... 43
11. SHAQAALAHA SAADKA ASAASIGA AH ....... 45
12. SHAQAALAHA BULSHADA....... 46

LIFAAQA 1: SOOKOOBIDA ARIMAHA E&S EE LA SHAACIYAY, INTA LAGU GUDA JIRAY TALO-BIXINTA DANEEYAHA IYO YARAYNTA TALLAABOOYINKA LASOO JEEDIYAY ....... 47

LIFAAQA 2: TILMAAMIDDA KU AADDAN XEERKA ANSHAXA ....... 54

LIFAAQ 3: QABYO-QORAALKA XEERKA ANSHAAXA EE DHAMMAAN SHAQAALAHA MASHRUUCA IYO SHAQAALAHA QANDARAASLEYDA AH ....... 57

LIFAAQ 4: SHURUUDAHA CAAFIMAADKA IYO BAD-QABKA SHAQAALAHA....... 61


**List of Tables**


shaxda 1: Qaybaha iyo qayb-hoosaadyada mashruuca

shaxda 2: Breakdown of beneficiary numbers per FMS shaxda 3: *Odoroska shaqaalaha la filayay in la adeegsado*

shaxda 4: Falanqaynta firaaqa u dhexeeya sharciga Soomaaliya iyo heerarka Bangiga Aduunka 25

shaxda 5: Soo koobidda shaqaalaha masruuca /cidda masuulka ka ah masuuliyaadka kal duwan ee goobaha 31

shaxda 6: Miisaaniyada lagu fulinayo HMS (5 sanno)

shaxda 7: *wakhtiga lagu maaraynayo cabashooyinka*

**ERAYO LASOO GAABSHAY**

| Erayo la soo gaabiyay | Tarjumaad |
|---|---|
| UB | Ururada Bulshada |
| HB | Hormarinta Bulshada |
| QMB | Qorshaha Maalgelinta Bulshada |
| XAN | Xeerka Anshaxa |
| UBR | Ururka Bulshda Rayidka ah |
| AG | Agaasimaha Guud |
| QBD | Qaab dhismeedka Bulshada iyo Deegaanka |
| WDBD | Warbixinta Dhacdooyinka Bulshada iyo Deegaanka |
| QMDB | Qaab-dhismeedka Maamul Deegaaneed iyo Bulsheed |
| QMDB | Qorshaha Maamul Deegaaneed iyo Bulsheed |
| HDB | Heerarka Deegaanka iyo Bulshada |
| DFS | Dawladda Federaalka Soomaaliya |
| DXF | Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka |
| TKJ | Tacadiyada ku saleysan Jinsiga |
| HC | Habka Cabashada |
| GXC | Guddiga Xallinta Cabashada |
| HXC | Habka Xalinta Cabashada |
| BKG | Bara Kacayaasha Gudaha |
| HMS | Habraaca Maamulka Shaqada |
| K&Q | Kormeerka iyo Qiimaynta |
| WWW | Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha |
| WTKhB | Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha |
| WM | Wasaaradda Maaliyadda |
| UDA | Ururrada aan Dawliga Ahayn |
| JDA | Jilaayaasha aan Dawliga Ahayn |
| BSH | Badqabka Shaqada |
| DQM | Dukumentiga Qiimaynta Mashruuca |
| UIMQ | Unugta Iskuduwidda Mashruuca heer Qaran |
| UHM | Ujeedka Hormarinta Mashruuca |

| | |
|---|---|
| UFM | Unugta Fulinta Mashruuca |
| DBGN | Dadka Baahiyaha Gaarka ah la Nool |
| GMM | Guddiga Maamulka Mashruuca |
| HHBP | Hay'adda Horumarinta Biyaha Puntland |
| SMKA | Shirkada Maaraynta Khataraha Amni |
| KTJ | Ka faa'iidaysi iyo Tacaddiga jinsiga |
| HMA | Hab-dhismeedka Maamulka Amniga |
| QMA | Qorshaha Maareynta Amniga |
| QQD | Qorshaha ka Qaybgalka Daneeyaha |
| BFN | Biyaha iyo Faya-dhowrka nadaafadeed |
| BA | Bangiga Adduunka |
| WSAB | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee Federaalka |

# 1. HORDHAC

Mashruucu wuxuu awoodda saarayaa in la gaarsiiyo bulshada biyo nadiif ah, isla markaana ay ka qeyb-galaan maamulk, hawlgalinta iyo dayactirka biyaha dhulka (BDh). Sidoo kale wuxuu ka shaqaynayaa waxqabadyka kaabayaasha dhaqaale ee wax ku oolka ah, xogaha iyo aqoonta biyaha dhulka ka hooseeya/guntiisa ku jiro, iyo ugu dambeyn dhisidda awoodda hay'adaha ka shaqeeya si loo xaqiijiyo helitaanka biyo nadiif oo ay ka qeyb-qaateen go'aankeeda bulshada deegaanka ku nool

Mashruuca waxa laga filayaa in uu sare u qaaddo helidda biyo nadiif oo saafi ah iyadoo loo marayo maalgelinta cusub iyo dib u hagaajinta hababkii horay ujiray, wax ka qabashada baahiyaha degdega ah ee biyaha iyo nadaafaddooda iyo in la dhiso oo dib u habeyn lagu sameeyo hababka gaarsiinta biyaha. Mashruucu waxa uu samayn doonaa sahanno joolooji ah, mid hydrogeology ah, iyo mid juquraafiyeed si loo ogaado goobaha biyaha leh ee la hormarin karo,kuwaas oo laga kordhin karo biyo siin tayo sare leh. Mashruucu wuxuu tababari doonaa shaqaale xirfadlayaal ah, wuxuuxa dhisi doonaa xafiisyo ka shaqeeya biyaha dhulka, wuxuuna diyaarin doonaa helitaanka xogaha loo baahan yahay.

Ujeedka Hormarinta Mashruuca "UHM" waxaa lagu cabbiri doonaa iyadoo la isticmaalayo natiijada saddexda tilmaamood ee soo socda:

I. % Boqokiiba Ka faa'iideystayaasha dumarka ee helay biyo nadiif ah oo tayo sare leh.
II. % Boqoolkiiba bar biyoodyada la dhisay ama dib u habayn ku socoto ee shaqeynaya
III. Hay'adaha ka shaqeeya biyha dhulka ka hooseeya ee helay xogaha maareynta biyaha dhulka ku jiro.

Marka lagu saleeyo Project Appraisal Documeent ( PAD), mashruucu waxa uu ka kooban yahay saddex qaybood iyo dhawr qeyb hoosaad. Qaybaha iyo qaybo hoosaadkaba hoos ayaa si kooban loogu sharraxay:

| | Qayb | Qayb hoosaad |
|---|---|---|
| 1. | In la gaarsiiyo Biyaha dhulka hoostiisa meelaha qallalan ee ubaahan | 1.1 Sahanada jiyooloji biyood iyo cilmi-baadhista, qiimeynta biyo mareenada iyo qiimeynta goobaha bar biyood ee muhiim ka ah. |
| | | 1.2 Hormarinta kaabayaasha dhaqaale iyo maamulka heer bulsho iyo adeegsiga biyo dhuleedka. |
| | | 1.3 U diyaarinta hormarinta biyaha dhulkaee goobbo gaar ah |
| 2. | In la sameeyo hab isku mid ah oo loogu talagalay horumarinta iyo maamulka biyaha dhulka ee Soomaaliya oo dhan. | 2.1 Hormarinta hab maamulka biyaha dhulka iyo diyaarinta wadashaqeyn dhex marta dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada, dawladaha dhexdooda, iyo bulshada rayidka ah. |
| | | 2.2 Samayta iyo hawlgelinta xafiisyada biya dhulkeed ee Wasaaradda Biyaha ee dawladda Federaalka, dawladaha xubnaha ka ah iyo Somaliland. |
| | | 2.3 awooda sare u qaadista hormarinta biyo dhuleed, maamulka iyo kor joogtaynta. Tani waa halka salka u ah awooda hormarinta iyo tababbarista. |
| | | 2.4 Maareynta xogta iyo macluumaadka biyaha dhulka. Mar haddii ay kamid tahay qorshe iyo istiraajiyadda kheyraadka biyaha ee qaranka Soomaaliya, xarunta Hydromet ayaa laga hirgelin doonaa Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha Soomaaliya. |
| | | 2.5 Biyo-mareenka Merti, oo badanaa dhaca Kenya, balse kusoo fida Soomaaliya, ayaa noqon doona kiiska loo adeegsan doono iskaashiga iyo horumarinta gobolka, tijaabinta iyo horumarinta hababka wada-shaqeynta. |
| 3. | Maamulka mashruuca ee la xiriira kormeerka iyo qiimeynta, sidoo caalamiyeynta Aqoonta Maamulka iyo Barashada | 3.1 Qaab dhismeedka iyo Maareynta mashruuca. Qeyb-hoosaadka waxaa ku jira dhammaan kharashyada hawlgelinta ee UIMQ iyo UFM ee Soomaaliya oo dhan. |
| | | 3.2 Kormeerka iyo qiimeynta (K&Q), maareynta aqoonta, iyo barashada guddaha |

**Shuruudaha muhiimka ah ee shaqada**

1. Mashruuca Abaar-Tir qeybihiisa koowaad iyo labaad waxaa laga filayaa iney ka qeyb-qaataan bulshada sida dayactirka Ceelasha , qeybinta biyaha iyo unkidda xafiisyo ka shaqeeya biyaha dhulka ka hooseeya/ceelasha.. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in la helo shaqaale ka shaqeeysa hirgelinta shaqooyinkaas. Khataraha soo wajihi karo waxaa ka mid noqon kara: Diyaar-Garowga aan rasmiga ahayn ee u dhaxaysa qandaraaslayaasha iyo shaqaalaha maxalliga ah ,carruurta iyo shaqaalaha lagu qasbayo in ay ka hawgalaan goobaha dhismayaasha, iyo sidoo kale khataraha soo wajihi karo inta lagu guda jiro dhismaha iyo noocyada kala duwan ee shaqada. Sidaa darteed, badbaadada shaqaaluhu waa in ay qayb ka noqdaan qandaraaska. Waxaa sidoo kale iman kara khataraha xadgudubka iyo ka faa'ideysiga dhanka galmada. Bad-qabka shaqaalaha mashruucu waa in uu jiraa, gaar ahaan meelaha aan ammaanka aheyn ama ay ka jireen isku dhacyo qabiil.

2. Iyadoo ay dhici karto in mashruuca soo iibsado qalabka soolarka cadceedda ku shaqeeya ee loo adeegsado soo saarista biyaha ayay suurtagal tahay halista ka imaanaysa shaqada khasabka ah inta lagu guda jiro howsha iibka iyo soo rarista qalabaka soolarka iyo qaybihiisa.. Haddaba, si loo adkeeyo nidaamka dhimista

khatarta shaqada qasabka ah, mashruucu wuxuu xoojin doonaa waraaqaha wax-iibsiga ee la xiriira soolarka ama qaybihiisa ayadoo lagu soo darayo shuruudo ku khasbaya u tartamaha qandaraaska inuu codisigiisa ku caddeeyo u hoggaansananatiisa sharciga mamnuucaya shaqada khasabka ah; inay ku jiri doonto arritaasi heshiiska shaqo ee lala galayo qandaraaslaha guulaysta, iyo lamhuraannimada in Bankigu hubiyo arrintaas marka uu samaynayo dib-u-eegista hore. Shuruudahaas ayaa lagu dabaqi doonaa iibka tartanka caalamiga ah iyo kan qaranka iyo xulid kasta/qandaraas toos ah oo ku dhex jira codsiyada la soo gudbiyay.

**Maangalka Habraaca Maamulka Shaqaalaha (HMS)**

3. Heshiiskani wuxuu qeexayaa habka mashruuca ee buuxinta shuruudaha qaranka, iyo sidoo kale ujeedooyinka hanaanka Bangiga ee Deegaanka iyo Bulshada, gaar ahaan "heerka deegaanka iyo bulshada ee (ESS2):Shaqaalaha iyo Xaaladaha ay ku shaqeeyaan oo ay ku jiraan tilmaamaha Bangiga ee heerka Deegaanka iyo Bulshada “ESS4” iyo Badqabka Shaqaalaha.Hababka Maamulka Shaqaalaha (LMP), waxaa looga golleeyahay in lagu hormariyo hirgelinta hab nidaamsan oo lagu wanaajinayo maareynta khatarta iyo saameynta la xiriirta shaqada iyo xaaladaha shaqaalaha ee mashruuca. Nidaamyadu waxay tilmaamayaan siyaabaha sharciga qaranka iyo shuruudaha ESS2 iyo ESS4 ee lagu dabaqi karo mashruuca. Faahfaahinta qiimaynta ESS4, waxey ku jirtaa qaabka shaqada deegaanka iyo bulshada (ESMF).

**Hirgelinta Heshiiska Maamulka Shaqada**

4. Heshiiskani waxaa maamuli doonaa qaybaha kala duwan ee shaqaalaha mashruuca:

(i) Shaqaalaha tooska ah - oo ay ku jiraan hay'adaha fulinta mashruuca, waa inay si gaar ah uga shaqeeyaan mashruuca. (kuwani waa la-taliyayaal PIU ah iyo shaqaale rayid ah oo haysta wareejin sharci ah oo ay kaga shaqayn karaan mashruuca).

(ii) Shaqaale qandaraas ku shaqeeya oo ay ku jiraan shaqaale xirfad leh iyo shaqaale aan xirfad lahayn oo ay qandaraas ku qaateen shirkadaha dhismaha.
lataliyaha kormeerka, kormeeraha dhinac saddexaad (TPM), lataliyaha MIS, shirkadda maaraynta khataraha amniga, iyo sidoo kale qandaraaslayaasha kale;

(iii) Shaqaalaha aasaasiga ah - kuwani waxay noqon joogta ah oo ku howlan shaqooyinka lagama maar-maanka ah.oo si toos ah u siiya agabka mashruuca ama agabka muhiimka u ah hawlaha mashruuca. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara: qeybiyeyaasha soolarka cadceedda, iyo qeybiyeyaal kale oo joogto ah, kuwaasoo aan weli la qeexin.

(iv) Shaqaalaha bulshada - Waa shaqaale ku howlan ushaqeynta bulshada. In kasta oo aanay jirin qorshayaal lagu hawlgelinayo shaqaalaha bulshada, shuruudo ayaa loo dejiyay haddii ay taasi dhacdo oo loo baahdo,islamarkaana lagama maarmaan noqoto.

5. Dastuurka kumeelgaarka ah ee dawlada federaalka Soomaaliya (la ansixiyay August 2012) wuxuu ina siinayaa qaab-dhismeedka sharciyeed ee arimaha shaqada. Xeerka shaqada Soomaaliya (sharciga qodobka 65, la ansixiyay 1972), waa sharciga shaqada ee gaarka ah ee haga dhamaan dhinacyada shaqada iyo xaaladaha shaqaalaha, kaas oo khuseeya heshiiska shaqada, wakhtiga iyo shuruudaha, gunnada, iyo CBS, ururrada ganacsiga iyo awoodda shaqaalaha. Qodobbada Xeerka Shaqadu waxay khuseeyaan dhammaan

shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha idil ahaantood. Xeerka shaqadu waa mid ballaaran oo ay ka mid yihiin HBD2 ,laakiin waxaa jira firaaq iyo kaladuwanaasho yar oo dhanka dhaqangelinta sharcigaas ah (eeg qaybta VIII ee qaab dhismaha dastuureed). Hay'adaha dawliga ah/Shaqaalaha rayidkawaxaa maamulaya oo haga sharciga shaqaalaha rayidka ah (Xeer Lr. 11).

**Tallaabooyinka la soojeediyay ee lagu dhimayo khataraha**

6. **Unugta Isku-duwida iyo Fulinta Mashruuca (UIFM)=(NPCU)** ee Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha ayaa masuul ka noqon doonta isku-duwida iyo maaraynta mashruuca,lajaanqaadida shuruuddaha badqabka, sida shaqada iyo xaaladdaha shaqaalaha. Waajibaadkooda waxaa soo hoos galaya : (i) hubinta in shuruudaha HMS tooska ah ee shaqaalaha (UIFM) la fuliyay; (ii) Hubinta in dhammaan qandaraaslayaasha iyo alaab-bixiyayaashu u hoggaansameen qodobbada HMS ee waafaqsan ESS2 iyo ESS4; (iii) kormeerrida shuruudaha carruurta shaqeeya iyo shaqaada khasabka ah ee guud ahaan shaqaalaha; (iv) hormarinta, kor u qaadida wacyiga iyo la socodka saxiixa xeerarka anshaxa (XAN) oo hoosta ka xarriiqaya shuruudaha shaqada ee gabi ahaan shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraaska ku shaqeeya; (v) Xaqiijinta dhaqangalka iyo gaaritaanka habka xallinta cabashooyinka mashruuca ee dhamaan shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraaska ku shaqeeya (vi) qiimeynta iyo ka warbixinta guud ahaan shuruudaha hoos yimaada HMS ee lasiinayo Bangiga Adduunka ee ku qotonta saddex biloodlaha; (Vi) Tababarrida iyo kormeeridda masuuliyaddaha heer goob ee shaqada, ,kuwaas oo khuseeya arimaha badqabka shaqaalaha "OHS".

7. **Unugta Fulinta Mashruuca (UFM)** ee heer dawlad goboleed ayaa yeelan doonta hawlaha soo socda ee la xiriira shaqada iyo xaaladaha shaqaalaha:(i) hubinta in shuruudaha HMS tooska ah ee shaqaalaha (UFM) la fuliyay; (ii) Hubinta in dhammaan qandaraaslayaasha iyo alaab-bixiyayaashu u hoggaansamaan qodobbada HMS ee waafaqsan HBD2 iyo HBD4; (iii) hawlgelinta iyo maaraynta la-taliyayaasha si waafaqsan HMS iyo dukumiintiyada ku haboon wax iibsiga; (iv) kormeerka shuruudaha khuseeya ku shaqaynta carruurta iyo shaqada khasabka ah ee la xiriirta alaab-bixiyayaasha koowaad; (v) hormarinta, kor u qaadidda wacyiga iyo la socodka saxiixa xeerarka anshaxa (XAN) ee hoosta ka xariiqaya shuruudaha shaqada ee gabi ahaan shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraaska ku jooga ; (vi Xaqiijinta dhaqangalka iyo gaaritaanka habka xallinta cabashooyinka mashruuca ee dhamaan shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraaska ku shaqeeya (vii) in shaqaalaha la siiyo tababbaro korna loo qaado heerka aqqontooda ee ku saabsan shaqadooda iyo arrimaha CBS; (viii) alaab-bixiyayaasha koowaad iyo qandaraaslayaashu waxaa looga baahan yahay inay cadeeyaan oo qeexaan khatarta ay leedahay ilmo ku shaqaynta, shaqada khasabka ah iyo hubinta badqabka shaqaalaha; (ix) hubinta jiritaanka , iyo iyo aaminaadda habka xallinta cabashooyinka iyo shaqaalaha qandaraaska ku shaqeeya iyo kuwa tooska ah . (x) Hubinta jiritaanka habka xallinta cabshooyinka oo la' aamini karo ee PIU iyo shaqaalaha qandaraaska heysta oo ay ku jirto in cabshoyinka loo xalliyo si deg deg oo qarsoodi ah (xi) hubinta in dhammaan qandaraaslayaasha iyo shaqaalaha qandaaslaha hoose fahmaan oo saxiixaan xeerka anshaxa "XAN" inta aysan shaqadu billaaban kahor iyo in la kormeero dhaqangalka xeerka; (xi) warbixin laga siiyo DFS shaqada Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha iyo habsami usocodka CBS ee mashruuca saddexdii biloodba hal mar.

8. **Qandaraaslayaasha iyo alaab-bixiyayaasha Mudnaanta leh,**waxaa looga baahan doonaa inay fuliyaan qodobada la xiriira HMS: (i) Daneeya-yaasha mashruuca fuliya waxay tixraaci doonaan dukumiintigan halka JDA ay sheegi doonaan awoodooda fulineed iyo waaya-aragnimadooda HBD2 iyo HBD4 ee shuruudaha shaqaalahooda; (ii) Kubarada Arrimaha bulshada iyo deegaanka ayaa la shaqaaleysiin doonaa inta aanu

mashruucu dhaqan gal toos ah noqon, si ay umaareeyaan wax ku oolnimda mashruuca iyagoo kaashanaya khibradooda ku wajahan maamulka shaqaalaha , isla markaana waxay dib u eegis ku sameyn doonaan RFP's si loo helo shaqaale tayo maamul sare leh(iii) Khubrada Arrimaha bulshada iyo deegaanka ayaa sidoo kale fulin doona aqoon is weydaarsi ku saabsan waxyaabaha laga rabo deegaanka iyo bulshada ee codsadayaasha qandaraaska "pre-bid" oo ay ku jiraan maamulka shaqaalaha ee hay'adaha fulinta ee listada gaaban soo galay/ lasoo xushay (iv) Hay'adaha loo soo xushay fulinta qandaraasyadu waxaa ku jiri doona qorshe maamul oo leh shaqaale ku filan si ay u fuliyaan qorshahooda (RFPs); (v) Qorshaha maamulka shaqada qandaraaslayaasha waxaa dib u eegi doona khuburada bulshada iyo deegaanka iyo khubarada CBS ee heerka UIMQ oo uu ku jiro bangigu si loo fasaxo.

**Habka Cabashada**

9. Aalaaba cabashooyinka goobta shaqadu waxay ka yimaadaan arimaha la xiriira usinaashaha iyo fursaddahahaqaaleysiinta ee loo simanyahay; heerka gunada shaqada iyo bixinta qarashaatka; khilaafaatka ka yimaada xaaladaha shaqada iyo badqabka la xiriira deegaanka shaqada. Sidaa darteed, HC waxaa wada heli doona dhammaan shaqaalaha mashruuca oo ay ku jiraan **shaqaalaha tooska ah, shaqaalaha qandaraaska la siiyay** si sare loogu qaado arimaha goobta shaqada. Shaqaalahaan waxaa lagu wargelin doonaa HC xiliga shaqaalaysiinta tillaabooyinka la qaaday si looga ilaaliyo aargoosi kasta oo imankara inta shaqada lagu guddo jiro. Wax ka qabashada cabashooyinku waa inay noqotaa mid ujeedo leh, degdeg ah, sir ah oo ka jawaabaysa baahiyaha iyo welwelka shaqaalaha dhibban, awood u siinaysa inay ka hortagaan, yareeyaan, ama xalliyaan xiisadaha iyo mashaakilaadka ka hor intaanay ka sii darin ama ka sii xumaanin, taas oo u baahan dhaqaale dheeraad ah in lagu xaliyo.

10. HC Shaqaalaha la mid ma aha HC-da loo samaynayo daneeyayaasha mashruuca. HC-da gaarka ah ee shaqaaluhu wuxuu ahaan doonaa laba heer - kow heer DFS Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha iyo mid kale oo ah heerka DXF- WTKhB, shaqaalaha qandaraaslayaashuna waxay sidoo kale lahaan doonaan qaabdhismeedkooda gaarka ah.Waa in sidoo kale la tibaaxaa in HC-du aanu ahayn mid badali kara habka garsoorka tooska ah ee qabashada cabashooyinka. Hase ahaatee, tan waxaa loo sameeyay in la dhexdhexaadiyo oo la raadiyo xal ku habboon cabashooyinka la xiriira shaqada, iyada oo aan kharash iyo waqti dheeraad ah la gelinin..

**Cabashooyinka la xiriira TKJ**

11. Qiimeynta khatarta tacadiyada ku saleysan jinsiga "TKJ" ee mashruucan waa mid la taaban karo. Si looga fogaado khatarta waxyeellada nafsiyeed iyo aargoosi, HC-du ee TKJ waa inuu lahaadaa qaab ka duwan oo la xiriira TKJ ,iyadoo laga shidaal qaadanayo ogolaanshaha cabashada. Qofka cabashada qaba/dacwoodaha waa in la siiyaa xog iyo tilmaamo dheeraad ah haddii uu codsado. SIda taageero caafimaad , mid nafsi iyo mid sharciba, oo l sir ah. Sidoo kale hoy degdeg ah; iyo adeeg kasta oo kale oo lagama maarmaan ah , sida gargaar dhanka sharciga ah.Dhammaan shaqaalaha iyo qaybta ku foogan HC-du waa inay uga soo warbixiyaan haddii kiisku yahay TKJ, xogta kaliya ee ay samayn karaan waa haddii shilku la xiriiro shaqaale ka mida ah mashruuca, nooca shilku yahay, da'da iyo jinsiga cabtaha iyo haddii badqabka cabtaha loo gudbiyay qaybta adeeg bixinta. Haddii shaqaale ka mida ah mashruuca uu ku lug leeyahay, Dhacdada waa in si degdeg ah loogu wargeliyaa la taliyaha TKJ heerka DFS iyo Iskuduwaha Barnaamijka kaas oo bixin doona tilmaamo dheeraad ah ka dib marka uu la tashado Bangiga Adduunka. Qorshaha Ka-hortagga iyo Jawaab-celinta ee KGXDh, oo loo diyaariyay in uu qayb ka ahaado HMDB, ayaa u adeegi donna bar-tixraaceedka marjac u noqda dhammaan daneeyayaasha.

**Kormeerka HMS**

12. Unugta Iskudiwadda Mashruuca , waa in ay dhisataa agabka iyo habraacyada lagu maareynayo, laguna kormeerayo waxqabadka mashruuca iyo hirgelinta heshiiska maamulka shqaalaha. Qiimeynta waxaa ku jiri kara; kormeer/indho-indheyn, hubinta goobaha mashruuca ama goobaha shaqada iyodiiwaanada maamulka shaqada, la socodka goobta waxqabadka CBS iyo warbixinada uu diyaariyay qandaraasluhu. Diiwaanka maamulka shaqada qandaraaslaha iyo warbixinnada ay tahay in dib u eegis lagu sameeyo waxaa ka mid ah kuwan soo socda: (i) tusaalaha qandaraasyada iyo xeerka anshaxa la saxiixay ; (ii) cabashooyin laga helay bulshada iyo shaqaalaha iyo xallintooda; (iii) warbixinada la xiriira dhimashada iyo shilalka, iyo tallaabooyinka sicitaan ee la qaaday; (iv) diiwaanada la xiriira dhacdooyinka u hogaansan la'aanta iyo baalmarka Xeerka Shaqada qaranka; (v) diiwaanada tababarada la siiyo shaqaalaha qandaraaska haysta, si loogu sharrxo khataraha badqabka shaqaalaha iyo tallaabooyinka ka hortagistooda.

13. Kharashka lagu fulinaayo habka maamulka shaqaalaha "LMP", waxa lagu qiyaasay lacag gaadhaysa USD327,750, muddo afar sano ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa xusid mudan in kharashkan la badbadali karo iyadoo lagu jaan goynayo wakhtiyada iyo shuruudaha mashruuca u degsan.

**Dheefsadayaasha/Ka faa'idaystayaasha mashruuca**

14. Ka faa'iideystayaasha mashruucu waxay ahaan doonaan bulshooyinka Soomaaliyeed, kuwaas oo ay ku adag tahay in ay biyo helaan, iyagoo wajahaya sababo la xidhiidha isbedelka cimilada, kororka dadka, iyo colaaddaha la xiriira biyo yaraanta. Mashruuca wuxuu bixin doontaa faa'iidooyinka qaabka helitaanka ilo biyood la hagaajiyay oo fiican, si loogu isticmaalo faa'iidooyin badan (xoolaha, beeraha), tani waxay suurtogelinaysaa suurta gelineysaa adkeysiga hab-nololeedka, iyo bixinta tababaro iyo aqoonta sida.

Ka faa'idaystayaasha mashruuca waxa ka mid ah:

i. Reer miyiga. Kuwaas oo aan haysan biyo nadiif ah oo ay ku ilaalin karaan xaaladdaha caafimaad ee noloshooda.
ii. Xoolo dhaqatada. Waa kuwo soo saara cuntada dalka, waxayna qayb weyn ka yihiin saamiga wax dhoofsiga dalka.
iii. Dumark iyo carruurta. Dhaqan ahaan iyagaa masuul ka ah biyo keenida guriga, mar walbana waxey ka keenaan meel ka durugsan guriga.
iv. Dadka magaalada ku nool. Waxey ku tiirsanyihiin ilo dhulbiyood qiima sare leh, kuwaasoo shirkado gaar ah ay ka soo saaraan meelo cufan ama aad loogu badan yahay.

**Natiijada laga Filayo Mashruuca**

15. Mashruuca Abaar-Tir wuxuu la socdaa/ la jaan qaadayaa Qorshaha horumarinta qaranka 9 ee DFS, qaab-dhismaha adkeysiga miyiga, istiraajiyada khayraadka biyaha qaranka, iyo qaab-dhismeedka iskaashiga dalka iyo Bangiga Adduunka. Ujeedka hormarinta mashruuca (UHM) *waa helitaanka joogtaynta iyo maaraynta biyo dhuleed ee xuduud dhuleedka Geeska africa.* Ujeeddada waxa loo fasiray saddex qayb/hab, sida lagu xusay hordhaca, waana tan natiijadii ka soo baxday:

a) Dheefsadayaasha awooda u helay in ay helaan biyo nadiif ah (100% meeqaa dumar ah.)
b) Bar biyoodyada la dhisay ama dib u habayn lagu sameeyay ee hadda shaqaynaya (100% meeqa bar biyood ayaa la dhisay/ la dayactiray )
c) Hay'adaha Gobolka ee ay usuurtagashay helitaanka macluumaad leysku halleyn karo ee biyaha dhulka ka hooseeya/ceelasha

16. Mashruucu wuxuu xooga saarayaa Lix Hortabin oo kala aha :
    i. Wax ka qabashada saboolnimada iyo liidanaananta
    ii. Isdhexgalka iyo iskaashiga gobolka
    iii. Usinaannta fursadaha iyo harmarinta bulshada
    iv. Joogtaynta hormarinta biyaha dhulka ka hooseeya
    v. Hormarinta khayraadka biyaha ee u adkeysan kara is badalka cimilada
    vi. Taba-barrada iyo wax ku barashada shaqada

**Habraaca maamulka shqada ee Bangiga Adduunka**

17. HMS-dani waa habkii uu mashruucu ku buuxin lahaa shuruudaha heer qaran, sidaa si le'eg ujeedooyinkii Bangiga Adduunka ee QBD, gooni ahaan "Heerka Bulsho iyo Deegaan 2 (HBD2): "shaqada iyo xaaladaha lagu shaqaynayo" Xeerarka CBS ee tilmaamaha KBA EHS iyo qaybo ka mid ah Heerka Bulshada iyo Deegaanka 4 (HBD4): "Caafimaadka iyo Badbaadada Bulshada." HMS ujeedkiisu waa in lagu hormariyo hirgelinta habka loo wajahayo sare u qaadista maareynta khatarta iyo saameynta la xiriirta shaqada iyo xaaladaha shaqaalaha ee mashruuca la soo jeediyay. Habraacu wuxuu qeexayaa qaabka sharci heer qaran iyo shuruudaha HBD2 iyo HBD4 ee lagu dabaqayo mashruuca.

18. HMS waa in lagu dabaqaa iyadoo la tixgalinayo shuruudaha sharciyada qaranka, iyadoo la tixgelinayo HBD2 iyo HBD si guud, iyo waliba HBD4. HBD2 wuxuu garwaaqsanayaa muhiimada shaqo abuurka iyo dakhli abuurista si loo yareeyo saboolnimda, iyo kobcinta dhaqaalaha . Amaahiyayaashu waxay sare u qaadi karaan xiriirada maareynta shaqaalaha iyo faa'iidooyinka horumarineed ee mashruuca, iyadoo loola dhaqmayo shaqaalaha mashruuca si cadaalad ah oo abuuraysa xaalad badqab lagu shaqeyn karo.

Ujeedooyinka ugu muhiimsan ee loo hormarinayo HMS-du waa in:
    i. La dardargeliyo badqabkagoobta shaqada.
    ii. Dardargelinta usinaanta, kala sooc la'aanta, iyo in fursadaha ay u siman yihiin shaqaalaha mashruucu.
    iii. Dufaacidda shaqaalaha mashruuca, oo ay ku jiraan shaqaalaha taagtadaran sida: haweenka, dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo kuwa soogalootiga ah, shaqaalaha qandaraaka helay iyo shaqaalaha agab-bixiyaha koowaad, sida ugu habboon.
    iv. Laga hortago qaab walba oo lagu adeegsan karo shaqaalaha la khasbay iyo shaqaalaysiinta carruurta.
    v. Taageerida qawaaniinta xorriyadda ururrada iyo gorgortanka shaqaalaha mashruuca, si waafaqsan sharciga qaranka.
    vi. In shaqaalaha mashruuca kansho ay uhelaan soo jeedinta tabashooyinka goobta shaqo.
    vii. Qeexidda haba Unugta isku Duwidda Mashruuca ay umaamuli doonaan si waafaqsan ESS2/HBD2

19. Habraaca ayaa dejiya shuruudaha iyo xeerarka shaqaalaynta ee shaqaaleysiinta ama shaqaale ku darida mashruuca. Waxa kale oo ay xadidaysaa shuruudaha iyo heerarka buuxinta iyo siyaasadaha iyo hababka la raacayo, tabaha lagu qiimaynayo khataraha iyo hirgelinta cabirro loo hoggaansami karo. HMS waxaa loo hormariyay si loo yareeyo, loona maareeyo khataraha iyo saamaynta ay ku yeelan karto shaqaalaha mashruuca iyo hubinta kala sooc la'aanta, fursadda loo siman yahay, difaaca, cadaalad kula dhaqanka, badqabka iyo xaaladdaaha lagushaqayn karo. HMS waa uu shaqaynayaa si loo fududeeyo qorshaha, diyaar-garawga iyo fulinta mashruuca. Waxaa la filayaa in HMS la cusboonaysiin doono maadaama xogta

dheeriga ah ee soo baxaysaa tahay doorsoome inta fulinta mashruuca la wado, oo ay soo galayso tirada shaqaalaha iyo shuruudaha, wakhtiga waxqabadka mashruuca iyo maarayta khatarta bulshada soo wajihi karta.

20. Qaab-dhismeed Maamulka Deegaanka iyo Bulshada "QDMDB" ayaa hagaya bad-qabka shaqaalaha, si faahfaahin dheeriya loogu helo qorshayaasha ugaarka ah. Si kastaba ha ahaatee,mashruucu waxa u uku xooga saari doonaa doonnaa arimaha la xiriira khatarada shaqada, oo ay ku jiraan khataraha, badqabka iyo khataraha amniga iyo maangalnimada ka hortaga shaqaaleysiinta carruurta. Nidaamka qandaraas bixintu dadka maxalliga ah waxay sidoo kale la macne noqon kartaa in shaqaalaha mashruucu aysan haysan qandaraas ama ay ku jiraan xaalado aan caddaalad ahayn (nasasho la'aan, mushahar aan oogto ahayn, iyo wixii la mid ah). Shaqaalaha dumarka ah waxaa laga yaabaa in lagu takooro xagga shaqada, laakiin sidoo kale waxay halis wayn ugu jiraan KGXDh, iyo qaababka kale ee TKJ. Covid-19 waxaa laga yaabaa inuu qayb kasii ahaado saamaynta fulinta mashruuca, gaar ahaan ka-qaybgalka daneeyayaasha iyo kulannada fool ka foolka ah. Habka fogaan aragu wuu xaddidnaan doonaa sababo la xiriira khad xumo iyo khibrad yari ku qotonta isticmaalka aaladda fogaan aragga. Baaxada shaqada socotaa waa mid yar, lkn shaqaalaha kor/dibadda laga keenay waxey keeni kartaa xiisad dhanka bulshada maxalliga ah, waxayna siyaadin doontaa khatarta cudurada faafa iyo khatarta tacaddiyada la xiriira galmada, Xadgudub dumarka iyo tacaddiyo kale oo laxiriira jinsiga

21. **Khataraha shaqo ku qasbidda ee soo iibsiga Soolarka:** Waxaa jira khataro ka iman karta shaqo ku qasbida shaqaalaha ee soo ee dhanka daabulida Soolarka ah. Si loo yareeyo khatarahaasi, bangigu wuxuu uga baahan yahay amaahiyayaasha inay xoojiyaan dukumeentiyada wax iibsiga oo ay ku jiraan soolarku/qaybihiisa kaladuwan sida lagu qeexay qaab-dhismaha Bulshda iyo Deegaanka ee Bangiga Adduunka. Tallaabooyinkan waxaa ka mid ah shuruudaha qandaraaska shaqada ee la iyo dib u eegista sharciga ah/ogolaashiyaha Bangiga. Shuruudaha cusub waxaa lagu dabaqi doonaa tartanka wax iibinta heer caalami iyo heer qaran labadaba iyo doorasho toos ah/qandaraas-siin toos ah oo ay ku dhex jirta baaxada codsiga.

22. Waxaa sidoo kale jira khataro la xiriira shaqada iyo xaaldaha lagu shaqaynayo oo ay ka mid tahay dhibaatayn la xiriirta galmada, shaqada khasabka iyo carruur ku shaqaaleysiinta, uhogaansanaan la'aanta sharciyada shaqada ee qaranka iyo HBD2, takoorida ka dhanka ah haweenka, kuwa laga tiro badan yahay iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh, xilliga shaqaaleysiinta. Dhammaan waa khataro maangal ah oo iman kara inta lagu guda jiro fulinta mashruuca, waxaa loo baahnaan doonaa in si qotodheer loo baaro, sida khataraha amni ee saamayn kara shaqaalaha iyo bulshda.

23. Talooyinka daneeyayaashu waxay ku jirtay HMDB, ka hortagidda KGXDh iyo qorshaha jawaab-celinta iyo dukumintiyada kale ee E&S ee 4 December 2021. Waxa ku jiray oo ka qaybqaatay 5 dumar ah iyo 22 rag ah oo ka socda dawladda, kuwa aan dawliga ahayn iyo ururada kale ee ay khusayso. Khataraha E&S iyo waxyaabaha looga dooday iyo soo jeedintii daneeyayaasha ayaa lagu diiwaangeliyay/muujiyay lifaaqa 1. La-tashiyo dheeraad ah oo gaar ahaan ku saabsan HMS-ka ayaa lala sameeyay mashaariicda kale ee Bangiga Adduunka oo ay ku jirto RCRF, mashruucan oo si dhow ula shaqeysa guddiga shaqaalaha rayidka ah, WSAB iyo mashaariicda kale ee Baanka Adduunku ka taakuleeyo arrimaha maamulka shaqaalaha. Khabiirka bulsheed ee mashruucaas ayaa dib u eegis ku sameeyay HMS ,lana wadaagay khibrado kala duwan oo ku saabsan HC-yada shaqaalaha iyo xeerka anshaxa.

2. DULMARKA SHAQAALAHA MASHRUUCA

**Shuruudaha shaqada**

24. Mashruuca waxaa soo geli doona : (i) shaqaalaha tooska ah oo ay ku jiraan shaqaalaha Unugta Fulinta Mashruuca iyo lataliyayaasha farsamada iwm. Shaqaaluhu waxay ka qeyb-qaadan doonaan wejiga fulinta ee mashruuca, qorshaynta, kormeerka, iyo la socoshada, iwm., kuwaas oo intooda badan noqon doona shaqaalahii dawlada ee jiray; (ii) shaqaalaha qandaraaska la siiyay oo inta badan la xiriira hawlaha dhismaha ee hoos yimaada qeybta koowaad; (iii) shaqaalaha saadka asaasiga ah kuwaas oo ay shaqaalaysiin doonaan shirkadaha bixiya alaabaha iyo adeegga mshruucu u baahan yahay. Shaqaalaha dhanka bulshda lama xusin, balse haddii ay shaqeeyaan waa la xusi doonaa.

25. Shaqaalaha rayidka ah ee dawladda ee ka shaqaynaya isku xirka mashruuca waxa ay ku sii jiri doonaan xeerka iyo shuruudaha heshiiska shaqo ee hay'adaha dawladda. Tilmaamaha HBD2 iyo KBA EHS ayaa lagu dabaqi doonaa,iyadoo la tixgelinayo shaqaalaha gacanta iyo badqabka shaqada (BSH).

26. Lama fili doono qulqul shaqaale oo xooggan sababo la xiriira mashruuca, iyada oo kaabeyaasha biyaha yar iyo kuwa dhexe ay dhisi doonaan shirkado wadani ah, iyaga oo u isticmaalaya shaqaalaha maxalliga ah, gaar ahaan shaqada aan xirfad u baahneyn. Waxqabadyada mashruuca ee Qaybta 1 iyo 2 waxa la filayaa in ay jiraan howlo dhisme ee madani ah oo kooban, kuwaas oo qayb ka ah hannaanka horumarinta ee ay bulshadu majaraha u hayso. Khatarta shaqada ee suurtagalka ah waxaa ka mid noqon kara: qabanqaabada aan tooska ahayn ee u dhaxaysa qandaraaslayaasha iyo shaqaalaha maxalliga ah,ilmaha iyo shaqaalaha la khasbay ee lagu arko goobaha dhismaha iyo silsilada saadka iyo sidoo kale khataraha CBS inta lagu jiro marxaladaha dhismaha iyo shaqada, sida: shuruudaha CBS waxaa laga dhigi doonaa qayb ka mid ah qandaraasyada si ay u horumariyaan qorshayaasha CBS iyaga oo ku salaysan HMS iyo HMDB. Khataraha ka faa'iideysiga galmada, xadgudubka iyo dhibaataynta galmada (KGXDh) ayaa sidoo kale suuragal ah shaqaalaha dhexdooda. Ammaanka shaqaalaha mashruuca ayaa sidoo kale noqon doona mid khuseeya, gaar ahaan meelaha aan ammaan ahayn ama meelaha ay ka jiraan colaado hoose oo u dhexeeya qabiil ama kooxo kale.

27. Ayadoo ay dhici karto in mashruucu soo iibsado qalabka soolarka cadceedda ku shaqeeya ee loo adeegsado soo saarista biyaha ayay suurtagal tahay halista ka imaanaysa shaqada khasabka ah inta lagu guda jiro howsha iibka iyo soo rarista qalabaka soolarka ama qaybihiisa.. Haddaba, si loo adkeeyo nidaamka dhimista khatarta shaqada qasabka ah, mashruucu wuxuu adkayn doonaa waraaqaha wax-iibsiga ee la xiriira soolarka ama qaybihiisa, ayadoo lagu soo darayo shuruudo ku khasbaya u tartamaha qandaraaska inuu codisigiisa ku caddeeyo u hoggaansananatiisa sharciga mamnuucaya shaqada khasabka ah; inay ku jiri doonto arritaasi heshiiska shaqo ee lala galayo qandaraaslaha guulaysta, iyo lamhuraannimada in Bankigu hubiyo arrintaas marka uu samaynayo dib-u-eegista hore. Shuruudahaas ayaa lagu dabaqi doonaa iibka tartanka caalamiga ah iyo kan qaranka iyo xulid kasta/qandaraas toos ah oo ku dhex jira codsiyada la soo gudbiyay.

28. Si loo taagereero yareynta khatarta shaqada qasabka ah, mashruucu wuxuu xoojin doonaa dukumeentiyada wax iibsiga oo ay ku jiraan soolarka. Cabiraadahaan la xoojiyay waxaa ka mid ah u qeexidda shaqada qasabka ah, shuruudaha u qalmida, shuruudaha qandaraaska shaqada ee la xoojiyay, iyo dib u eegis sharciga ah/mana jirto wax diidmo Baangi ah. Shuruudaha cusub waxaa lagu dabaqi doonaa

tartanka wax iibinta heer caalami iyo heer qaran labadaba iyo doorasho toos ah/qandaraas siin toos ah oo ku dhex jirta baaxada codsiga.

29. Shaqaalaha mashruucu waxa ay raaci doonnaan shuruudaha la xiriira sharciga qaranka iyo HBD2 iyada oo loo sii marayo HMS, oo ay ku jiraan macluumaad cad oo ku saabsan qodobada iyo shuruudaha shaqada, mabaadi'da la xiriira takoor la'aanta iyo fursadda loo siman yahay, xeerarka khuseeya ilmo ku shaqaynta iyo shaqada khasabka ah, iyo cabiraaddaha CBS.

30. HMS waxa loo maamuli doonaa qaybaha kala duwan ee shaqaalaha mashruuca sida lagu soo koobay shaxdan hoose ee 3.[1]

***Shaxda 3: Odoroska shaqaalaha la filayay in la adeegsado***

| **Heer** | **Qiyaasta tirade shaqaalaha** | **Qiyaasta tirade dumarka (30%)** | **Shaqooyinka iyo waajibaadka muhiimka ah** | **Wakhtiyaynta shuruudaha shaqada** |
|---|---|---|---|---|
| Shaqaale toos ah (la-taliyayaal) | 13 | 4 | - la taliyayaasha UIMQ iyo UFM | Ka imaanaysa bilaabida mashruuca |
| Shaqaalaha rayidka ah (labaad) | 37 | 12 | -adeegsiga UIMQ iyo UFM<br>-Bixinta shaqooyinka gaarka ah ee mashruuca<br>-hormarinta iyo hawlgelinta agabka muhiimka ah<br>-Dhisidda awoodda shaqaalaha iyo hawl-fuliyayaasha kale<br>- Samaynta nidaamyada<br>- Qabashada kormeerka iyo qiimaynta shaqada | Ka imaanaysa bilaabida mashruuca |
| Shaqaalaha qandaraaslaha: | TPM: 15<br><br>Kormeerka La-taliyaha: 11<br><br>La-taliyaha QMB: 50<br><br>SMKA: 5 | TBD | Kormeer<br><br>Doorshada goobta, warbixinta maagelinta dhismaha, kormeerka dhismaha<br><br>ka qaybgelinta bulshada<br><br>qorshaha maaraynta iyo qiimaynta khatarta amni iyo taageerida nidaamka amniga | Markii loo baahdo. |

[1]HBD2 waxaa lagu fulinayaa shaqaalaha mashruuca oo ay ku jiraan shaqaale waqti-buuxa, waqtiga-dhiman, ku meel gaarka ah, iyo xilliyeed shaqeeya.

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | Xarunta dhexe ee wicitaanka cabashada: 2 shaqaale<br><br>awood dhisidda: Shirkada latalinta 5 | | Maamulka xarunta wacitaanka cabashooyinka Abaar-Tir ,maaddaama qayb ka tahay goobta hawlgelinta muwaadinka | |
| Alaab-bixiyayaasha koowaad – waa alaab-bixiyayaash caadiga ah inta mashruucu socdo | Aan wali la qeexin | | Aan wali la qeexin | |

**Shuruudaha shaqada iyo ka qaybqaadashada haweenka**

31. Shaqaalaha tooska ah ee mashruuca guud ahaan,waxaa looga baahan doonaa inay shaqeeyaan wakhti buuxa iyo oo ku siman sanadka inta uu socdo mashruuca. La-taliyayaal iyo shaqaalaha qandaraaska haysta waxaa lagu hawlgelin doonaa baahida jirta. Shaqaalaha saadka asaasiga ah waxay ku shaqayn doonaan waxqabadyada mashruuca sida ku cad shuruudaha kooxda mashruuca iyo qandaraaslaha.
32. Iyadoo oo casharro laga baranaayo mashaariicdii la midka ahaa , mashruucu wuxuu 30% boosaska maamulka u hayn doonaa dumarka ku jira wakaaladaha ka shaqeeya maamulida biyaha dhulka. Intaa waxaa dheer, saamiga haweenka ee jagooyinka hoggaaminta ee ururada bulshada ee biyaha ka hooseeya dhulka waxay noqon doontaa 30%.

## 3. QIIMAYNTA KHATARAHA SHAQADA EE MAANGALKA AH

33. Khataraha suurtagalka ah waa kuwa la xiriira shaqada iyo xaaladaha shaqada, kuwa shaqada la xiriira, sida: takoorka, shaqada qasabka ah, ku shaqeysiga carruurta, qulqulka shaqada, GSJ/KGXDh, CBS, iyo khataraha amniga. UIMQ waxay qiimayn doontaa khatarahaas, iyadoo horumarinaysa habqorista iyo habraacyada shaqaalaysiinta, laguna dabaqayo tillaabooyinka CBS ku habboon, kadibna loo fiirinayo qodobbada khuseeya ee Xeerka Shaqada Soomaaliya (1972), Sharciga Shaqaalaha Rayidka iyo Shuruudaha Bangiga Adduunka ee waafaqsan CBS ee mashruuca.. Cabiraadaha yaraynta ee ku habboon sida ee wax looga qabanayo khataraha iman kara ayaa lagu dari doonaa dukumeentiyada wax iibsiga.

34. Kuwa soo socdaa waa khataraha ku lammaan shaqada ee la filayo inta lagu jiro muddada fulinta mashruuca. La-tashiyada agabka E&S oo dhan, waxaa lagu qeexay agabka E&S ee Mashruuca Adkeysiga Biyaha Hoose ee Soomaaliya ee 4-tii Disembar 2021, sida ku cad lifaaqa 1. Ku dhawaad 30 wakiil oo ka kala socday UDA ee ka shaqeeya biyaha iyo wakaaladaha dawladda ayaa ka soo qayb galay, waxayna codsadeen in la caddeeyo arrimo kala duwan oo ay ka mid yihiin xeerka anshaxa ee shaqaalaha. Latashiyo dheeraad ah oo gaar ahaan ku saabsan HMS-dan ayaa lala sameeyay mashaariicda kale ee Bangiga Adduunka oo ay ku jirto RCRF oo si dhow ula shaqeysa guddiga shaqaalaha rayidka ah, WSAB iyo mashaariicda kale ee Baanka Adduunku ka taakuleeyo arrimaha maamulka shaqaalaha iyo faallooyin ayaa ku jiray.

35. **Baalmaridda sharciga shaqaalaha Soomaaliyeed: Habka** Shaqaale qorista cadaalada ah waxaa laga yaabaa inay caqabad ka hortimaado iyadoo ay ugu wacan tahay dhaqanka eexda iyo tixgelinta dadka sar sare , lagana yaabo hanaanka shaqaaleysiinta ineysan udhicin si cadaaladi ku jirto oo loo wada simanyahay. Waxaa kaloo jiri kara eex ka dhan ah shaqsiyaad iyo kooxo ay ku jiraan qabiilo iyo kuwa laga tirada badan yahay, dadka baahiyaha gaarka ah la nool (DBGN) iyo haweenka. Sidoo kale, hirgelinta sharciyada shaqada gaar ahaan ku saabsan lacag bixinta degdegga ah, saacadaha dheeraadka ah, fasaxa umusha, iyo fasaxa bar-baarinta ilmaha oo ay dhici karto inaan la tixgelin.

36. **Takoorka iyo kala soocidda**: Marka loo eego talooyinka daneeyayaasha, qaar ka mid ah xirfadlayaasha iyo la-taliyayaasha (ay ku jiraan kuwa danyarta ah iyo kuwa nugul), waxaa laga yaabaa in si ula kac ah looga reebo fursadaha shaqo ee mashruuca, sababo la xiriira qabiil iyo eex, haddii aysan mashruuca ku jirin tallaabooyin gaar ah oo lagu yaraynayo khatarta. Dadka xilalka sare ka haya wasaaradaha waxa laga yaabaa inay xulashada shaqada adkeeyaan, kuwaas oo laga yaabo in ay hoos u dhigaan fursaddaha dadka danyarta ah iyo kuwa nugul oo ay ku jiraan haweenka, dadka ka soo jeeda kooxaha laga tirada badan yahay, barakacayaasha, qoysaska ay horkacayso haweenee, iyo DBGN. Dhibaataynta galmada iyo noocyada kale ee dabeecadaha xadgudubka ah ee shaqaaluhu, waxay wax u dhimi karaan badqabka iyo samaanta shaqaalaha iyo dadka danyarta ah, taas oo dhaawici karta waxqabadka mashruuca. Dhanka kale, goobaha biyaha waxaa laga yaabaa inaan loo qaabayn hab u ogolaanaya isticmaalka shaqaalaha mashruuca ee kursiga curyaanka wata iyo qalabka kale ee dhaqdhaqaaqa saacida.

37. **Khilaafka shaqada ee ka yimaada xeerka iyo shuruudaha shaqada:** Sida mashaariicda kale, waxaa suurta gal in ay soo if baxaan khilaafaat la xiriira shaqaaleysiinta . Sida laga soo xigtay waraysiyada daneeyayaasha, waxaa laga yaabaa in khilaafkao la xiriira shaqada uu ka dhex abuurmo xirfadlayaasha mashruuca (iyo la-taliyayaasha) iyo wasaaradaha ku lugta leh mashruuca (ama wakaaladaha qandaraaska haysta) ee ku saabsan gunada, saacadaha shaqada, daahinta lacag bixinta, badqabka iyo caafimaadka ee

deegaanka shaqada iyo xaaladaha lagu shaqaynayo. Taa badalkeeda, waxa jirta khatar ah in loo-shaqeeyayaashu ay kaga aarsadaan shaqaalaha iyagoo dalbanaya shuruudo shaqo oo sharci ah, ama walaac ka muujinaya xaaladaha shaqada ee badqab la'aanta, ama wixii cabasho ah ee la soo bandhigo. Xaaladahan oo kale waxa ay isu beddeli karaan xasillooni darro xagga shaqada ah oo ay ka dhalan karaan khalkhal ku yimaadda bixinta adeegga iyo dhaawaca hantida mashruuca. Ku wacyigelinta UFM iyo qandaraaslayaasha muhiimada shaqada, hababka xallinta cabashooyinka shaqaalaha iyo wadiiqada cabashooyinka ee sirta ah iyo aargoosi la'aanta ayaa lagu dari doonaa Xeerka Anshaxa. Dabagal iyo cunaqabateyn xooggan oo wakhtiyaysan ayaa laga yaabaa in la sameeyo haddii aargoosi dhaco.

38. **Qulqulka shaqo doonka:** Qulqulka shaqaaluhu wuxuu ahaan doonaa mid yar, kaabayaasha biyaha waxaa dhisi doona shirkado maxalli ah iyo xirfadleyda dibadda ka yimid, kuwaas oo laga yaabo inay bulshada la deggan yihiin ama hoyga shaqaalaha ku nool yihiin. Qulqulka shaqadu wuxuu u horseedi karaa isku dhac xagga khayraadka bulshada, faafitaanka cudurrada faafa (oo ay ku jiraan COVID-19 iyo HIV/AIDS), isbeddel dhaqan/dabeecad iyo TKJ/KGXDh. Si loo yareeyo qulqulka shaqada, mashruucu wuxuu uga baahan doonaa qandaraaslayaasha inay doorbidaan inay shaqaalaha aan xirfada lahayn ka qortaan bulshda deegaanka iyo meelaha u dhow. Dhammaan shaqaalaha qandaraaska haysta waxaa looga baahan doonaa inay saxiixaan XAN ka hor intaanay shaqada bilaabin, oo ay ku jirto qodobo wax looga qabanayo khatarta KGXDh.

39. **Ilmo ku shaqaynta iyo shaqada khasabka ah:** Soomaaliya waxa ay ku jirtaa 10-ka dal ee ugu horreeya adduunka ee ay ka jiraan khatarta ugu badan ee ilmo shaqaalaysiinka. Ku dhawaad 40% dhammaan carruurta ay da'doodu ka yar tahay 15 sano ayaa lagu shaqeeyaa guddaha Soomaaliya, halkaas oo ay ka dhacaan qaababka ugu xun ee ilmo shaqaalaysiinta , siday laga soo xigtay UNHCR.[2] Khatarta ilmo ku shaqaynta iyo shaqada qasabka ah waa suurtogal, maadaama mashruucu shaqaaleysiin doono shaqaale aan xirfad lahayn, waxaana laga yaabaa in carruurta loo isticmaalo shaqooyin yaryar oo bilaa mushaar ah inta shaqada dhismaha iyo dayactirku socdo. Si kastaba ha ahaatee, talaabooyin muujinaya si looga hortago tan ayaa kor lagu tilmaamay.

40. **Hubanti La'aan Amni:** Soomaaliya waxaa ka jira khatar amni oo baahsan oo heerar kala duwan leh,kuwaas oo ay wajahayaan bulshooyinka, qandaraaslayaasha, iyo shaqaalaha mashruuca. Goobaha ay AS maamusho waxba lagma fulin karo, waa in si taxadar leh loo qiimeeyo oo meelo kale loo maareeyo. Isticmaalka ciidamada amniga ha ahaato xiliga safarka ama xiliga la joogo goobta shaqada, waa in loo fuliyaa si waafaqsan Qoraalka Dhaqanka Wanagsan ee Bangiga Adduunka ee dhanka Qiimaynta iyo Maareynta Khatarta iyo Saamaynta Isticmaalka hay'adaha amniga. Qorshaha qiimaynta khatarta amniga mashruuca iyo maareynta ayaa la diyaarin doonaa ka hor dhaqangelinta mashruuca, iyadoo la ogaanayo meelaha suurtagalka ah ee ay tahay in laga shaqeeyo. Ka dib hawshaas, waxaa lagu dabaqi doonaa qodobbada CBS ee loogu talagalay amniga shaqaalaha oo ay ku jiraan tallaabooyin gaar ah oo loogu talagalay shaqaalaha mashruuca iyo qandaraaslayaasha, waxaana loo gudbin doonaa qandaraasyada, waxaana lagu hirgelin doonaa si aqoon ku dhisan. Qiimeyn qoraal ayaa la samayn doonaa si loo hubiyo badqabka ka faa'idaystayaasha iyo shaqaalaha mashruuca ,kuwa tooska ah iyo kuwa dadbanba.

41. **Gacan-ka-hadal ku Salaysan Jinsi/ka faa'iidaysi Galmeed, Xadgudub iyo Dhibaatayn (TKJ/KGXDh):** Haweenka shaqeeyawaxaa laga yaabaa in ay dhibbane u noqdaan TKJ/KGXDh inta lagu jiro habka qorista

[2] https://www.businessinsider.com/countries-worst-child-labor-risks-2012-1?IR=T

shaqaalaha, maadaama raga ubadanyihiin maamulida habka shaqaalaynta inta badan dhammaan xafiisyada dawladda iyo shirkadaha maxaliga ahba. Marka la eego awoodda yar ee dawladdu ay ku fuliso xeerarka ka dhanka ah dhaqamada takoorka ee goobta shaqada, suurtagalnimada dumarku dhibaato kula kulmi karaan ayaa saraysa. Ku tagri-falka suurtagalka ah ee awoodda iyo ka faa'iidaysiga dumarka ee dhanka galmada ee shaqada dhexdeeda, gaar ahaan xilliga qorista shaqaalaha, , waxayna horseedi karaan xadgudub. Shaqaalaha dhismada iyo kuwa mashruuca ee booqanaya iyo la joogitaanka bulshada ayaa keeni karakhatar, gaar ahaan meelaha biyaha laga dhaansado ee haweenka iyo habluhu tagaan. U safrida masaafo dheer si loo gaaro ilaha biyaha loo sameeyay ama laga dhaansado biyaha iyo ka qaybgalka shirarku waxay kordhin kartaa beegsiga, ka faa'iidaysiga, iyo waxyeelada shakhsiyaadka aan lammaanaha lahayn, oo ay ku jiraan kooxaha hubaysan / ciidamada / shakhsiyaadka iyo shakhsiyaadka kale ee xiriirka la leh mashruuca.

## 4. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN SHARCIGA SHAQADA: MUDDADA IYO SHURUUDAHA

42. Dastuurka kumeelgaarka ah ee dawlada federaalka Soomaaliya (la ansixiyay August 2012),wuxuu ina siinayaa qaab-dhismeedka sharciyeed oo la xiriirta arimaha shaqada. Xeerka shaqada Soomaaliya (sharciga qodobka 65, la ansixiyay 1972), waa sharciga shaqada ee gaarka ah ee xukuma dhamaan dhinacyada shaqada iyo xaaladdaha shaqada ku gaddaaman, kaas oo khuseeya heshiiska shaqada, wakhtiga iyo shuruudaha, gunnada, iyo CBS, ururada ganacsiga iyo awoodda shaqaaaha. Qodobbada Xeerka Shaqadu waxay quseeyaan dhammaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha idil ahaan goobaha mashruuca, waxayna quseeyaan dhammaan shaqaalaha mashruuca. Xeerka shaqadu waa mid balaaran oo ay ka mid yihiin HBD2, laakiin waxaa jira firaaq soo gala dhaqangelinta sharcigaas (eeg qaybta VIII ee qaab dhismeedka dastuurka). Adeegga guud ama hay'adaha dawliga ah waxaa maamula sharciga shaqaalaha rayidka ah (Xeer Lr. 11).

43. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee Federaalka (WSAB) ayaa mas'uul ka ah siyaasadda shaqada iyo qaab-dhismeedka sharciyeed. Wasaaradda shaqada ee dawlad goboleed kasta waxay kormeertaa dhaqangelinta xeerka shaqada, oo ay ku jiraan kormeerka shaqada. Halka shanta dawlad goboleed leeyihiin wasaaradaha shaqada, kaliya Puntland ayaa leh saddex kormeerayaal shaqaale,kuwaas oo hoos yimaada Wasiirka. Kuwo kale ma laha kormeer shaqo oo shaqaynaya.

44. Hoos waxaa ku qoran liiska qodobbada khuseeya Xeerka Shaqada ee ku saabsan muddada iyo shuruudaha shaqada, gunnada, dhimista, iyo faa'iidooyinka:

a. Nuxurka heshiiska shaqsiga ah ee shaqada (qodobka 46aad)
   - Iyadoo la raacayo Xeerkan ama xeerjajabka lagu sameeyay halkan, qandaraaska shaqsiyeed ee shaqo ee qoran waa inuu qeexaa kuwan soo socda: (a) magaca iyo magaca aabbaha ee shaqaalaha; (b) cinwaanka, shaqada, da'da, iyo jinsiga shaqaalaha; (c) magaca iyo ciwaanka loo shaqeeyaha; (d) nooca iyo muddada heshiiska; (e) saacadaha iyo goobta shaqada; (f) joornaatada/mushaharka la siinayo shaqaalaha; (g) habraaca laalida ama joojinta heshiiska.

b. Wargelinta Shaqo ka joojinta (Qodobka 50aad)
   - Dhinacayada qandaraasku midkoodna ma laali karo heshiiska shaqada, iyagoo bixin ogeysiis qoran sida soo socota:
   (a) Codsiga waxay ku soo gudbinayaan muddo aan ka yarayn 10 beri haddii arinku yahay shaqaalaha xoogsatada ah.
   (b) Codsiga waxay ku soo gudbinayaan muddo aan ka yarayn 10 30 beri, haddii arinku yahay shaqaalaha aan xoogsatada ahayn:
   (c) Ogeysiis looma baahna haddii muddada qandaraasku aysan dhaafin bil.

c. <u>Gunnada ugu yar</u> (Qodobka 72aad)
   - Iyadoo la tixgalinayo xaaladaha dhaqaale iyo bulsho ee dalka (iyo sida ku cad qodobka 71aad),gunnada ugu yar ee koox kasta oo shaqaale ah, waxa lagu go'aamin karaa digreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda, marka uu soo jeediyo Wasiirka, ee uu dhagaysto guddiga dhexe ee shaqaalaha, iyo ansixinta golaha xoghaynnada.

d. <u>Saacadaha shaqada</u> (Qodobka 85aad, 86aad)

- Saacadaha shaqada ee caadiga ah ee shaqaaluhu, waa in aanay dhaafin siddeed saac maalinkii ama 48 saac todobaadkii.
- Saacadaha shaqada ee ka dheeriga ah saacadaha caadiga ah ee shaqadu ,waa in aanay ka badnayn 12saac todobaadkii, waxayna xaq u yeelan doonaan shaqaalahaasi in loo kordhiyo saamiga mushaarka, taas oo aan sinaba uga yaraan doonin 25% mushaarka caadiga ah.

e. <u>Nasashada todobaadlaha ah</u> (Qodobka 96aad)
   - Shaqaale kastaa wuxuu xaq u yeelan doonaa hal maalin oo nasasho ah toddobaad kasta, taasoo caadi ahaan noqon doonta Jimcaha. Waxay ka koobnaan doontaa ugu yaraan 24 saacadood oo xiriira toddobaad kasta.
   - Shaqaaluhu waxa kale oo ay nasan doonnaan maalmaha dabaaldega guud ee Dawladdu aqoonsan tahay.

f. <u>Fasaxa sanadlaha ah</u> (Qodob 97aad)
   - Shaqaaluhu waxay xaq u yeelan doonaan 30 maalmood oo fasax ah oo la siinayo mushaaroodii sannad kasta.
   - Xaq u lahaanshaha fasaxa iyadoo lacag la siinayo sida caadiga ah waa in la helaa ka dib sanad buuxa oo shaqo joogto ah.

g. Dheefaha doolka (Qodobka 73aad)
   - Loo shaqeeye kasta ayaa bixin doona (a) hoy, marka shaqaalaha looga baahan yahay inuu ka maqnaado hoygiisa caadiga ah; (b) cunto bilaash ah oo la siiyo shaqaalaha, ama gunnada nolol maalmeedka oo meel loo saaro; (c) Gaadiidka bilaashka ah oo ay ku tagaan, loogana soo qaado goobta shaqada,waa marka shaqaalaha looga baahan yahay inuu ka shaqeeyo magaalo ama xaafad ka fog gurigiisa caadiga ah.

h. Gunno yaraynta (Qodobka 82aad)
   - Wax yarayn ah (mushaharka) oo aan ka ahayn kuwa uu dhigayo xeerka shaqaalah ama xeerjajabka lagu sameeyay halkan, sharci kale ama heshiiska shaqada waa in aan lagu samayn gunnada shaqaalahu uu qaato,marka laga reebo dib u gudidda lacag horis uu uga qaatay loo shaqeeyaha ( amaanday), kuna cad qoraal.

i. <u>Dheefta Geerida</u> (Qodobka 53aad)
   - Haddii ay dhacdo in shaqaale uu geeriyoodo inta lagu jiro muddada heshiiska shaqada, loo shaqeeyuhu waa inuu siiyaa dadka dhaxalkiisa leh, lacag aan ka yarayn 15 maalmood gunadii uu qaadanayay oo ah dheefta dhimashada ah, si adeegyada aaska loogu maamulo.

j. Filashada uur iyo kalkaalinta Hooyada (Qodobka 91aad)
- Xaq ayay haweenku yeelan doonaan, marka la soo bandhigo shahaado caafimaad oo tilmaamaysa taariikhda la filayo in ay dhasho. Waxay heli doontaa ilaa 14 toddobaad oo fasax umul ah oo leh mushaar buuxa, kaas oo ugu yaraan 6 toddobaad kusii jiri doonta fasaxa dhalmada ka dib. Xaquuqdan oo dhan waxay heli doontaa marka ay shaqaynaysay ugu yaraan lix bilood iyada oo aan wax dhibaato ama cabaro ah, sida: goysmo iyo dayacaad wakhti, aanu ka iman dhinaceeda, marka laga reebo jirro la xaqiijiyay..

k. Fasaxa umusha (Qodobka 92aad)
   a. Haweenayda nuujinaysa ilmaheedu waxay leedahay xuquuq gaar ah, sida: ugu badnaan hal sano oo fasax ah,ka dib taariikhda dhalashada ilmaha. Maalintiiba laba nasasho oo halkii nasasho uu saacad yahay ayay heli doontaa. Nasashada waa in lagu tiriyaa saacadaha shaqada, waana in lacagta lagu bixiyaa si waafaqsan xeerka shaqaalaha.

45. 45. Soomaaliya waxay xubin ka ahayd Ururka Shaqaalaha Adduunka (UShA) tan iyo 1960[kii]. Dalku wuxuu ansixiyay 6 ka mid ah 8 axdi oo aasaasiga u ah Ururka Shaqaalaha Adduunka (UShA). Axdiyadaas waxa ka mid ah:
    - *Axdiga Shaqada Khasabka ah (Lr.29) (la ansixiyay 1960*).
    - Xoriyadda Ururinta iyo Ilaalinta Xuquuqda Abaabulka Heshiisyada (Lr. 87) (la ansixiyay 2014).
    - Xuquuqda Abaabulka iyo Heshiiska gorgortanka Wadareed (Lr.98) (la ansixiyay 2014).
    - Baabi'inta Axdiyada Shaqada Khasabka ah (Lr. 105) (la ansixiyay 2014).
    - Axdiga Takoorka (Shaqada iyo Shaqaalaynta) (Lr. 111) (la ansixiyay 1961); iyo
    - Qaababka ugu xun ee Axdiga Ilmo ku shaqaynta (Lr. 182) (la ansixiyay 2014).

46. Kuwa soo socda ayaa la ansixiyay April 2021:
- Axdiga Gacan-ka-hadalka iyo Dhibaataynta, 2019 (Lr. 190).
- Axdiga Heerarka Shaqada ee Caalamiga ah, 1976 (Lr. 144).
- Axdiga Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada, 1981 (Lr. 155).
- Hormarinta Qaab-dhismeedka Axdiga Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada, 2006 (Lr. 187).
- Axidga shaqaalaysiinta muhaajiriinta (dib-loo-eegay), 1949 (Lr. 97).
- Axdiga Shaqaalaha muhaajirka (Qodobbada Dheeraadka ah)., 1975 (Lr. 143).
- Iyo Axdiga Wakaaladaha Shaqada ee Gaarka loo leeyahay, 1997 (Lr. 181).

## 5. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN SHARCIGA SHAQADA: CAAFIMAADKA IYO BADQABKA SHAQAALAHA

47. Xeerka Shaqaaluhu waxa uu qeexayaa difaacida khatarta shaqaalaha, habraaca ogeysiiska shilalka shaqada shaqada, baahiyaha caafimaadka goobta iyo u gudbinta shaqaalaha dhaawacma cusbitaalada ku habboon iyo qodobo kale. Hoos waxaa ku yaal liiska qodobbada khuseeya ee Xeerka Shaqada ee ku saabsan Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada (CBS):

48. Difaac khataraha suuragalka ah (Qodobka 101aad)

✓ Dhammaan warshadaha, meelaha aqoon-is-weydaarsiga iyo goobaha kale ee shaqada, waa in loo dhisaa, loo habeeyaa, loo qalabeeyaa, loona maamulaa si shaqaalaha looga ilaaliyo khataraha imaan kara. Sidaa Owgeed awgeed, loo-shaqeeyuhu waa inuu:
  - Joogteeyaa xaaladaha badqabka iyo nadaafada, si looga fogaato khataraha caafimaadka ee shil ama dhaawac leh.
  - Qaadaa tillaabooyin ku habboon, si looga hortagto ku dikhowga goobaha shaqada ee ay dhalin karaan gaasaska sunta ah, uumiga, habaaska, qiiqa, ceeryaamada, iyo waxyaalaha kale ee kale ee khatarta leh.
  - Sameeyaa musqulo ku filan, kuna habboon isticmaalka goobta shaqada, lehna tasiilaad wax lagu nadiifiyo. Kuwaas oo u kala soocan ragga iyo dumarka shaqeeya.
  - Bixiyo biyo la cabbo oo ku filan oo ay si fudud u heli karaan dhammaan shaqaalaha.
  - Sameeyo qalabka dab-damiska iyo shaqaale loo tababaray isticmaalkooda.
  - Bixiyo qalabka lagama maarmaanka ah u ah badqabka ee mashiinada iyo warshadda rikiban.
  - Ilaaliyo xaaladda wanaagsan ee mashiinada, korantada iyo qalabka warshada, si loo xaqiijiyo badqabka shaqaalaha.
  - Sameeyo qalabyo ku habboon qaadista qashinka iyo daadinta biyaha haraaga ah.
  - Qaado taxaddarrada lagama maarmaanka ah, si loo ilaaliyo nolosha, caafimaadka, iyo anshaxa shaqaalaha.
  - Hubi in shaqaaluhu helaan tilmaamaha lagama maarmaanka u ah ka hortagga shilalka warshadaha, cudurrada shaqada, iyo khataraha kale ee ku jira shaqadooda.
  - Ku dheji qaybo muuqda ee goobta shaqada, ogeysiisyo si cad u sharaxaya waajibaadka shaqaalaha, si ay u ilaaliyaan xeerarka badqabka, iyo calaamadaha muuqda ee tilmaamaya meelaha khatarta ah.
  - Siiyo shaqaalaha qalabka iyo agabka ee ku habboon ee ay isaga ilaalin karaan khatarta ka jirta goobta shaqada iyo shaqada ay qabtaan; iyo
  - Qaado tillaabooyin aad ku siinayso gargaarka degdegga ah ee lagama maarmaanka u ah xaaladaha degdegga ah shaqaalaha gala shilalka ama ku xanuunsada inta lagu jiro shaqada.

Ogeysiinta shilalka ka iman Kara Warshadaha iyo cudurrada shaqada (Qodobka 102aad)

- Loo shaqeeyuhu waa inuu isla markiiba ogeysiiyaa Kormeeraha Shaqada ee awooda u leh dhammaan shilalka ka dhasha dhaawaca keena dhimashada iyo cudurrada shaqada. Shuruudaha WSDB ayaa sidoo kale ogeysiin doona habkan.

Tasiilaadka Caafimaad (Qodobka 103aad)

- Qaadasho walba oo shaqaalayn caadi ah oo ka badan toban shaqaale oo jooga hal xarun waa inay ilaaliyaan qalabka gargaarka degdega ah.

Gudbinta shaqaalaha dhaawacmay iyo kan xanuunsan (Qodobka 104)

- Waxaa waajib ku ah loo-shaqeeyaha inuu fududeeyo, ku bixyo kharashkiisa gaarka ah, gaynta cusbitaalka ugu dhow shaqaale kasta oo dhaawacma ama buka oo aan isla goobta lagu daweyn karin , marka loo fiiriyo qalabka la heli karo.

49. Xeerka Shaqada Soomaaliya ee dib loo eegay waxa uu xooga saarayaa shuruudaha CBS. Waxay ka dhigaysaa Agaasimaha Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada (CBS) inuu mas'uul ka noqdo diiwaangelinta jirrabka iyo khatarta, xeeraka nidaameedka iyo kormeerka dhammaan goobaha shaqada iyo la socodka ama fulinta u hoggaansanaanta Xeerka Shaqada iyo sharci kasta, oo ilaa xad nidaamiya badqabka, caafimaadka, iyo daryeelka goobaha shaqada. Qaybta VI ee Qabyoqoraalka Xeerka Shaqada ee dib loo eegay, waxa ay daboolaysaa maamulka shilalka shaqada, bixinta dhaawacyada iyo cudurada goobta shaqada, waajibaadka guud ee loo shaqeeyaha ee ku wajahan CBS, shuruudaha caymiska, waajibaadka guud ee shaqaalaha, taageerada caafimaadka, magdhowyada, dembiyada, iyo ganaaxyada iwm.

50. Maqnaanshaha Xeerka Shaqada Soomaaliya ee dib loo eegay lana ansixiyay iyo hababka fulinta ee shaqaynaya (kormeerka iyo maxkamadaha), Awoodda ay dawladdu u leedahay in ay si waafi ah ugu xukunto qodobada HMS, waa mid xaddidan. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ayaa wax ka qaban kara cabashooyinka shaqaalaha rayidka ah ee ku eg cayrinta xaqdarada ah/ aan sharciga ahayn iyo WSAB oo door ku leh shaqaalaha aan rayidka ahayn.

6. DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN SHARCIGA SHAQADA: TAKOORKA IYO XADGUDUBKA

**Qodobada xeerarka Soomaaliya**

51. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya ayaa dhigaya in “dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan haweenka, ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudubka galmada, kala soocidda, iyo takoorka goobta shaqada. Sharci kasta iyo caaddo kasta oo shaqada ah waa in waafaqdaa sinnaanta jinsiga ee goobta shaqada” (Qodobka 24-5aad). Kuwa soo socda waa qodobbada la xiriira Xeerka Shaqada:

52. Filashada iyo kalkaalinta Hooyada (Qodobka 91aad)

Shaqaale dumar ah lagama saari karo shaqada inta ay uurka leedahay, sida lagu caddeeyey shahaado caafimaad, ilaa dhamaadka wakhtiga fasaxa ee lagu sheegay faqradda xigta ama ilaa ilmuhu ka gaaro 1 sano.Sida la sheegay, xeerarkaan laguma dabaqayo kiisaska soo socda:

- Joojinta waxqabadka hawsha ay haweenayda shaqaalaha ahi ku shaqaynayso; iyo
- Dhamaystirka shaqada ay haweenayda shaqaalaha ahi ay qabanaysay ama joojinta xiriirka shaqada marka uu dhamaado mudadii loo cayimay.

53. Hoos waxaa ku qoran liiska qodobada xeerka shaqada ee ilmo-ku-shaqaaynta iyo shaqada khasabka ah:

a. Shaqada la mamnuucay (Qodobka 90aad)
   - Erayga "carruur", waxaa loola jeedaa dad (lab ama dheddig ah), oo aan gaarin da'da 15 sano. Ereyga "qof da’yar", macnihiisu waa: kuwa gaaray da'da 15 sano,laakiin aan gaarin da'da 18 sano.
   - Marka da'da aan la hubin, ra'yi ama fikir caafimaad oo la xiriira shaqaalaha waa in la helaa.

b. Sharcidarrada carruur shaqaalaysiinta (Qodobka 93aad)
   - Waa inay noqotaa sharcidarro in la shaqaalaysiiyo carruur da’doodu ka yar tahay 15 sanno, sida la sheegay xadidaadan da’da laguma dabaqi doono:
     (a) Ardayda tagaysa dugsiyada dadwaynaha iyo kuwa ganacsiga ee la kormeero ama tababbarada aqoon-korosiyada aan dheef raadiska ahayn.
     (b) Xubnaha qoyska loo shaqeeyaha iyo qaraabadiisa, hadday la nool yihiin isaga oo uu kaalmeeyo oo looga shaqaalaysiiyo shaqada amarkiisa oo ay qabanayaan hawl aan cid kale ka shaqayn.

c. Da'da ugu yar ee noocyada shaqada qaarkood (Qodobka 94aad)
   - Da'da ugu yar ee looga shaqayn karo markabka korkii, lana qabanayo shaqada jarjare biraha ama alaabta ama kaydiyaha alaabta ama shaqada dhulka hoostiisa ee meelaha laga qodo dhagaxa ama macdanta, waa inay ahaataa 18 sano. Sida la sheegay, da'da ugu yar ee shaqada kale ee maraakiibta (ay ku jiraan sida markab kalluumaysi), waxay noqon doontaa 15 sano.
   - Da'yarta ka yar 16 sano waa in aan laga shaqaaleysiinin shaqada lagu sameeyo xargaha lusha ama jaranjarada la qaadi karo ee la xiriira dhismaha, duminta, joogtayta, ama dayactirka dhismayaasha.

d. Xoriyadda shaqada (Qodobka 6aad)
   - Waajibinta ama khasbidda shaqo waa ay reeban tahay nooc kasta oo ay tahay.

**Qodobada Bangiga Adduunka**

54. **Shuruudaha Tilmaamida Bad-qabka Shaqaalaha:** Tallaabooyinka la xiriira CBS waxaa lagu dabaqi doonaa mashruuca. Tallaabooyinka CBS waxaa ku jiri doona shuruudaha HMS, waxayna tixgelin doonaan Tilmaamida Guud ee Caafimaadka iyo Badqabka Deegaanka (TGCBD), Tilmaamaha Guud ee CBD, iyo Dhaqanka Wanaagsan ee Warshadaha Caalamiga ah (DWWC)). Shuruudaha CBS ee lagu dabaqi karo mashruuca waxa lagu dejiyay HMDB iyo Lifaaqa 4

55. **Hagidda iyo Usinnaanta Fursadaha Shaqo:** Go'aannada la xiriira shaqaalaynta mashruuca laguma salayn doono sifooyinka shakhsi ahaaneed ee aan la xiriirin shuruudaha shaqada ee asalka ah. Shaqaalaynta shaqaalaha mashruucu, waxa ay ku salaysnaan doontaa mabda' ah fursadada loo siman yahay ee ku dhisan cadaalad ku dhaqanka, mana jiri doonto takoor ku salaysan sifooyinka shakhsi ahaaneed ee aan la xiriirin shuruudaha shaqada ee aasaasiga ah, iyada oo la tixgelinayo dhinac kasta oo xiriirka shaqada ah, sida: qorista iyo qaadashda, magdhowyada (ay ku jiraan gunnada iyo dheefaha/faa'idooyinka ), xaaladaha shaqada iyo shuruudaha helitaanka tababbarka, layliga shaqada, dallacaadda, joojinta shaqada, hawlgabka, ama dhaqamada ama caadooyinka anshaxmarinta. HMS waxa uu dejinayaa tillaabooyin lagaga hortagayo ee wax looga qabanayo dhibaataynta, cabsigelinta, ka faa'idaysiga xoogga iyo aqoonta shaqaalaha . Haddii sharciga qaranku aanu waafaqsanayn farqadan, mashruucu waxa uu raadin doonaa in uu u fuliyo waxqabadyada mashruuca si waafaqsan shuruudaha farqadan ilaa iyo inta suurtogalka ah.

56. **Hagitaanka iyo ka wacyigelinta Tacaddiyada ka dhanka ah Jinsiga:** Mashruuca ayaa qaadi doona tallaabooyinka ku habboon ee ilaalinta iyo caawinta, si wax looga qabto baylahda shaqaalaha mashruuca, oo ay ku jiraan kooxo gaar ah oo shaqaalaha ka mid ah, sida: haweenka, dadka naafada ah, shaqaalaha soo galootiga ah/muhaajiriinta iyo carruurta (gaadhay da'da shaqada si waafaqsan HBD). Tallaabooyinka qaar ayaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto keliya waqtiyo gaar ah, iyadoo ku xiran duruufaha shaqaalaha mashruuca iyo nooca nugeylka/baylahda.

57. **Waciyigelinta Shaqaaleysiinta Carruurta Da'da Yar:** Mashruucu waa inuu shaqaalaysiiyaa keliya dadka da'doodu tahay 18 jir iyo wixii ka weyn si taxadaro cabiraad leh ku fadhida.

*Shaxda 4: Falanqaynta firaaqa u dhexeeya sharciga Soomaaliya iyo heerarka Bangiga Aduunka*

| HBD 2: Shaqada iyo Xaaladaha Shaqaalaha | | | |
|---|---|---|---|
| QBD Ujeedooyinka | Sharciyada Qaranka iyo Shuruudaha | Firaaq uu ku jiro fulinta | Waxqabadyada lagu taliyay |
| Ujeedooyinka HBD 2:<br><br>a. Sare u qaadida caafimaadka iyo badqabka goobta shaqada.<br><br>b. Sare u qaadida cadaalad kula dhaqanka, takoor li'ida, iyo fursadaha loo siman yahay ee shaqaalaha mashruuca..<br><br>c. Si loo ilaaliyo shaqaalaha mashruuca, oo ay ku jiraan shaqaalaha nugul sida haweenka, dadka naafada ah, carruurta (da'da shaqada, si waafaqsan HBD) iyo shaqaalaha soogalootiga ah, shaqaalaha | Dastuurka ku meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Qodobka 14aad wuxuu dhigayaa inaan qofka loo geysan karin addoonsi, adeegsi shaqo, ka ganacsi, ama xoog ugu shaqeysi ujeedo kasta.<br><br>Qodobka 24.5 wuxuu dhigayaa in dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan haweenka, ay leeyihiin xuquuq gaar ah, taas oo ka ilaaliyo xadgudubka galmada, kala soocidda, iyo takoorka goobta shaqada. Sharci kasta iyo dhaqan kasta oo shaqadu waa inuu u hoggaansamaa sinnaanta jinsiga ee goobta shaqada.<br><br>Xeerka Dambiyada Galmada ee Puntland 2016, ayaa mamnuucaya fara-xumaynta. Ka ganacsiga dadka: Qofna lagama yaabo in lagu sameeyo addoonsi, adeegsi, ka ganacsi ama dembiga shaqo ku khasbidda.<br>Sharci kasta oo shaqaaluhu waa inuu waafaqaa sinnaanta jinsiga. | Xeerka cusub ee shaqada, oo wax ka beddelaya xeerkii 1972, weli lama gudbin.<br>Fulinta qodobbada hadda jira, waxaa laga yaabaa ku dhaqankoodu inuusan xoogganaan<br><br>Wareegto kasoo baxday Somaliland iyo sharci ka soo baxay Puntland oo mamnuucaya gudniinka fircooniga ayaa la diyaariyay. | a. Mashruucu ma ogolaan doono wax shaqaale Khasab ah, taas waxaa lagula socon doono dib u eegista qandaraasyada qoran iyo heshiiska shaqaalaha. UIMQ/UFM waxay yeelan doonaan mas'uuliyadda guud, si ay ula socdaan hirgelinta HMS<br><br>HMS waxa ay qeexaysaa habka wax looga qabanayo cabashada shaqaalaha; iyo ka-hortagga KGXDh iyo qorshaha ka falcelinta oo bixiyaa tixraaca wadooyinka kiisaska GSJ (eeg lifaaqyada) |

| | | | |
|---|---|---|---|
| qandaraasleyda ah, shaqaalaha bulshada iyo shaqaalaha saadka aasaasiga ah, sida ku habboon.. | Xil ka qaadista Uurleyda. Dhammaan haweenka waxay xuquuq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo takoorka. | | |
| d. Si looga hortago isticmaalka dhammaan noocyada shaqada khasabka ah iyo ilmo-ku-shaqeysiga . | Xeerka shaqada ee 1972[kii] la soo saaray, wuxuu dhigayaa in dhammaan qandaraasyada shaqaalaynta ay ku jiraan a) nooca iyo muddada qandaraaska; b) saacadaha iyo goobta shaqada; c) gunnada la siinayo shaqaalaha; iyo c) habka laalida ama joojinta qandaraaska. Intaa waxaa dheer, dhammaan qandaraasyada waa in loo gudbiyaa kormeeraha shaqada ee awooda u leh ansixinta kahor. | Kormeerayaasha shaqaaluhu uma shaqeeyaan shaqadan Inta badan DGX ma laha kormeerayaal shaqo oo aad bay ugu hooseeyaan dhanka aqoonta iyo xirfadda. Halka ay ka jiraan, waxay mudnaanta siiyaan arimaha ugu muhiimsan markaas. | Qandaraasyada dhammaan shaqaalaha waxaa kormeeri doona, addeecad awgeed UFM. Mashruucu wuxuu hirgelin doonaa habka cabashada shaqaalaha, si loo saxo tabashooyinka goobta shaqada. Eeg Qaybta XIII. |
| e. In la taageero mabaadi'da xorriyadda ururrada iyo gorgortanka wadajirka ah ee shaqaalaha mashruuca si waafaqsan sharciga qaranka. | Xeerka Shaqada ee 1972. Loo shaqeeyaha waxaa ku waajib ah inuu qaado tallaabooyin ku filan oo caafimaadka & badbaadada shaqaalaha kana ilaalinta khataraha la xiriira, oo ay ku jiraan bixinta deegaan shaqo oo nabdoon oo nadiif ah iyo goobo shaqo oo si fiican loo qalabeeyey, loo dhisay, loona maamulay oo leh tasiilaadka fayadhowrka, biyaha iyo agabka kale ee aasaasiga ah.. | N/A | Mashruucu waxa uu dabaqi doonaa talaabooyinka maaraynta caafimaadka iyo badqabka shaqada ee waafaqsan xeerka KBA ee Tilmaamida Guud ee Caafimaadka iyo Badqabka Deegaanka (TGCBD) ee CBS |
| f. Si loo siiyo shaqaalaha mashruuca habab la heli karo si kor loogu qaado wacyiga goobta shaqada. | Xeerka Shaqaalaha ee 1972. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay soo gudbiyaan cabashooyinka loo shaqeeyahana waa inuu siiyaa cabashooyinka tixgelin saxda ah. | N/A | Habka cabashada shaqaalaha ayaa diyaar u ah dhammaan shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraasleyda ah si ay u hagaajiyaan tasiilaadka wacyiga goobta shaqada. Eeg Qaybta XIII. Helitaankeeda iyo shaqaynteeda waxaa kormeeri doona UFM. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Xeerka shaqada ee 1972. Gunnadu waa inay ahaadaa mid ku filan marka loo eego tayada iyo tirada shaqada la dhiibay waana inay noqotaa mid ka maran takoor ku saabsan da', jinsi iyo dhinacyada kale..<br><br>Tirada ugu badan ee saacadaha shaqada todobaadkii waa 8 saacadood maalintii iyo 6 maalmood todobaadkii. | Haweenka waxaa ka mamnuuc ah in laga shaqaaleysiiyo shaqada habeenkii, iyo noocyada gaarka ah ee shaqada ee laga mamnuucay haweenka waxaa lagu qeexi karaa wareegto.<br>Ma jiro qodobbo ku saabsan ilaalinta xuquuqda guriga shaqaalaha. | Mashruucu wuxuu si buuxda u raacayaa sharciga qaranka iyo BA HBD 2. Wixii cabasho ah ee ka soo baxa habka cabashada shaqaalahana waa la sheegi doonaa. |
| | Xeerka Shaqada ee 1972. Shaqooyinka qaar ayaa loo arkaa khatar iyo caafimaad darro waana ka mamnuuc haweenka iyo da' yarta (oo lagu qeexay da'da 15-18). Tan waxaa ka mid ah qaadista miisaanka culus ama shaqada habeenkii. | N/A | Mashruucu waxa uu ogol yahay shaqaalaynta laga bilaabo da'da 18 sano.<br>Shaqaalaha naafada ah iyo uurka filaya iyo kuwa nuujiya ma qaban doonaan hawlo khatar ah |
| | Xeerka Shaqada ee 1972. Xeerka Shaqaaluhu wuxuu mamnuucayaa shaqada carruurta da'doodu ka yar tahay 12 sano laakiin wuxuu oggol yahay shaqaaleysiinta carruurta da'doodu u dhaxayso 12-15, sidaas oo ay tahay shaqadu waa inay noqotaa mid ku habboon lana helo ilaalin sax ah, caafimaadka iyo anshaxa carruurta.. | Carruurta waxaa loo qaadaa noocyada ugu xun ee ilmo-ku-shaqaysiga (qorista khasabka ah ee ciidanka, shaqada qasabka ah ee guriga, beeraha iyo xoolaha, jebinta dhagaxyada jayga, shaqada dhismaha, ka ganacsiga jirkooda)<br><br>Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxay dadaal u gashay sidii loo dhisi lahaa xarun lagu dhaqan celiyo caruurtii hore u dagaalami jirtay iyo in la sameeyo ciidan ka hortaga ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta.<br><br>Carruurt waxa lagu daabulaa beeraha (beeridda, dhaqista xoolaha, kalluumaysiga); warshadaha (dhismaha, | Mashruucu waxa uu ogol yahay oo kaliya in la daabulo – dhammaan qaybaha shaqaalaha mashruuca – laga bilaabo da'da 18 sano. Inta lagu jiro nidaamka shaqaaleysiinta, baare ayaa la shaqaalayn doonaa si dib u eegista loogu sameeyo dukumentiyada lagu sheegay da'da qofka. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | macdan iyo dhagax qodista); adeegyada (shaqada waddooyinka, shaqaale ka noqoshada hoteelada, shaqada guriga, laga qoro ciidanka si iskaawax-u-qabso ah); Carruurtu waxay sidoo kale qabtaan hawlo khatar ah marka ay ku jiraan shaqada waddooyinka.<br><br>Sharciyadu ma cadaynayaan shaqooyinka khatarta ah ama waxqabadyada laga mamnuucay carruurta.<br><br>Dawladdu ma shaqaalaysiiso kormeerayaal shaqaale, wax kormeer ahna ma samayso. | |
| | Xeerka shaqada ee 1972. Xeerku waxa kale oo uu aqoonsan yahay xorriyadda ururrada. Loo-shaqeeyayaashu waa ka mamnuuc inay ku lug yeeshaan nooc kasta oo takoorid ah ama xaddididda xuquuqda xorriyadda ururrada. Shaqaaluhu waa loo oggol yahay inay ku biiraan ururrada shaqaalaha. | N/A | Mashruucu wuxuu raaci doonaa shuruucda qaranka iyo HBD2 oo u baahan in mashruucu uu taageero mabaadi'da xoriyada ururada iyo gorgortanka wadareed ee shaqaalaha si waafaqsan sharciga qaranka. |

7. DOORKA IYO MASUULIYADAHA SHAQAALAHA MASHRUUCA

**Maamulka**

58. Gudiga hagaya mashruuca (GHM) heer federal waxaa lagu dhisi doonaa ujeedooyinka mashruuca, waxayna ka koobnaan doonaan wakiilo ka imaanaya wasaaradaha federaalka ee soo socda: (a) Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (WTKhB); (b) Wasaaradda maaliyadda (WM); iyo (c) dawlad goboleedyada xubnaha ah wasaaradahooda biyaha. Xubinimada guddiga dhinaandhirinta hawshu waxay ka koobnaan doontaa saddex wakiil oo ka socda WTKhB, hal wakiil oo ka socda WM, iyo laba wakiil oo ka kala socda Wasaaradaha Biyaha DGX. GWM waxa guddoomin doona WTKhB. guddiga jiheynta/hagidda hawshu waxay kulmi doonaan saddexdii biloodba mar, si ay u eegaan horusocodka mashruuca, xallinta arrimaha fulinta mashaariicda ee qaybaha iyo wasaaradaha dhexdooda, iyo in ay ogaadaan arrimaha siyaasadda iyo sharciyeynta. Qoraalka ka soo baxa kulanka shirarka GWM, waxaa la siin doona Iskuduwaha Mashaariicda Qaranka.

59. DFS UFM waxay kormeeri doonaan oo isku dubaridi doonaan hirgelinta mashruuca, waxayna hagid iyo tababbarid siin doontaa DXF, iyo sidoo kale waxay siin doonaan qaab-qoraaleed ay warbixinada ku soo gudbiyaan. Waxay shaqaalaysiin doontaa:
    - 1 Khabiir oo ku takhakhusay arimaha deegaanka qaranka, wakhti buuxana shaqeeya - kaasoo hogaamin doona dhinacyada deegaanka ee HMBD iyo HMS iyo qandaraaslayaasha QMBD ama ESIA. Isaga ama iyada waa inay lahaadaan khibrad la xiriirta CBS.
    - 1 Khabiir Arrimaha Bulshada/ HTB ee qaranka oo shaqeeya wakhti buuxa – kaas oo hogaamin doona hirgelinta qorshaha ka-qaybgalka daneeyayaasha, iyo qaab-dhismeedka qorshaynta dib-u-dejinta, qaybaha bulshada ee habraaca maamulka shaqada iyo maaraynta khatarta bulshada ee HMBD. Habka ka qaybgalka bulshada iyo sidoo kale MOU ee bulshada, heshiis wadaagga biyaha iyo soo koobidda warbixinta bulshada iyo mashruuca HC.
    - 1 khabiir arimaha tacaddiyada ka dhanka ah jinsiga TKJ oo wakhti buuxa shaqeeya – kaasoo kormeeri doona hirgelinta qorshaha kahortagga iyo falcelinta KGXDh, oo ay ku jiraan ku wacyigelinta bulshada iyo shaqaalaha, xeerka axshaxa iyo cabashooyinka KGXDh.
    - 1 khabiir Amni– kaasoo kormeeri doona nidaamka maaraynta amni iyo dib u eegista dhammaan khatarta amniga ee goobo-cayiman iyo qorshayaasha maamulka. Waxaa lagu taliyay mid leh khibrad la xiriirta arimaha CBS.

60. Isku-duwayaasha mashruuca ayaa isku dubaridi doona fulinta maamulka waxqabadyada maalinlaha ah ee mashruuca. UIMQ waxay sameyn doontaa dib u eegis saddex biloodle ah iyo mid sanadle ah oo lala yeesho dhammaan daneeyayaasha, kuwaas oo ay ku jiraan BA iyo ka saaxiibada kale ee fulinta.

61. UIMQ waxay yeelan doontaa hawlaha soo socda ee la xiriira shaqada iyo xaaladdaheeda:

i. Horumarinta iyo hubinta guud ahaan fulinta HMS, oo ay ku jiraan tababbarka iyo hanuuninta shaqaalaha ee ka dhacaya Wasaaradaha Qorshaynta (masuulka ka ah Qaybta 4), iyo hubinta in dhammaan qandaraaslayaasha iyo alaab-bixiiyeyaasha koowaad ay u hoggaansamaan qodobada HMS ee waafaqsan HBD2 ee la xiriira maamulka shaqaalahooda.
ii. La socodka iyo maamul la taliyayaasha, si waafaqsan HMS iyo dukumentiyada wax iibsiga ee khuseeya mashruuca.
iii. La soco khataraha muhiimk ah ee ilmo-ku-shaqaynta, shaqada khasabka ah iyo arrimaha dhabta ah ee badqabka ee ka iman kara alaab-bixiyeyaasha koowaad.
iv. Samee oo diyaari qalabka lagama maarmaanka u ah hirgelinta HMS , kuwaas oo ay ku jiraan XAN ee qandaraaslayaasha iyo shaqaalaha.
v. Ku wacyigelinta qandaraaslayaasha iyo shaqaalaha mashruuca qodobada HMS oo ay ku jiraan XAN.
vi. Hubi in HC ee shaqaalaha mashruuca la sameeyay lana hirgeliyay iyo in shaqaalaha lala socodsiiyo.
vii. Hubi in cabashooyinka shaqaalaha ka yimaada, si degdeg ah loo xaliyo, lana soo sheego halka ay marayaan cabashooyinka iyo xallintoodii.
viii. Kor u qaadida hirgelinta HMS iyo hubinta kormeerida shaqada iyo heer waxqabadka CBS; iyo
ix. Uga warbixi Bangiga Adduunka fulinta HMS 6dii biloodba mar.

62. **Unugta Fulinta Mashruuca (UFM) heer dawlad goboleed**. UFM waxay yeelan doontaa hawlaha soo socda ee la xiriira shaqada iyo xaaladaha shaqada:

i. Ka caawinta qandaraaslayaasha horumarinta Qorshayaasha Maareynta Shaqada.
ii. Hagida iyo kormeerka qandaraaslayaasha fulinaya qorshayaasha.
iii. Kormeerka adeecidda shaqaalaha ee HMS.
iv. Hubi in diiwaanada qorista iyo shaqaalaynta shaqaalaha qandaraaska qaatay (ay ku jiraan qandaraaslayaasha hoose), uu u dhacday si toosan.
v. Sii baraarujin/hawl tusid iyo tababbar joogto ah shaqaalaha, kuwaas oo ku saabsan arrimaha bulshada iyo arimaha la xiriira CBS.
vi. Waxaa loo baahan yahay qandaraaslayaasha iyo alaab-bixiyeyaasha koowaad in ay cadeeyaan oo qeexaan khataraha ilmo-ku-shaqaysiga, shaqada khasabka ah iyo arrimaha dhabta ah ee badqabka si waafaqsan faqrada 78 ee hoose.
vii. Hubi hirgelinta HC ee shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraasleyda ah, oo ay ku jirto in la xaqiijiyo in cabashooyinka shaqaalaha ka yimaada loo xalliyo si degdeg ah, iyo uga warbixinta heerka ay marayaan cabashooyinka iyo xallinta UIMQ si joogto ah.
viii. Hubi in dhammaan qandaraasleyaasha iyo shaqaalaha qandaraas-hoosaadyadu ay fahmaan oo ay saxeexaan XAN ,kahor inta aan la bilaabin shaqooyinka iyo kormeerida u hoggaansanka Xeerka; iyo
ix. Uga warbixi FDS \ WTKhB shaqada iyo waxqabadka CBS ee mashruuca saddexdii biloodba mar.

**Shaxda -5: Soo koobidda shaqaalaha masruuca /haay'adda/ kooxda masuulka ka ah masuuliyaadka kal duwan ee goobaha shaqada**

| Masuuliyaadka | Shaqaale toos ah/Shaqaale qandaraasle ah | Shaqaalaha saadka asaasiga ah |
|---|---|---|
| Khayraadka Dadka | Qaadashada shaqaalaha u adeegaya UIMQ | N/A (ka baxsan xadka HBD2) |
| CBS | Shaqaalaha tooska waxay raaci doonaan tallaabooyinka CBS ee ka mid ka ah HMBD iyo HMS | UFM waxay qiimayn doontaa arimaha dhabta ah ee khataraha badqabka iyo haddii loo baahdo. Waxaa iyaga looga baahan yahay inay horumariyaan habab wax looga qabanayo khatarahaas |
| Ilmo-ku-shaqaysiga iyo shaqada khasabka ah | Qandaraasku ma ogola Ilmo-ku-shaqaysiga iyo shaqada khasabka ah | |
| Tababbarka ku saabsan XAN iyo qodobada kale | la-taliyeyaal UIMQ/UFM/ | n/a (ka baxsan xadka HBD2) |
| XAN<br>-ee qandaraaslayda<br>-ee shaqaalaha (ay ku jiraan shaqaalaha mashruuca ee qandaraaleyda ah) | Qandaraaska shaqaalaha tooska ah ayaa lagu qeexi doonaa khataraha la xiriira shaqada. | |
| Habka cabashada | UIMQ/UFM/ la-taliyeyaal | |
| Kormeerka iyo Warbixinta | UIMQ/UFM/ la-taliyeyaasha si ay usameeyaan kormeer iyo warbixinta Bangiga Adduunka | Shaqaalaha UFM ee ku shaqada leh si ay ula socdaan oo ay uga warbixiyaan Iskuduwaha UFM, ay ugu warbixiso Bangiga Adduunka. |

FG. Shuruudaha CBS waxa lagu dabaqi doonnaa dhammaan noocyada shaqaalaha oo ay ku jiraan shaqaalaha tooska ah, shaqaalaha qandaraasleyda ah, shaqaalaha saadka asaasiga ah iyo shaqaalaha bulshada.

63. Iskuduwaha Mashruuca ee heerka DFS iyo maareeyayaasha hawlgelinta ee heerka DGX ayaa mas'uul ka noqon doona kormeerka dhammaan arimaha la xiriira CBS ee mashruuca oo ay ku jiraan: aqoonsiga iyo yaraynta dhibka iyo khatarta; nidaaminta iyo indha-indhaynta dhammaan goobaha shaqada; iyo la socodka ama dhaqan galinta u adeecidda Xeerka Shaqada iyo Sharci kasta oo kale ee Shaqada, kuwaas oo ilaa xad nidaaminaya badqabka, caafimaadka, iyo daryeelka goobaha shaqada.

64. Mashruucu waxa meel loo dhigay dhaqaale lagu hubinayo in waxqabadyada HMS ee qorshaysan, loo fuliyo, lana kormeero si hufan. Soo koobidda miisaaniyada ayaa ku xusan Shaxda 6.

**Shaxda 6: Miisaaniyada lagu fulinayo HMS**

| Waxqabadyada HMS | Unugyada | Lr. Unugyada | Dhaqaalaha Unugta, "Dolar" | Wadarta Dhaqaalaha,Dolar |
|---|---|---|---|---|
| Caawinta horumarinta Qorshayaasha Maareynta Shaqada ee dhammaan xafiisyada mashruuca iyo qandaraaslayaasha | Tirada qandaraasleyda | 15 | 1,000 | 15,000 |
| Kharashaadka safarka ee shaqaalaha ee waxqabadyada HMS (hawlaha indho-indhaynta ee saraakiisha amniga iyo UIMQ iyo hoggaanka UFM) (laba biloodle) | 3 biloodle | 20 | 2,000 | 40,000 |
| Tababbarka (maamulka qandaraaska, XAN, GXC, TKJ, iwm.) ee UIMQ, UFM, qandaraasleyda iyo alaab-bixiyayaasha koowaad (sanadka 1aad ee fulinta) | Bilo | 12 | Bulk | 60,000 |
| Dhaqaalaha maaraynta HC shaqaalaha | Bilo | 60 | 1,000 | 60,000 |
| Dhaqaalaha fulinta cabirada tallaabooyinka CBS | Bilo | 60 | 1,000 | 60,000 |
| Kormeerka iyo Qiimaynta | Sannadle | 5 | 10,000 | 50,000 |
| Wadar-hoosaad | | | | 285,000 |
| Kedis (5%) | | | | 42750 |
| Wadar guud | | | | 327,750 |

8. SIYAASADDAHA IYO HABRAACYADA

65. **Caafimaadka iyo badqabka shaqada:** Marka la tixraaco qodobbada khuseeya Xeerka Shaqada Qaranka,(Qodobadda 101-104),HBD2, ee lagu daro KBA ee la xiriira deegaanka, tilmaamida Caafimaadka iyo Badqabka Deegaanka (TCBD), KBA, tilmaamida Guud ee CBD, iyo dukumentiyada wax iibsiga heerka BA, WTKhB waxay u maareyn doontaa mashruuca hab ay shaqaalaha iyo bulshooyinka la rabo in wax loo taro, looga ilaalin karo khatarta suurtagalka ah ee CBS . Khatarahaas oo ay kamid yihiin: dhismaha iyo wejiyada hawlgalka shaqada, sida:khataraha ka iman kara shaqada qodista, warshadda wareegta iyo baabuurta, iyo sidoo kale jiirgo'a iyo maaraynta culeyska la qaadayo. Intaa waxa sii raaca:isticmaalka qalabka shaqada, korontada, khatarta dabka, isticmaalka kiimikada, khataraha jireed ee kasoo wajahaya shaqaalaha inta lagu guddo jiro hawlgalada loo igmaday, iwm.). Tilmaamaha,tusaalooyinka iyo taxaddarrada macquulka ah ee lagu hirgelinayo maaraynta khatarta ku wajahan caafimaadka iyo badqabka shaqada waa in la raacaa. Intaa waxaa dheer, tallaabooyinka CBS ee lagu qeexay HMDB,waa la dabaqi doonaa.Maamulka shaqada, qodobbada ugu muhiimsan ee cabirada OHS, waxaa ka mid noqon doona: (a) cadaynta/qeexida khataraha ku iman kara shaqaalaha; (b) bixinta tallaabooyinka ka hortagga iyo ilaalinta; (c) tababaridda shaqaalaha iyo ilaalinta diiwaannada tababarka; (d) diiwaangelinta iyo ka warbixinta dhacdooyinka iyo shilalka shaqada; (e) diyaar u ahaanshaha xaaladdaha degdegga ah; iyo (f) daawaynta dhaawacyada shaqada iyo maareynta dhimashada. Intaa waxaa dheer, waxa jiro doonta habraacyo la hormariyay oo khuseeya amniga, badqabka iyo ka hortaga saameynta khataraha ka iman kara cudurada faafa ee Covid-19 uu kamid yahay.. Mashruucu wuxuu hubin doonaa u hoggaansanka/iska shaqaynta shuruudaha sharciga qaranka iyo sidoo kale tilmaamaha Bangiga Adduunka dejiyay ee la xiriira Covid-19. Shuruudaha gaarka ah ee CBS iyo xaaladihiisa ayaa lagu dabaqi doonaa dhammaan dalabyada mashruuca iyo qandaraasyada (oo ay ku jiraan adeegga, shaqooyinka, dhismaha, la-talinta, iwm.)

66. **Hababka iyo tallaabooyinka lagu qiimaynayo khataraha:** (i) Sheeg/cadee khataraha; (ii) in la aqoonsado dadka laga yaabo in dhibaato soo gaarto, iyo sidee; (iii) Qiimee khatarta oo go'aanso taxaddarada lagaga hortagi karo; (iv) Diiwaangelinta natiijooyinka muhiimka ah iyo fulintooda; iyo (v) Dib u eegista yo cusboonaysiinta kolba sida ay munaasibka u tahay
67. **Shaqaaleysiinta Carruurta Da'da Yar:** Da'da ugu yar ee loo asteeyay in shaqaalaha lagu qaataa waa 18 sano. Si looga hortago hawlgelinta da'da ka yar shaqada, dhamaan qandaraasyadu waa in ay xusaan shuruudaha da'da ugu yar ee lagu shaqo bilaabi karo, iyadoo ay raacayaan ganaaxyada la xiriria haddii la baalmaro sharciga. Dhammaan wasaaraddaha ay shaqaaluhu si buuxda, ama si qayb ahaan ah mushaharka uga qaadandoonaan inta mashruucu socdo,waxa looga baahan yahay inay ilaaliyaan diiwaanka shaqada ee dhammaan shaqaalaha qandaraaska la siiyay ,iyadoo lagu cadaynayo da'da shaqsiga.
68. **Muranka ka soo ifbaxa xeeerarka iyo shuruudaha shaqada:** Mashruucu wuxuu yeelan doonaa hanaanka maareynta habka cabashada (HC) ee shaqaalaha tooska ah. Qandaraaslayaasha waxaa looga baahan doonaa inay haystaan oo u diyaarsan yahay hanaanka maamulka habka cabashada (HC) shaqaalaha qandaraaska haysta, si ay si

degdeg ah, wax uga qabtaan cabashooyinkooda la xiriira goobta shaqada. Intaa waxaa dheer, mashruucu wuxuu ixtiraami doonaa xuquuqda ururada shaqaalaha mashruuca iyo xoriyada isbaahaysiga.

69. **Faquuqa iyo heybsooca dadka Nugul:** Shaqaalaynta/qaadashada shaqaalaha mashruucu wuxuu ku salaysan yahay hanaanka fursadda siman iyo calaalad ku dhaqidda. mana jiri doonto takoor ku salaysan sifooyinka shakhsi ahaaneed ee aan la xiriirin shuruudaha shaqada ee aasaasiga ah, iyada oo la tixgelinayo dhinac kasta oo xiriirka shaqada ah sida qorista iyo qaadashada shaqaalaha, muddada shaqaalaynta (oo ay ku jiraan gunnada iyo dheefaha), joojinta shaqada iyo helidda tababarada. Wacyigelinta guddiyada xulashada dawladda, UFM iyo qandaraaslayaasha ayaa lagu fulin doonaa arimahan. Waxa intaa raaca dib u eegista liisaska gaagaaban ee shaqaalaha la qaadanayo iyo warbixinnada ugu dambeysa ee xulashada shaqaalaha , iyadoon laga reebaynla-tashiyada bulshada, sidoo kale waxaa la tixgalin doonaa hantidhowrayaasha .Dhanka qandaraaslayaasha, tan waxaa sidoo kale loogu dari doonaa HMDB-yadooda. Shaqaalaha tooska ah, liisaska la soo xulay ayaa sidoo kale la siin doonaa iyada oo aan Bangiga diidin. Mashruucu waa inuu u hoggaansamaa xeerka shaqada qaranka ee sinnaanta jinsiga ee goobta shaqada, kaas oo u ogolaanaya xuquuqda fasaxa umusha iyo nasashooyinka nuujinta iyo xanaaneynta carruurta. Mashruucu waa in uu diyaariyaa musqulo ku filan oo ku habboon labka iyo dhidiga,. Kiisaska qaar, cabiraadaha waxqabad ee la isku raaco waxaa loo isticmaali doonaa in lagu qoro shaqaale dheeriya oo haween ah. Xaaladdaha qaarkood, talaabooyinka waxqabadka xaqiijinta ee ka imanaya goobta shaqada ayaa la isticmaali doonnaa, si loo shaqaaleysiiyo dumar kale oo dheeraad ah.

70. **Khataraha amni**: Iyadoo la tixgalinayo khataro badan oo xagga amniga ah oo ka jira qaybo ka mid ah dalka, mashruucu waxa uu samayn doonaa qiimayn xooggan oo la xiriirta khatarta amniga, iyo qorsho balaan oo lagu maareynayo amniga mashruuca (QMA). Waxaa jiri doona shaqaale waqti buuxa shaqaaya, ahna lataliye khibrad fiican u leh amniga oo ka tirsan UIMQ ee heerka DFS, kaasoo la shaqeyn doona shirkadda qandaraaska qaadatay ee maamulka amniga u xilsaaran, isagoo kala shaqan doonaa arimahan soo socota.

i. Qiimaynta Khatarta Amniga gaarka ah ee goobta (QKA) iyo Qorshayaasha Maamulka Amniga,kuwaas (QMA) oo uu horumarin doono,oo turxaantiri doono Bangiga Adduunku, ka hor inta aan la xaqiijin goobaha iyo qodobbada xiriirka la leh qandaraaslayaasha QMHDB. Hawshani waxay dhici doontaa,ka hor intaan qandaraasyada la saxiixin.

ii. Lataliyaha amniga ee UIMQ iyo shirkadda maaraynta khatarta amniga ee haysata shahaado amniga la xiririta, waa in qaataa oo la hawlgeliyaa ka hor inta aanu mashruucu dhaqan gelin.

iii. Lataliyaha amniga ee UIMQ iyo shirkadda maaraynta khatarta amniga ee la qaatay, ayaa dib u eegis ku sameyn doona warbixinnada E&S ee qandaraasleyaasha, si loo abuuro baaxad awoodeed oo dhanka maareynta ammaanka ku filan.

iv. Shirkadda maareynta amniga ayaa soo saari doonta warbixino cusub oo joogto ah, kuwaas oo la xiriira qiimeynta khataraha amniga iyo heerarka ay marayaan, sidoo kale waxay shaqaalaha ka caawin doontaa dhanka tababarada la xiriirta aqoonta amniga.

71. **Dhacdooyinka TKJ/KGXDh:** Marka aan dabaqno xaalada lagu jiro ee kala daadsanka ah, khilaafka iyo rabshadaha ka jira Soomaaliya, ka faa'iideysiga galmada, iyo xadgudubka/dhibaatayta (KGXDh) ee dadka wada shaqeeya iyo jawaabaha la waraystayaasha sahanku waxay muujinayaan in ay jirto khatar weyn oo la xiriirta amniga. Haddaba, dhammaan shaqaalaha mashruuca iyo shaqaalaha rayidka ah ee dawladda ee ka shaqaynaya mashruuca, waxa looga baahan yahay inay saxeexaan xeerka anshaxa (XAN) ee qeexaya habraacyada la filayo iyo cawaaqibta ka dhalan karta xad-gudubyada arrintan la xiriirta, iyagoo ka qaybgalaya kulamo wacyi-gelineed si isku mid ah. Intaa waxaa dheer, shaqaalaha iyo u qaybsanayaasha gaarka ah HC, waxay heli doonaan tilmaamo ku saabsan wax ka qabashada cabashooyinka **TKJ** oo ay ku jiraan hubinta guud, iyadoo la raacayo rabitaanka badbaadaha ee kor u qaadista cabashada iyo gudbinta badbaadaha, si uu u helo adeegyada caawinta ee la xiriira GSJ.
72. Dhammaan shaqaalaha iyo u qaybsanayaasha gaarka ah habka cabashada "HC" waxaa lagu wargelin doonaa in haddii kiis la xiriira **TKJ** loo sheego, macluumaadka kaliya ee ay samayn doonaan uu noqon doono mid la xiriira mashruuca, shaqaalaha nooca dhacdada, da'da iyo jinsiga qofka cabanaya iyo haddii badbaadaha/dacwoodaha loo soo gudbiyay goobta adeegyada ee adeegbixiyuhu kula taliyay. Waa in aysan isku dayin in ay baaraan xaalad kasta ama gudbiyaan arrinta iyada oo aan si cad loogala heshiin ama ogolaansho buuxda laga helin badbaadaha. Haddii qofka cabanaya uu u maleeyo in shaqaalaha mashruuca ku lug leeyahay dhacdada ama uusan hubin, xarunta HC waa in ay si degdeg ah ugu wargelisaa dhacdada madaxa UIMQ, kaas oo bixin doona tilmaamo dheeraad ah, ka dib marka uu la tashado Bangiga Adduunka**. Qorshaha KGXDh ee kahortaga iyo falcelinta faahfaahsan ee mashruuca ayaa loo diyaariyay in ay qayb ka ahaado HMHDB**.

73. **Kormeerka iyo Warbixinta:** UIMQ waa in ay warbixin ka siiso Bangiga Adduunka, halka ay marayso fulinta siyaasadaha iyo habraacyada kor ku xusan, saddexdii biloodba mar. UIMQ waxay si dhow ula socon doontaa fulinta shaqada iyo waxqabadka la xiriira CBS ee mashruuca, waxayna warbixin buuxda siin doontaa Bangiga Adduunka saddexdii biloodba mar sida aan kor ku xusnay.

74. **Dhimashda iyo Dhacdooyinka halista ah:Marka** ay ka dhacdo dhimasho ama dhaawac halis ah oo la xiriira shaqada, UIMQ waa in ay u soo gudbiso Bankiga ugu badnaan 48 saac,isla marka ay ogaadaan dhacdooyinkan oo kale., Waxay ku wargeliyaan hay'adaha dawladda ee la heli karo,si waafaqsan Shuruuddaha warbixinta qaranka (Xeerka Shaqada Qodobka 102). Haddaba si looga falceliyo dhibaatooyinka ka yimaada shilalka mashruuca , waa in la fuliyaa tallaabooyinka xiga ee sixitaanka.. UIMQ ama, cidii kale ee ay khusaysaa, la-taliyaha ayaa laga yaabaa inuu sameeyo baadhitaanka asalka ah ee naqshadaynta iyo hirgelinta tallaabooyinka sixitaanka.

**Da'da shaqaalaynta**

75. **Da'da ugu yar:** Sida kor lagu soo sheegay, Xeerka Shaqada ee DFS (Qodobka 94), wuxuu dhigayaa in da'da ugu yar ee shaqaalaha qabta shaqooyinka dhulka hoostiisa ee meelaha dhagxaanta ama macdanta laga qodo ay noqon doonto 18 sano. Iyadoo Xeerka Shaqaaluhu Caalamiga ahi uu u ogolaanayo dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 18 sano ay qaban karaan shaqooyinka aan khatarka lahayn. Waxaa habboon in mashruucu uu maro jid taxadar leh, iyada oo la tixgelinayo awoodda xaddidan ee kormeerka ee maareynta khatarta deegaanka iyo tabaryarida habka kormeerka shaqaalaha qaranka. Da'ada ugu yar ee loo qoondeeyay shaqaalaha mashruucu waa 18 sano. Qof da'diisu ka yar tahay 18 jir, kama shaqayn doono/ka qaybqaadan doono hawlaha mashruuca.

76. **Habka loo hubinayo da'da:** Xaqiijinta da'da waa in la sameeyaa ka hor inta aan shaqada la gelin, waana in la diiwaangeliyaa xogta rasmiga ah ee shaqaalahaHoos waxaa ku qoran liiska caddaynta da'da ee loo isticmaali karo xaaladda Soomaaliya, maadaama aan weli nidaamka aqoonsiga rasmiga ah ee shaqaalaha aan si guud oo dhamaystiran loo heli Karin.
    a. Hubi dukumentiyada rasmiga ah, sida: shahaadada dhalashada, aqoonsiga qaranka, ama diiwaanada kale ee lagu kalsoonaan karo xogtooda, intii la heli karo.
    b. Hel caddayn qoraal ah oo ka timid takhtar caafimaad, waalidka shaqaalaha, ama qofka masuulka ka ah; ama
    c. Weydii hogaamiyaha bulshada deegaanka/odayga dhaqanka, kooxda waxqabadka bulshada ama ilaha kale oo bulshadu ku xiran tahay ee lagu kalsoonaan karo.

77. UIM waxay kormeer ku samayn doontaa shaqaalaha mashruuca, ugu yaraan lixdii biloodba mar,si loo hubiyo in dhammaan qandaraaslayda sare, kuwo hoose, iyo alaab-bixiyeyaasha koowaad ee ku hawlan waxqabadyada mashruuca, aanay shaqaaleysiin qof ka yar 18 sano jir. Kormeerkan waxa la socon doona sahanka goobta iyo hantidhowrka xiliyaysan. goobta iyo baaris xilliyeedka.

78. Haddii qof da'diisu ka yar tahay 18 sano la ogaado inuu ka shaqaynayo hawlaha mashruuca, UFM waxay qaadi doontaa tallaabooyin ee lagu joojinayo shaqada qofkaas, iyadoo si masuuliyad leh, loo tixgelinayo danta qofkaas.

79. Si loo hubiyo in danta ilmaha da'doodu ka yar tahay 18 sano la tixgeliyay, UIM waxay fulin doontaa, oo hubin doontaa in dhammaan qandaraasleyda sare , qandaraasleyda hoose, iyo alaab-bixiyeyaasha koowaad ay sameeyeen dib u habayn sababaysan oo bangiga adduunku ogyahay. Hawlaha dib-u-habaynta waa waa in ay ku jiraan qodobadan hoose, iyo doorashooyin kale.
    i. ka qorida ilmaha barnaamijka tababbarka xirfaddalaakiin aan faragalin ku samaynayn dhamaystirka imaanshaha dugsiga hoose ee sharciga qaranka; ama
    ii. shaqaaleysiinta xubin qoyska ilmaha ah, oo da'diisu tahay ugu yaraan 18 jir, taas oo ay fulinayaan alaab-bixiyaha koowaad, qandaraaslaha, ama qandaraaslaha hoose ee mashruuca la xiriira ama shaqo kale.

**Muddada iyo shuruudaha shaqaalaha mashruuca: shaqaale toosa iyo mid qandaraasle ah**

80. **Shaqaalaha mashruuca:** Muddada iyo shuruudaha shaqaalaha tooska ah, waxa maamuli doona xogta u degsan qandaraasyada UIMQ iyo shaqaalaha qandaraaska ku yimidna , waxa maamuli doonta cida shaqaaleysiisay.. Shaqaalaha ku meel gaadhka ah ee wakhtiga gaaban ma yeelan doonaan fasaxa umusha ama sanadlaha, iwm. Muddada iyo shuruudahoodu waxa xukmin doonna shaqooyinka loo diro ee laga rabo inay ku dhammeeyaan muddo cayiman, taas oo ku jaan go'an kharashka saacadaha maalintii. Muddada iyo shuruudahan shaqada, waxa lagaga hadli doonaa xiliga qoritaanka iyo ka hor inta aanu tababarku bilaabmin, oo aan Xeerka Anshaha (XAN) la saxiixin. Xeerka shaqada ee Soomaaliya ee lagu soo xusay Qaybta V (dulmarka sharciga shaqada), waa sharciga hagaya muddada iyo shuruudaha shaqada ee dhammaan shaqaalaha mashruuca. Wasaaradda shaqada ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa xaqiijisay in ay raacayso oo ay fulin doonto qodobbada xeerka shaqada ee dhammaan arrimaha la xiriira ka qeyb qaadashada iyo maamulidda shaqada. Hoos waxa ku qoran,qaybaha ugu muhiimsan ee muddada iyo shuruudaha ay tahay in lagu dabaqo shaqaalaha hoos yimaada mashruuca.

81. **Qodobada qoran ee qandaraaska shaqsiga ah ee shaqada:** Qandaraaska shaqsiga ahee shaqada ee qoran, waa in la siiyaa shaqaalaha mashruuca. Qandaraaskaas oo cayimaya qodobadan soo socda: (a) Magaca shaqaalaha; (b) ciwaanka, shaqada, da'da, iyo jinsiga shaqaalaha; (c) magaca iyo ciwaanka loo shaqeeyaha; (d) nooca iyo muddada qandaraaska; (e) saacadaha iyo goobta shaqada; (f) gunnada la siinayo shaqaalaha; iyo (g) habka laalida ama joojinta qandaraaska. Iyadoo lagu salaynayo dabeecadda asalka ah ee loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha, muddada iyo shuruudaha shaqada waxaa lagu sheegi doonaa luuqad ay fahmi karaan labada dhinacba. Dukumentiyada qoran ka sokow, sharaxaad afka ah oo ku saabsan muddada iyo shuruudaha shaqada ayaa la siin doonaa shaqaalaha ay ku adkaato fahamka waraaqaha shaqadu.

82. **Ogeysiinta joojinta qandaraaska:** Dhinacayada qandaraasku midkoodna ma laali karo heshiiska shaqada, iyagoo aan bixin ogeysiis qoran oo leh shuruudahan soo socda(a) muddo aan ka yarayn 10 beri haddii arinku yahay shaqaalaha xoogsatada ah.; ama (b) ogaysiis qoran oo aan ka yarayn 30 beri, haddii arinku la xiriiro shaqaalaha aan xoogsatada ahayn: Ogeysiis looma baahna haddii muddada qandaraasku ka badneyn bil. Xisaabiyeyaasha/xog qorayaasha laga yaabo in lagu helo jebinta sirta xogta lagu aaminaya ama faafinta macluumaadka been abuurka ah, waa in laalid/shaqo ka joojin isla markiiba lagu sameeyaa, xitaa haddii muddada qandaraasku ka badan tahay hal bil.

83. **Gunnooyinka ugu yar:** Iyadoo habka lagu dejinayo darajooyinka gunnada ugu yar ee rasmiga ah ee digreetada Madaxweynaha (Xeerka Shaqada, Qodobka 72) aanu hadda shaqaynayn, sicirka suuqa ee musharaadka la xiriiraayaa laga ogaan karaa nooc kasta oo shaqo ah, iyadoo degaano kala duwan loo fiirinayo. Sicirka suuqa cadaalada ah ee mushaharka shaqaalaha ayaa la qeexi doonaa,waxaana lagu dabaqi doonaa shaqaalaha mashruuca.

84. **Saacadaha shaqada:** Saacadaha shaqada caadiga ah ee shaqaalaha mashruuca, waa in aanay dhaafin 8 saacadood maalintii ama 48 saacadood todobaadkii. Saacadaha la shaqeeyay in ka badan saacadaha shaqada u qoondeysan, waa in aanay ka badnayn 12 saacadood usbuucii,wuxuna xaq u yeelan doonnaa shaqaaluhu saami guni dheeraad ah.
85. **Nasashada todobaadkii:** Shaqaale kasta waxa uu xaq u yeelan doonaa hal maalin oo nasasho ah, toddobaad kasta. Taas oo marka lagu dabaqo xaaladda Soomaaliya , ku began maalinta jimcaha. Waxay ka koobnaan doontaa ugu yaraan 24 saacadood oo isku xigta toddobaad kasta. Shaqaaluhu waxa kale oo ay xaq u yeelan doonaan in ay nastaan maalmaha fasaxa guud ee ay Dawladdu aqoonsan tahay.

86. **Fasaxa sannadlaha:** Shaqaaluhu waxay xaq u yeelan doonaan 30 maalmood oo fasax ah, oo la siinayo mushaaroodkoodii sannad kasta. Xaq u lahaanshaha fasaxa sanadlaha ah, isagoo lacagtiisu ay u socoto oo aan laga jareyn, waa ay timaadaa marka uu shaqeeyo sanad buuxa oo shaqadii loo igmaday ah.

87. **Fasaxa umusha:** Haweeneyda shaqaalaha ah ayaa xaq u yeelan doonta fasax, marka la soo bandhigo shahaado caafimaad oo tilmaamaysa taariikhda la filayo in ay dhasho/umusho. Kadib marka lagu qanco, ilaa 14 toddobaad oo fasax umul ah oo leh mushaar buuxa, kaas oo ugu yaraan bilaabmi doona 6 toddobaad dhalidda ka dib. Fasaxu wuxuu sidan u dhici doonaa, Haddii ay haweenaydu shaqaaynaysay ugu yaraan lix bilood oo xiriir ah, hal maalinna aanay goynin shaqada, marka laga reebo maqnaanshaha reebo jirro la xaqiijiyay.

88. **Nashada hooyada nuujinaysa ilmaha:** Haweeneyda shaqaalaha ah ee nuujinaysa ilmaheedu, waxay xaq u yeelanaysaa, ugu badnaan hal sano oo fasax ah, ka dib taariikhda dhalashada ilmaha. iyadoo la siinayo ilaa laba nasasho oo kiiba saacad yahay maalin kasta. Nasashada waa in lagu tiriyaa saacadaha shaqada, waana in lacagta lagu bixiyaa si waafaqsan.

89. **Yaraynta gunnada:** Wax yarayn mushahar ah oo aan ka ahayn waafajinta qodobada uu dhigayo Xeerka shaqaalaha ama xeerjajabka lagu sameeyay halkan, ama heshiiska shaqada, waa in aan lagu samayn gunnada shaqaalaha, marka laga reebo dib u gudidda/bixinta lacag hormaris ahaan uu shaqaaluhu uga qaatay loo shaqeeyaha,taas oo lagu caddaynayo qoraal cad. Loo shaqeeyuhu waa in aanu ka dalban ama ka aqbalin shaqaalaha mashruuca, wax lacag caddaan ah ama hadiyad nooc kasta oo ay tahay, beddelka u oggolaanshaha shaqada ama sabab kasta oo kale oo la xidhiidha arimaha muddada/wakhtiga iyo shuruudaha shaqada.

90. **Dheefaha dhimashada:** Haddii ay dhacdo in shaqaale uu geeriyoodo inta lagu jiro muddada heshiiska shaqada, loo shaqeeyuhu waa inuu ku siiyaa dadka leh dhaxalka, muddo aan ka yarayn 15 maalmood, gunno ah dheefta dhimashada ee lagu fulinayo adeegyada aaska.

91. **Daawaynta shaqaalaha dhaawacma iyo kuwa xanuunsan:** Waxaa waajib ku ah loo shaqeeyuhu inuu maareeyo oo ku bixiyo kharashkiisa gaarka ah, gaynta cusbitaalka ugu

dhow shaqaale kasta oo dhaawacma ama buka/xanuusan,kaas oo aan isla goobta lagu daweyn karin,iyadoo la adeegsanayo tasiilaadka la heli karo markaas.

92. **Heshiisyada wadar-ogolka ah**: Heshiis wadar-ogolku, waa heshiis la xiriira muddada iyo shuruuddaha shaqada oo ay soo koobeen,una dhexeeya wakiilada hal ama in ka badan oo ururo shaqaale isku dhinac ah, iyo wakiilada hal ama ka badan oo loo shaqeeyayaal isku dhinac ah. Heshiisyadan wadar-ogolka ah ee u dhexeeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ayaa lagu dabaqi doonnaa maamulka shaqaalaha iyo lagu fiirinayo kobla sidii ku haboon.

## 9. HABKA CABASHADA

93. **Xeerarka guud:** Caadiyan Cabashada goobta shaqada ka yimaad , waxay la xiririaan: fursad shaqo oo cadaalad ah,loona siman yahay; sicirka gunnada shaqada iyo dib u dhigista lacag bixinta; khilaaf ku saabsan xaaladaha shaqada xad-dhaafka ah; iyo arimaha quseeya caafimaadka iyo badqabka ee goobta shaqada. Sidaa darteed, habka xalinta cabashada (HC) ayaa la siin doonaa/la bari dhammaan shaqaalaha tooska ah, shaqaalaha qandaraasleyda ah iyo la-taliyayaasha,si kor loogu qaado wacyiga goobta shaqada. Shaqaalaha waxaa lagu wargelin doonaa documents-ka sharacaya habka xalinta cabashada (HC) ,isla wakhtiga qorista iyo tallaabooyinka la sameeyay,si looga ilaaliyo wax kasta oo aargoosi ah in loo isticmaalo. Wax ka qabashada cabashooyinku waa in ay noqotaa mid ujeedo leh, degdeg uga falcelinaysa baahiyaha iyo arimaha shaqaalaha dhibaataysan, taas oo awood u siinaysa in ay ka hortagaan, yareeyaan, ama xaliyaan xiisadaha iyo dhibaatooyinka ka hor inta aysan noqon arrimo culus, oo u baahan doona kheyraad dheeraad ah,si loo wajaho oo wax looga qabto..

94. Habka ayaa sidoo kale ogolaan doona in cabashooyinka qarsoodiga ah la soo qaado/dhagaysto oo wax laga qabto. Shakhsiyaadka soo gudbiya faallooyinkooda ama cabashooyinkooda waxay codsan karaan in magacooda sir laga dhigo. Sirta waa in la ilaaliyaa haddii la codsado, si loo hubiyo badqadka iyo xorriyadda shaqaalaha soo gudbiyay cabashooyinka iyo ilaalinta kan daaha ka qaaday. PIU waxay baari doontaa sirta laga shakiyo in la bixiyay ama la jabiyay fulinteeda. HC lama mid aha habka cabashada ee loo samaynayo daneeyayaasha mashruuca, wuu ka duwanaan doonnaa. HC gaarka ah ee shaqaaluhu, wuxuu ahaan doonaa laba heer - mid heer DFS-WTKhB iyo mid kale oo heer DGX-WTKhB ah. Waa in la caddeeyo in HC aanu ahayn dooris/beddelka nidaamka maxkamad/sharciga ee qaabilaadda iyo maaraynta cabashooyinka. Si kastaba ha ahaatee, tan waxaa loo sameeyay in lagu dhexdhexaadiyo oo la raadiyo xal ku habboon cabashooyinka shaqada, ka hor inta aanay xaaladdu isku murgin.

95. Shaqaalaha tooska: Mashruucu wuxuu yeelan doonaa nidaam cabasho oo fudud, laakiin waxtar leh oo loogu talagalay shaqaalaha tooska ah, si ay wax uga qabtaan cabashooyinka goobta shaqada iyo wacyiga kale ee soo kordha, kuwaas oo ay ku jiraan arrimaha la xiriira GSJ/KGXDh ee goobta shaqada. Unug kasta oo ka hawlgasha shaqaalaha tooska ah (UIMQ ee heerka DFS, UFM ee heerka DGX iyo la taliyayaasha), waxay qaban doonaan shirar

kooxeed xilliyaysan, si ay uga doodaan wixii tabasho ah ee la xiriira arimaha goobta shaqada. HC mashruucu wuxuu dabaqi doonaa agabka HBD2 iyo siyaasada gudaha ee WTKhB DFS.

96. Shaqaalaha labada heer DFS iyo DGX waa in lagu dhiirigeliyaa marka ugu horeysa inay cabashadooda u gudbiyaan kormeerka heegaanka ah ama waaxda shaqaaleysiinta, kadib kormeeraha dhow waa inuu si taxadar leh u eego kiiska oo uu ku dadaalo inuu xalliyo islamarkiiba. Haddii shaqaale dhiban aanu ku qanacsanayn heshiiska la soo dejiyay oo xalka loo arkay, isaga/iyada waa in ay cabasho qoraal ah u soo gudbiyaan Madaxa Waaxda. Shaqaalaha dhibanaha ah, waxaa intaa u dheer oo uu codsan karaa dhegaysi shakhsi ah, waxana laga yaabaa in uu weheliyo qof ay saaxiib yihiin, haddii uu dareemayo cidlo ama u baahan yahay wehel uu ku kalsoon yahay Madaxa Waaxda ayaa markaas wixii ka dambeeya la socodsiin doona go'aankiisa/keeda qofka cabanayo. Haddii arrinta weli aysan dejin shaqaalaha qancintu, waa in uu racfaan u qaataa Madaxa Waaxda Shaqaalaha oo markaas arrinta kala xaajoon doona maamulka sare ee mashruuca. Haddii arrintu weli taagan tahay (kadib isku dayga xalino kala duwan), shaqaalaha dhibbani, waa in uu u fariintiisa cabashada u gudbiyaa Agaasimaha Guud (AG) oo markaa arrinta la eegi doona maamulka mashruuca.

97. Shaqaaluhu haddii aysan raali ka ahayn in ay cabasho u gudbiyaan kormeerayaashooda/madaxdooda, waxa ay u soo gudbin karaan si sir ah iyaga oo adeegsanaya nidaamka cabashada mashruuca, haddii aysan ku qanacsanayn kanaalka/jidkaas, waxa ay la soo xiriiri karaan xafiiska Bangiga Adduunka ee Soomaaliya, kaas oo u gudbin doona Hogaamiyaha Kooxda Hawsha. Haddii jawaab lagu qanco aan laga helin CMU, cabashooyinka waxaa loo gudbin karaa GXC ee Bangiga Adduunka ama Guddiga Kormeerka.

98. Kanaalada tabashada iyo cabashooyinka ee la sameeyay, waa inay noqdaan kuwo ku habboon shaqaalaha. Si taas loo suurto geliyo, mashruucu waxa uu yeelan doonaa dhawr kanaal/jid oo loogu talagalay tabashada iyo cabashooyinka oo ay ku jiraan,sida: email, telefoonada, qoraallada, blogyada, khadka telefoonka iyo qorista warqad, kuwaas oo ay shaqaaluhu heli karaan dhammaan shaqaalaha. Xogta ku saabsan HC mashruuca, waxaa laga heli doonaa dhammaan xarumaha shaqaalaha, xafiisyada WTKhB (labadaba heer DFS iyo DGX) iyo heerka bulshada (GHT, tusaale ahaan), si loo hubiyo in dhammaan shaqaaluhu ay helaan macluumaad ku filan oo ku saabsan, sida loo xareeyo cabasho shaqo iyo cidda sida tooska ah loogu gudbinayo. Sirta ayaa la asturi/qarin doonaa marka la xalinayo cabashooyinka shaqaalaha u gaarka ah. In kasta oo 'sanduuqyada talo-bixintu' ay ka jiraan goobo badan oo shaqooyin ka socdaan,kuwaas oo u muuqdainay yihiin qaabka la doorbidayo in loo helo warbixinta cabashooyinka, waayo-aragnimadu waxay inoo sheegaysaa in sanduuqyadan aan si dhib leh loo furin, oo arrimaha la xalliyo. Haddii ay tahay in kuwan loo isticmaalo qayb ka mid ah HC, waxa loo baahan yahay in la dejiyo hab/qaab lagu furayo, dib loogu eegayo, loogu warcelinayo iyo falcelin ku saabsan arimaha la shaaciyay. Shaxda 7, waxay muujinayaa habka/waqtiga wax looga qabanayo cabashooyinka guud ee mashruucan, iyadoo loo marayo nidaamka HC.


***Shaxda 7: Wakhtiga lagu maaraynayo cabashooyinka***

| Lr: | Tillaabooyinka lagu sheegayo cabashada | Tusiyaha wakhtiga* | masuuliyadaha |
|---|---|---|---|
| 1 | Helida ,diiwaan gelinta iyo qiridda cabashda oo qoraal ah. | Labo beri gudahood | Khabiir SS ee heer DFS iyo heer DGX oo ay caawisay UFM. |
| 2 | Baarista iyo samaynta saldhigga cabashada; Marka cabashada aan la aqbali karin (tusaale, cabashooyinka aan la xiriirin mashruuca), sababta diidmada waa in si cad loogu sharraxaa cabtaha, halka ay suurtagal tahayna loo gudbiyo hay'adaha/daneeyayaasha. | Todobaad gudihiis | Khabiir SS oo ay caawisay UFM. |
| 3 | Maamulaha barnaamijka iyo sarkaalka ilaalinta bulshada si ay u tixgeliyaan siyaabaha wax looga qabanayo cabashada. | Todobaad gudihiis | Maamulaha barnaamijka oo ay caawisay UFM. |
| 4 | Fulinta xalka kiiska iyo falcelinta cabashada | 21 beri gudahood | Maamulaha barnaamijka oo caawimo ka helaya GXC. |
| 5 | Diiwaangelinta cabashada iyo tallaabooyinka la qaaday iyo u gudbinta warbixinta UFM. | 21 beri gudahood | Khabiir SS ah iyo GXC oo ay caawisay UFM. |
| 6 | Kor u qaadida dacwadda oo la gaarsiiyo nidaamka garsoorka qaranka, haddii uu dacwooduhu rabo. | Wakhti walba | dacwoodaha |
| * Haddii wakhtigan aan lagu dabooli karin, cabtaha waxaa lagu wargelin doonaa qoraal in GXC ay u baahan tahay waqti dheeri ah. | | | Khabiir SS ah iyo GXC oo ay caawisay UFM. |

99. **Cabashooyinka la xiriira GSJ/KGXDh:** Si looga fogaado halista ceebaynta, uga sii darida dhaawaca maskaxeed/nafsiyeed iyo aargoosiga suurtagalka ah, HC waa in ay lahaataa qaab ka duwan oo xasaasi ah oo wax looga qabto kiisaska GSJ/KGXDh, loolana tacaalaa si waafaqsan ogolaanshaha iyo warqabka dacwoodaha. Meesha kiiskan oo kale laga soo tabiyo, dhibanaha waa in la siiyaa macluumaad ku saabsan oo lagaga caawinayo xalinta cabashadiisa, sida:: Taageero caafimaad, maskaxeed iyo sharci oo habboon oo sir ah; hoy degdeg ah; iyo adeeg kasta oo kale oo lagama maarmaanka ah, sida ku habboon oo ay ku jiraan kaalmada sharciga ah. Dhammaan shaqaalaha iyo xarumaha HC waa in lagu wargeliyaa in haddii kiis GSJ/KGXDh loo sheego, macluumaadka kaliya ee ay tahay inay qabtaan waa haddii dhacdadu saamayso shaqaale mashruuca ka mid ah, nooca dhacdada, da'da iyo jinsiga cabtaha iyo haddii badbaadaha/dacwoodaha loo gudbiyay qaybta adeeg bixinta la tacaalidda degdegga ah. Haddii shaqaale ka tirsan mashruuca uu ku lug leeyahay, dhacdada, waa in si degdeg ah loogu wargeliyaa Maareeyaha Barnaamijka ee Heerka DFS ,kaas oo bixin doona tilmaamo dheeraad ah, ka dib marka uu la tashado Bangiga Adduunka. Tan waxaa hoosta looga xariiqay qorshaha ka hortagga iyo falcelinta ee KGXDh.

100. Habka cabashada mashruuca waxa hoosta looga xariiqay/lagu dhex sheegay Qorshaha ka qaybgalka Daneeyayaasha. Kuwa soo socdaa ,waa organogram-ka/qab dhismeedka mashruuc iyo habka cabashada shaqaalaha:

101. Habka cabashada shaqaaluhu kama horjoogsan doono/diidi karo helitaanka hababka kale ee maamulk iyo garsoorka ee sharciga, hababka garqaadida ama wadooyinka lagu heli karo heshiisyada wadar-ogolka.




102. Shaqaalaha rayidka ah, waa in ay lahaadaan guddiyo goob shaqo iyo sidoo kale guddiyada dalacsiinta iyo anshaxa waa in ay ka jiraan dhammaan xafiisyada dawladda, si ay u taageeraan shaqaalaha, una ilaaliyaan xuquuqdooda.. Guddiyadaas waa in la hormariyaa/la dhisaa oo xoojiyaa, haddii ay suurtagal tahay. Haddii aan eegno dhanka shaqaalaha aan rayidka ahayn, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa leh guddiga xallinta khilaafaadka shaqada ee loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha, kuwaas oo ka caawin kara xallinta cabashooyinka shaqada.

## 10. MAAMULIDDA QANDARAASLEYDA

103. **Doorashada qandaraaslayaasha:** Mashruuca Abaar-Tir, waxa uu u isticmaali doonaa dukumentiyada wax iibsiga ee Baanka Adduunka ee lagu maamulo shaqooyinka codsiga iyo qandaraasyada. Kuwaas waxaa ka mid ah: shaqada iyo shuruudaha CBS. UIMQ waa in ay samayso dadaal macquul ah si ay u xaqiijiso in qandaraaslaha hawlgelinaya shaqaalaha qandaraasleyda ah, uu yahay mid sharci ah oo maamula shirkad la isku halayn karo,taas oo awood u leh in ay u hogaansanto shuruuddaha khuseeya ee hoos yimaada HMS, shuruudahaas oo lagu saleeyay xogta dukumeentiyada wax iibsiga ee Bangiga Adduunka. Shuruudaha noocaan ah, waa in lagu daraa dukumeentiyada tartanka lagu maamulayo. Iyada oo qayb ka ah habka lagu dooranayo qandaraaslayaasha hawlgelin doona shaqaalaha qandaraaslaha ah, UIMQ way eegi kartaa macluumaadka soo socda:

i. Shatiga ganacsi, diiwaangelinta, oggolaanshaha iyo aqbalaada;
ii. Diiwaanada dadweynaha, tusaale ahaan: diiwaanka shirkadaha iyo dukumentiyada dadweynaha ee la xiriira xadgudubka ee lagu samayn karo sharciga shaqada; diiwaanka shilalka iyo dhimashada iyo ogeysiisyada maamulka; dacwadaha shaqada la xiriira;
iii. Dukumentiyada la xiriira nidaamka maaraynta shaqada qandaraaslaha iyo nidaamka CBS, tusaale: buug-gacmeedyada KhD, barnaamijka badqabka, shakhsi gaar ah oo leh masuuliyadaha iyo awooda CBS loo qoondeeyay, macluumaadka ku saabsan waxqabadkoodii hore ee dhabta ahaa ee la xiriiray CBS (shilalka, xadgudubyada, tirakoobka CBS, iwm.); iyo
iv. Qandaraasyadii hore ee qandaraaslayaasha iyo alaab-bixiyeyaasha (oo muujinaya ku darida qodobbada iyo muddada ka tarjumaysa shuruudaha shaqada iyo xaaladaha shaqada);
v. Caymiska qandaraaslaha haddii ay dhacdo timaado, oo ay ku jiraan mas'uuliyadda dhinac saddexaad;
vi. QMDB Qandaraasleyda oo ay ku jiraan shuruudaha CBS, warbixinta shilalka halista ah, shaqaalaha HC iyo faqrooyinka 80-92.

104. **Qodobada heshiiseed iyo sixida hogaan-diidnimo:** UIMQ waa inay mideeyaanshuduudaha maamulka shaqada ee la isku raacay, gaar ahaan dukumentiyada tartanka ee heshiis qandaraaseedka qandaraaslaha, si wadajira oo habboon sixida 43ogan-diidnimada (sida qodobka xannibidda 10% lacag bixinta qandaraaslaha haddii loo hogaansami waayo, iyadoo lala xiriirinayo oo lagu salaynayo deegaanka, bulshada, shuruudaha caafimaadka iyo badqabka; shaqo ka saaridda qof). Marka laga hadlayo qandaraas-hoosaadyada, UIMQ waxay u baahan doontaa qandaraasluhu inuu ku daro shuruudo u dhigma iyo sixida hogaan-diidnimada heshiisyada qandaraaseed

105. **Kormeerka Waxqabadka:** UIMQ waa in ay dhistaa agabka iyo habraacyada lagu maareynayo, laguna kormeerayo waxqabadka qandaraaslaha ee la xiriira HMS. UIMQ waxay hubin doontaa in qandaraasyada lala galay la-taliyayaasha (iyo TPM, halka lagu dabaqayay),ay si cad u qeexayaan mas'uuliyadda kormeeridda ee waxqabadka qandaraaslayaasha shaqada iyo xaaladaha shaqada ee maalin kasta dhacaya.

Korjoogteynta waxaa ku jiri kara baaritaanno, iyo/ama hubinta xarumaha mashruuca ama goobaha shaqada iyo/ama diiwaannada maamulka shaqada iyo warbixinnada uu soo ururiyey qandaraasluhu. Diiwaanka maamulka shaqada qandaraaslayaasha iyo warbixinnada ay tahay in dib loo eego ,waa inay ka mid ahaadaan kuwan soo socda:

i. Tusaale u taagan qandaraaska shaqaalaynta iyo XAN la saxiixay.
ii. Cabashooyinkii ka yimid bulshada, shaqaalaha iyo xalkoodii.
iii. Warbixinnada la xiriira dhimashada, dhacdooyinka iyo hirgelinta tallaabooyinka sixitaan.
iv. Diiwaanada la xiriira dhacdooyinka u hogaansan la'aanta Xeerka Shaqada Qaranka iyo qodobada HMS; iyo
v. Diiwaanada tababbarada la siiyay shaqaalaha qandaraaska haysta, si ay u sharxaan khataraha OHS iyo tallaabooyinka ka hortagga.

## 11. SHAQAALAHA SAADKA ASAASIGA AH

106. **Xulashada qandaraaslayaasha:** Marka laga hadlayo shaqada alaab-bixiyayaasha koowaad, mashruucu wuxuu u baahan doonaa caddaymo la xiriira ilmo-ku-shaqaysiga/shaqada khasabka ah, iyo khatarta CBS iyo tallaabooyinka yaraynta mushkiladahaas. Si taxadar leh ayaa loo fulin doonaa,waxaana qandaraasyada lagu bixin doonaa qodobbo cad oo ay ku jiraan ka warbixinta dhacdooyinka halista ah, kuwaas oo sabab u noqon doona joojinta qandaraaska haddii aan loo hoggaansamin. Haddii ay ku habboon tahay, mashruuca waxaa looga baahan doonaa inuu ku daro shuruudo gaar ah oo ku saabsan ilmo-ku-shaqaysiga/shaqada khasabka ah iyo arimaha CBS dhammaan dalabaadka iibka iyo qandaraasyada alaab-bixiyeyaasha koowaad. Badqabka shaqaalaha oo ay weheliyaan habraacyada kale ee maaraynta shaqadu waa inay ahaato mid cad ee dhammaan qandaraasyada iyo dukumeentiyada tartanka iyo wakiilka madaxabanaan. Sababaha shaqada looga joojin karo qandaraaslayaasha waxaa ka mid noqon doona; shilal halis ah oo aan looga warbixin UIMQ 48 saacadood gudahood.

107. **Habka hagaajinta:** Haddii ilmo-ku-shaqaysiga/shaqada khasabka iyo/ama CBS oo ay ku jiraan khataraha badqabka la caddeeyo, UIMQ iyo/ama la-taliyayaashu, waxay uga baahan doonaan alaab-bixiyaha koowaad inuu qaado tillaabooyinka hagaajinta/xajinta ee ku habboon. Cabirada yaraynta noocan oo kale ah, ayaa si joogto ah loola socon doonaa, si loo xaqiijiyo waxtarkooda. Haddii tillaabooyinka yaraynta lagu ogaado in aanay waxtar lahayn, UIMQ iyo la-taliyeyaashu, waxay, muddo macquul ah gudaheed, u wareejin doonaan alaab-bixiyeyaasha koowaad ee mashruuca alaab-bixiyeyaal muujin kara inay buuxinayaan shuruudaha la xiriira.

## 12. SHAQAALAHA BULSHADA

**Shaqaalaha bulshada**

Shaqaalaha bulshada looma saadaalin mashruucan. Shaqaalaha bulshadu waa dad u shaqeeya ama ku hawlan bixinta shaqada bulshada, taasoo qayb ka ah tabarucaadka bulshada ee mashruuca. Haddii loo arko inay lagama maarmaan u yihiin mashruuca, amaahiyuhu wuxuu u baahan doonaa tallaabooyin lagu hirgelinayo, si loo hubiyo in shaqadaas lagu bixin doono si ikhtiyaari ah, taasoo ka dhalatay heshiis shakhsi ama bulsho. Dhammaan shaqaalaha bulshada ee ku hawlan mashruucan, waxa lagu maamuli doonaa heshiisyo qoran oo ay ku jiraan shuruudaha shaqadaas lagu bixin doono. Heshiisyada qoran waxaa ku jiri doona faahfaahin ku saabsan waxyaabihii lagu heshiiyey, qaabkii lagu gaaray heshiiska, iyo sida loo metelo shaqaalaha bulshada. Heshiisku waxa uu sawir ka bixinayaa naqshadaynta mashruuca iyo habka go'aannada lagu gaadho bulshada dhexdeeda. Iyadoo heshiisyada shaqsiga ah ee lala galo shaqaalaha bulshada laga yaabo inaan loo baahnayn inay qoraal ahaadaan, haddana inta lagu gudo jiro kulanada bulshada ee khuseeya wadahadalka mashruuca ayaa waxa la diyaarin doonaa qoraal. . Mashruucu wuxuu diyaarin doonaa qoraalada shirarka noocaan ah, wuxuuna la wadaagi doonaa bulshada, shaqaalaha bulshada, iyo wakiiladooda.

## LIFAAQA 1: SOOKOOBIDA ARIMAHA E&S EE LA SHAACIYAY, INTA LAGU GUDA JIRAY TALO-BIXINTA DANEEYAHA IYO YARAYNTA TALLAABOOYINKA LASOO JEEDIYAY

Talo-bixinta daneeyaha ayaa dhacday 4th December 2021 iyadoo la adeegsanayo aaladaha E&S, taas oo ay ka qaybqaateen 5 dumara iyo 22 rag ah oo ka kala socda haay'adaha dawlada, kuwa aan dawliga ahayn iyo ururada kale. La-tashiyo dheeraad ah oo gaar ahaan ku saabsan habraaca maamulka shaqada (HMS), ayaa lala sameeyay mashaariicda kale ee Bangiga Adduunka oo ay ku jirto RCRF, mashruucan oo si dhow ula shaqeysa guddiga shaqaalaha rayidka ah, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee Federaalka (WSAB) iyo mashaariicda kale ee Baanka Adduunku ka taakuleeyo arrimaha maamulka shaqaalaha. Khabiirka bulshada ee khuseeya arimaha la xiriira gacan ka hadalka ku salaysan jinsiga GSJ ee mashruucaas ayaa dib u eegay Habraaca Maamulka Shaqada (HMS) oo la wadaagay khibrado kala duwan oo ku saabsan Habka Cabashada(HC) iyo xeerka anshaxa la tixgeliyey.

Agendaha

| **Wakhti** | **Kulan** | **Hogaan** |
|---|---|---|
| 9-9.15 | Furitaanka iyo hordhaca mashruuca | Abdirizack Mohamed Muhumed<br>Agaasimaha Guud Wasaarada Qorsheynta Qaranka , isuduwaha mashruuca |
| 9.15-11 | Khataraha bulshada iyo tallaabooyinka yaraynta iyo qorshaha ka qaybgelinta daneeyayaasha iyo dood<br>Qorshaha ka mid noqoshada iyo Maareynta Dib-u-dejinta Qaab-dhismeedka iyo doodaha<br>Ka hortagga iyo ka falcelinta Ka faa'iidaysi Galmo, Xadgudub iyo dhibaatayn (KGXDh) | Abdihameed Hassan, kha |
| 11-11.15 | Nasasho | |
| 11.15-11.45 | Khataraha deegaanneed iyo tallaabooyinka yaraynta | Najeeb Abdullahi Ahmed<br>Khabiir deegaan |
| 11.45-12.30 | Dood iyo xiritaan | Abdirizack Mohamed Muhumed, Agaasimaha Guud Wasaarada Tamarta iyo Khayraadka Biyaha (WTKhB)<br>Suban Nur, isuduwaha mashruuca |

**Ka qaybgalayaasha**

| Magaca | Doorka, Ururka | Email |
|---|---|---|
| Ayan Said | RCRF Project, khabiir GSJ | Ayan Said <ayanita.mof@gmail.com> |
| Adow Mohamed Adan | Senior Social Safeguard Specialist | adow46@gmail.com |
| Said Mohamed Said | PRADO Aid Development organization - Garowe - Puntland - Somalia | Prado.org123@gmail.com |
| Muhumed Hussein | Social Safeguard Consultant | Muhumed.hussein@gmail.com |
| Mohamed Cartan | Gasiir Development Forum (GDF) | mohamedartan22@gmail.com |
| Ahmed Mohamed Adan | WASH project manager | sardbay23@gmail.com |
| Abdishakur Isse Hash | Ministry of Finance for the Galmudug State of Somalia, Social Safeguard Specialist | daangaab10@gmail.com. |
| Mohamed Cartan | Gasiir Development Forum (GDF), Dhahar, Sanaag. | mohamedartan22@gmail.com |
| Ibrahim Ambar | Concern Worldwide | Ibrahim.ambar@concern.net |
| Jaffer Aminullah | Action Against Disasters Somalia, (AADSOM), Program Manager | jaffer.aminullah@aadsom.org |
| Rahmo Omar | RCRF, Hirshabele, social specialist | rahmoomar9@ gmail.com |
| Ahmed Mohamed Hasan | Director of Hydrometeorology MoEWRS | hydrometeorology@moewr.gov.so |
| Sadia Yusuf Abdi | Gender expert, MoEWRS | Sacdiyo214@gmail.com |
| Suban Nu | Project coordinator, MoEWRS | Subannur38@gmail.com |
| Najeeb Abdullahi Ahmed | Environmental Specialist, SEAP-PIU (MoWER) | Najiib_98@hotmail.com |
| Abdihameed Hassaan | Social safeguard Specialist, SEAP-PIU (MoWER) | abdihamid12@gmail.com |

| | | |
|---|---|---|
| Kafi Nidamudin Adam | Social safeguards/Community Development Specialist Biyoole Project,Puntland/FGS | kaafinidam@gmail.com |
| Abdi Nur Abuu | Environmental and climate change Adviser, SWS Ministry of Environment | abdifarmer01@gmail.com |
| Ummul Khair Mohamoud | Environmental and climate change Adviser, Galmudug Ministry of Environment | khairiamahmoud9@gmail.com |
| Yassin Ahmed M. | Environmental and climate change Adviser, Hirshabelle Ministry of Environment | honyaaska@gmail.com |
| Iman Abdullahi | CARE International | iman.abdullahi@care.org; gure.farah@care.org |
| Abdirashid Haji | Concern Worldwide | haji@concern.net; ahmed.dirshe@concern.net |
| Dr Jiran | Mercy Corps | djiran@mercycorps.org agedi@mercycorps.org |
| Suleiman Ahmed | Danish Refugee Council (DRC) | suleiman.ahmed@drc.ngo william.babumba@drc.ngo |
| Mohamed Geelle | Relief International | mohamed.geelle@ri.org |
| Ibrahim | International Medical Corps (IMC) | |
| Khadar Ahmed | ANPPCAN-SOM | anppcansom.mogadishu@gmail.com / khaddar.ahmed@anppcansom.org |
| Ahmed Sheikh Ahmed | Chemonics International inc. | asheikhahmed@somaliasfsa.com / bclay@somaliasfsa.com, |

**Sookoobidda arimaha la xiriira E&S iyo tallaabooyinka yaraynta khatarta**

| | |
|---|---|
| | Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta ayaa si faahfaahsan uga warbixisay arrimaha bulshada iyo deegaanka ee mashruuca cusub ee GW4R ,sidoo kale tallaabooyinka yaraynta ee la soo jeediyay si loo adeegsado,kuna jira ee lagu sheegay HMDB, qorshaha ka qaybgalka daneeyaha iyo qaab-dhismeedka qorshaha dib-u-dejinta (QQD) ee daneeyayaasha. Tani waxa ay dheerayd ku ahayd dulmarka guud ee mashruuca iyo diiradda istaraatiijiyadeed ee uu bixiyay Agaasimaha Guud AG. |

<table>
<tr>
<td></td>
<td colspan="2">Qaar ka mid ah qaab-dhismeedka, arrimaha, siyaasadaha iyo aaladdaha muhiimka ah ee sida faahfaahsan looga hadlay, waxaa ka mid ah;<br>- Ujeedooyinka guud iyo maangalnimada hab-dhismeedka Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (HMDB);<br>- Soo bandhigid qoto dheer oo ku saabsan qaab-dhismeedka sharci-dejinta iyo siyaasadda jirta iyo goldaloolooyinka la xiriira ilaalinta deegaanka iyo bulshada;<br>- Bixinta/shaacinta dulmarka Badbaadada Deegaaneed iyo Bulsheed ee Bangiga Adduunka, ee daneeyayaasha,taas oo ku saabsan fahamka iyo sida loola xiriiriyo HDB kala duwan;<br>- Khataraha bulsho iyo deegaan ee ka iman kara mashruuca ayaa si faahfaahsan loogu soo bandhigay ka qaybgalayaasha, intii lagu guddo jiray kulanka Daneeyayaasha shirka. Aqoonsiga khatarta, qorshaynta tallaabooyinka yaraynta khataraha iyo la xiriirka dadka ay qusayso ee daneeyayaasha, waxaa si fiican u sheegay khabiirka arrimaha bulshada. Waxaa sidoo kale la ogeysiiyay ka qaybgalka joogtada ah ee daneeyayaasha mashruuca.<br>- Sidoo kale, waxaa la soo bandhigay Habka Xalinta Cabashooyinka (HXC) iyo siyaabaha kor loogu qaado/wax ka qabashada cabashooyinka mashruuca. Tan waxa ku jira xalinta sirta ah ee arrimaha xasaasiga ah, sida GSJ.<br>- Qorshaha waxqabadka iyo ka hortagga GSJ ee mashruuca ayaa la soo bandhigay, si looga jawaabo khatarta GSJ/KGXDh ee mashruuca, taas oo ay ku jiraan saxiixa Xeerka Anshaxa ee dhammaan shaqaalaha mashruuca. Dulmar ku saabsan caqabadaha khilaafka dhulka, fariimaha yaraynta ee maaraynta dib u dejinta iyo magdhowga, ka hortagga saamaynta xun ee mashruuca iyo ka-qaybgalka hufan ee daneeyayaasha barnaamijka.</td>
</tr>
<tr>
<td></td>
<td>Arimaha la shaaciyay/kor lo sheegay</td>
<td>Side loogu tibaaxi doonaa mashruuca dhexdiisa</td>
</tr>
<tr>
<td>1.</td>
<td>Doorarka iyo masuuliyadaha hay'adaha fulinta mashruuca ee labada dhinac DFS iyo DGX, waa in si saaxi ah loo sheegaa.</td>
<td>AG ayaa hoosta ka xariiqay qaar ka mid ah hay'adaha qabanqaabada mashruuca iyo baahida wadahadal joogto ah oo lala yeesho dhammaan daneeyayaasha tooska ah ee dhammaan wejiyada mashruuca. Unugga fulinta mashruuca ayaa yeelan doonta masuuliyadda guud ee mashruuca, taasoo ay dejin doonto Wasaaradda Biyaha oo wakiil ka ah dhammaan DGX.<br>Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan doorarka masuuliyadaha ayaa si cad loogu muujin doonaa waraaqaha mashruuca,si si wanaagsan loogu fahmo. Sidoo kale, qaar ka mid ah dukumeentiyada mashruuca, ayaa lala wadaagi doonaa unugyada dibadda ee dhammaan ku xiran mashruuca.</td>
</tr>
</table>

| | | |
|---|---|---|
| 2. | Caddayn ku saabsan hor-u-socodka heerka horumarinta mashruuca | Mashruuca wali waa la diyaarinayaa; waxaase jiray ka qaybgalka horumarsan oo si toos ah ay u fulinayaan hay'adaha horumarinta mashruuca ilaa heerkan lasoo gaaray. |
| 3 | Sidee Soomaaliya ula wadaagi doontaa/uga raadin doontaa xogta iyo macluumaadka dalalka deriska ah ee mashruucan? | Xarun dhexe oo xog ururin ayaa loo samayn doonaa mashruucan khuseeya heer goboleed. Wasaaradda biyuhu waxa ay ku shaqayn doontaa hanaanka/nidaamka la sameeyay, lana shaqan doonta haay'adaha sida IGAD oo ku hawlan ka shaqaynta iyo xog-wadaaga wadamada deriska ah. |
| 4 | Sababta xoogga loo saarayo BDh iyo inaan laga farqabsan biyaha dusha sare ee dalka. | Mashruucu wuxuu diiradda saarayaa biyaha dhulka (BDh), sahmin, khariidad samayn iyo tabobbaridda kheyraadka BDh ee dalka, ka sokow ka faa'iidaysiga hadda ee ilaha kale ee biyaha.<br>Roobab la'aanta iyo abaaro is-daba-joog ah awgood, ku filnaansho la'aanta iyo gabowga kaabayaasha biyaha ee oogada, Wasaaraddu waxay u aragtaa in BDh yihiin beddelka suurtagalka ah. |
| 5 | Sidee loo fulinayaa waxqabadyada mashruuca? | Hadafka mashruuca ayaa ah in la kordhiyo awood dhisida xrifadda shaqaalaha.<br>Dawladda federaalku waxay siin doontaa maamul goboleedyada awood aqooneed oo ay ku fuliyaan howlahooda, dawladda federaalka iyo bangiga adduunka ayaa kormeeri doona tallaabooyinka waxqabad ee mashruuca. |
| 6 | Sidee ayuu mashruucu uga gudbi doonaa arrimaha xuduudaha ee dawlad goboleedyada oo ay Somaliland ku jirto? | Naqshada mashruuca waxa hagi doona la tashi buuxa oo lala yeehso dhammaan dhinacyada daneeyayaasha mashruuca, gaar ahaan bulshooyinka dheefsadayaasha ah/ka faa'idaystayaasha, si looga hortago muran kasta oo yimaada fulinta mashruuca iyo khilaafyada hawlgelintiisa.<br>Goobta iyo sidii loo xalin lahaa arrimaha xudduudaha ee xasaasiga ah, waxaa ka socda dood u dhexeysa madaxda dawladda federaalka. |
| 7 | Sidee mashruucu u maarayn doonaa khataraha bulshada? | Khatarta bulsheed iyo deegaanka in la ogaado, la dejiyo oo la yareeyo, si loo dhimo saamaynta taban ee mashruuca ama daneeyayaasha mashruuca. |

| | | |
|---|---|---|
| | | Mashruucu waa in uu helaa khuburo ku dhiiran arimaha bulshada iyo deegaanka si ay uga caawiyaan fulinta arimaha la xiriira bulshada. Mashruucu wuxuu mudnaan siin doonaa dhisida awoodda iyo aqoonta shaqaalaha iyo taageerada wakaaladdaha iyo waaxaha fulinta. Wadaagista macluumaadka daneeyayaasha iyo habka ay ku cabiraan aragtiyaha iyo cabashooyinka. Waxaa la dhisi doonaa oo loo gudbin doonaa daneeyayaasha mashruuca, si waxtar lehna looga faa'iidaysto. Waxa kale oo jiri doona maaraynta sirta ah ee tabashada iyo cabashooyinka xasaasiga ah sida GSJ. Mashruucu wuxuu si taxadar leh xooga u saarayaa yaraynta khatarta bulshada. |
| 8 | Miyay Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka biyuhu samaysay khariidad ku saabsan goldaloolada BDh ee heer federaal? | Khariiradda wali lama dhammaystirin. |
| 9 | Sidee mashruucan u caawin doonaa bulshada? | Bulshada waxaa loo samayn doonaa adeeg biyood wanaagsan, sidoo kale waxaa loo tababari doonaa sidii ay u maamuli lahaayeen bar biyoodkooda. |
| 10 | Mashruucan ma laga hirgelin doonaa magaalooyinka iyo dhulka miyiga ah? | Mashruucu wuxuu samayn doonaa daraasad ku saabsan suurtogalnimada meelaha mashruuca laga fulin karo. Sidoo kale, mashruucwaxa qayb ka ahka qaybgalka bulshada. |
| 11 | Sidee mashruucu u xalin doonaa arrimaha muranka dhulka? Dhulku waa isha ugu weyn ee khilaafyada iyo iska hor imaadyada dalka ka jira, iyo loolanka kheyraadka yar ee biyaha | Dadka deegaanka iyo dadka isticmaala dhulka ayaa la sheegi doonaa/la qeexi doonnaa, heshiisyadana waa laga ilaalin doonaa dhammaan kooxaha ay ku jiraan dawladda hoose iyo gudoomiyeyaasha gobolada. Waxa la taageeri doonnaa hufnaanta iyo sinaanta xulashada goobaha biyaha ee shuruucda waafaqsan. |
| 12 | Isku-dubbaridka hawl-wadeennada kale ee dawladda ee khibradda u leh meelaha gaarka ah ee quseeya , tusaale ahaan, arrimaha deegaanka; Qaar ka mid ah siyaasadaha lagu sheegay bandhigga, Agaasinka Deegaanku | Mashruucu waxa uu la kaashan doonaa wakaaldaha kala duwan ee dawladda, si ay uga faa'idaystaan khibradooda, ugana qayb qaataan taageerada mashruuca. |

| | | |
|---|---|---|
| | waxa ay horay uga soo shaqeeyeen siyaasadda. | |

**Faallo/dood**

Ka soo qayb galayaasha ayaa si fir fircoon uga qayb qaadanayey doodaha kulanka, waxaana ay la wadaageen madasha dareenkooda iyo talooyinkooda ku aaddan mashruuca. Qaar ka mid ah ka qeyb galayaasha ayaa walaac ka muujiyay lahaanshaha dhulka iyo sidii mashruucan looga hirgelin lahaa dhulka miyiga ah, iyadoon colaad laga dhex dhalin beelaha. Waxyaabihii ugu waaweynaa ee ay ka soo qeyb galayaashu ka hadleen waxaa ka mid ahaa: in dawladda federaalka ay gebi ahaanba masuul ka tahay fulinta mashaariicda ama in dawladda federaalka ay u igman doonto masuuliyadda maamul goboleedyada. Si kastaba ha ahaatee, ka qaybgalayaashu waxay ku qanceen soo bandhigida guud ee mashruuca ay gudbiyeen kooxda mashruuca maamulaysa.

LIFAAQA 2: TILMAAMIDDA KU AADDAN XEERKA ANSHAXA

Xeerkan Anshaxa (XAN), waxa loo diyaariyay in uu qayb ka ahaadoHabraaca Maamulka Shaqada (HMS) ee mashruuca Abaar Tir. XAN waxaa saxiixi doona dhammaan shaqaalaha qandaraasleyda ee la qaatay, si ay u gaarsiiyaan dhinac kasta oo mashruuca khuseeya. XAN waxa la waafajin doonaa baahiyaha hay'adda/wakaalada. XAN waxaa loo tarjumi doonaa luqadda Soomaaliga (haddii loo baahdo), si loo hubiyo in mid kasta oo ka mid ah shaqaalaha uu si cad u fahmay qodobbada oo uu u oggolaado shuruudaha. Waxa saxiixi doona shaqaalaha, kaas oo haysan doona nuqul, halka qandaraaslaha/wakaaladu ay hayn doonaan dukumeentiga saxiixan ee asalka ah.

1. XAN lagu qanco wuxuu ka koobnaan doonaa waajibaadka saaran dhammaan shaqaalaha mashruuca (ay ku jiraan qandaraasle-hoosaadyada), kuwaas oo ku habboon inay ugu yaraan wax ka qabtaan arrimaha soo socda: Waajibaadyo dheeraad ah ayaa lagu dari karaa, si looga jawaabo walaacyada wasaaraddaha, goobta shaqada, iyo aagga mashruuca ama shuruudaha gaarka ah ee mashruuca.

2. XAN waa in lagu qoraa luuqad la wada fahmi karo oo faseex ah, waxana saxeexi doona shaqaale kasta, iyadoo lagu xigsiin doono hanuunista iyo wacyigelinta si loo ogaado inay:

- Heleen nuqul ka mida ah xeerka.
- Loo sharaxay xeerka.
- Qireen in adeecidda XAN ay tahay shuruud shaqo; iyo
- Fahmeen in ku xadgudubka Xeerka ay keeni karto cawaaqib xumo, ilaa iyo ay ku jirto cayrinta, ama u gudbinta hay'adaha sharciga.

3. Qandaraasluhu waa inuu sameeyaa wacyigelin joogto ah iyo hawlo tababbar si loo hubiyo in shaqaaluhu ay adeecaan XAN (sida aaladaha wadahadalka). Qandaraasluhu waa inuu sidoo kale xaqiijiyaa in bulshada deegaanku ay ka warqabaan XAN , taas oo awood u siinaysa inay soo sheegaan wixii walaac ah ama u hoggaansamid la'aan ah ee timaada mashruuca.

4. Arimaha ay tahay in la sheego waxaa ka mid ah:
    a) Adeecidda **sharciyada, xeerarka, iyo xeerjajabka** ee xukunka.
    b) Adeecida **shuruudaha caafimaadka iyo badqabka** ee lagu dabaqi karo (ay ku jirto xirashada qalabka ilaalinta shaqsiyeed ee la qoray/tilmaamay, ka hortagga shilalka laga baaqsan karo iyo waajibka ah in la soo sheego xaaladaha ama dhaqamada khatarta ku ah badqabka ama khatar gelinaya deegaanka).
    c) Isticmaalka waxyaabaha sharcidarrada ah.
    d) **Takoor la'aan** (tusaale ahaan iyadoo lagu saleynayo heerka qoyska, qowmiyadda, sinjiga, jinsiga, diinta, luqadda, xaaladda guurka, dhalashada, da'da, naafanimada, ama xukun siyaasadeed).
    e) **Isdhexgalka xubnaha bulshada** (tusaale ahaan in la gudbiyo habdhaqan ixtiraam iyo takoor la'aan).

f) **Xadgudub galmo** (tusaale ahaan in la mamnuuco isticmaalka luqadda ama dhaqanka, ee ku wajahan haweenka ama carruurta, taas oo ah mid aan habboonayn, dhibaato ah, aflagaado ah, kicin galmo, quursi ama dhaqan ahaan aan gabi ahaanba habboonayn).
g) **Gacan-ka-hadalka iyo fara-xumaynta,** (tusaale ahaan mamnuucida isku beddelka lacagta, shaqada, alaabta, ama galmada, oo ay ku jiraan fududayn galmo ama noocyada kale ee bahdilaadda, sharaf-dilka ama dhaqanka ka faa'iidaysiga).
h) **Ilaalinta carruurta** (oo ay ku jiraan mamnuucida xadgudubka, dhaqan-xumada, ama dabeecadaha kale ee aan la aqbali karin ee ka dhanka ah carruurta, xaddidaya isdhexgalka carruurta, iyo hubinta ammaankooda meelaha mashruuca uu ka socdo);
i) Shuruudaha **Faya-dhowr** (tusaale ahaan, in la hubiyo in shaqaaluhu isticmaalaan tasiilaadka fayadhowrka ee cayiman,kuwaas oo uu bixiyay loo shaqeeyuhu,iyo inay yihiin meelo furan).
j) **Ka fogaanshaha xiisadda khilaafyada** (sida dheefaha, qandaraasyada, ama shaqada, ama nooc kasta oo doorbidid ah ama fududayn, in aan la siin qof kasta oo uu jiro xiriir dhaqaale, qoys, ama shakhsi).
k) **Ixtiraamidda tilmaamaha shaqo ee maangalka ah** (oo ay ku jiraan wax ku saabsan caado deegaaneed ama bulsheed).
l) **Ilaalinta iyo qun u adeegsiga hantida** (tusaale ahaan, si looga fogaado xatooyada, taxadar la'aanta ama luminta);
m) Waajibka in laga warbixiyo xadgudubyada Xeerkan.
n) **Ma jiro karo wax aargoosi ah oo ka dhan ah shaqaalaha** kaasoo ah warbixin ku saabsan xadgudubka xeerka, haddii warbixinta loo sameeyo si daacad ah.

Soo gaabintan XAN, oo qayb ka ah Habraaca Maamulka Shaqaalaha (HMS) ee mashruuca Abaar-Tir, ayaa la daabici doonaa oo la geyn doonaa dhammaan xarumaha uu taageeray mashruucu. Waxaa lagu tarjumi doonaa, laguna wadaagi doonaa lahjadaha deegaanka, iyadoo loo eegayo goobta mashruuca laga fulinayo

SAMEE:

- Ula dhaqan xubnaha bulshada iyo jaalka shaqada si xushmad leh, iyadoon loo eegayn jindiga, sinjiga, midab, luqad, diin, ama xaalad kale.
- Joogtee kala fogaanshaha bulshada oo had iyo jeer raac tilmaamaha dawladda iyo WHO ee ka hortagga Covid-19
- Gacmaha dhaqo, had iyo jeer faya-dhowr lahow, oo ilaali kala fogaanshiyaha bulshada ,raacna tilmaamaha la cusboonaysiiyay ee WHO iyo DFS.
- Raadi daryeel caafimaad, haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadaha soo socda (inta aad joogto guriga ama shaqada), sida: qufac, qandho, iyo neef qabasho.
- Kahortagga shilalka laga baaqsan karo iyo ka warbixinta xaaladaha ama dhaqamada khatarta ku ah amniga ama khatarta ku ah deegaanka mashruuca laga fulinayo.
- Isha mari dhammaan hab-maamuuska amniga, si aad naftaada, jaalkaaga shaqada, iyo macaamiishaba uga ilaaliso khataraha amniga.
- U hoggaansan dhammaan shuruucda qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

- **Ka fogow ama ka warbixi xiisad walba oo khilaaf** (sida dheefaha, qandaraasyada, ama shaqada, ama nooc kasta oo doorbidid ah ama fududayn, in aan la siin qof kasta oo uu jiro xiriir dhaqaale, qoys, ama shakhsi).
- **Ixtiraamida tilmaamaha shaqo ee maangalka ah** (oo ay ku jiraan wax ku saabsan caado deegaaneed ama bulsheed ).
- **Ilaalinta iyo adeegsiga wanaagsan ee hantida,** (tusaale ahaan, si looga fogaado xatooyada, taxadar la'aanta ama luminta hantida iyo wixii u dhigma);
- U soo sheeg wixii xadgudubyo ah ee la xiriira XAN , wakiilada shaqaalaha, KD, ama guddiga xallinta cabashooyinka. Qof shaqaale ah oo soo sheega xadgudub la xiira XAN, sinaba looma ciqaabi doono, waxaana ciqaab adag la saari doonaa shaqaalaha, si kastaba u noqotee ka aargoosta shaqaalaha kale ee ku dhiirada in uu soo sheego xadgudubyada dhaca.

**ISKA ILAALI:**

- Qofna hala samayn galmo laga digay , noockasta ha ahaatee.
- Samee galmo haddii kale ogolaansho buuxa aan la bixin iyadoo aysan jirin qaab alaab ah ama qasbid kale.
- Isticmaal khamriga ama maandooriyaha inta lagu jiro saacadaha shaqada.
- Dhibaateynta dadka kale adigoo sababa xaalad caafimaad oo halis gelin karta. .
- Haysashada hubkaaga shaqsiga ah, si aanay mushkilada uga iman
- Imaanshiyaha shaqada,haddii adiga ama mid ka mid ah qoyskaaga aad isku aragtid calaamadaha COVID-19 (qufac, qandho, iyo neefta qabasho). Isla markiiba u wargelikormeerahaaga,haddii adiga ama xubin qoyskaaga ka mid ahi aad leedihiin calaamadaha Covid-19.

LIFAAQ 3: QABYO-QORAALKA XEERKA ANSHAAXA EE DHAMMAAN SHAQAALAHA MASHRUUCA IYO SHAQAALAHA QANDARAASLEYDA AH

Aniga___________________________________________waxaan qirayaa in aan ku adeecayo heerka badqabka, caafimaadka deegaanka iyo bulshada (CBDB), shuruudaha Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada (CBS) a, iyo ka hortagida Gacan-ka-hadalka ku Salaysan Jinsiga (GSJ), iyo gacan-ka-hadal ka dhan ah carruurta (GDC), intaas oo dhamaantood mashruuca u ah muhiim.. Dhammaan noocyada GSJ ama GDC lagama aqbalayo in laga fuliyo goobta shaqada ama lagula dhaqmo bulshada.

Ururku wuxuu u la soconayaa guuldarro timaada, ama inaan la raacin heerka HDB iyo CBS ama ka qayb qaadashada hawlaha GSJ ama GDCtaas oo keeni karta in lagu kaco falal anshax xumo weyn ah, sidaas darteedna ay mudan tahay in la saaro cunaqabatayn, ganaaxyo, ama shaqo laalid. Dacweynta kuwa geysta GBV ama VAC ayaa laga yaabaa in la daba galo, oo talaabo sixitaan ah laga qaado, waa haddii ay habboon tahay markaas.

Waxaan ogolahay in inta aan ka shaqaynayo mashruuca aan samayn doono:

a. Xaadiro oo si firfircoon uga qayb qaato koorsooyinka tababbarka ee la xidhiidha HBDB, CBS, HIV/AIDS, GSJ iyo GDC, sida uu codsaday loo-shaqeeyahaygu.
b. Raaco hagidda loo-shaqeeyahayga ee ka hortagga faafitaanka cudurrada faafa, ee uu ku jiro Covid-19.
c. Raaco hagida loo-shaqeeyahayga ee ku saabsan amniga iyo badqabka, oo ay ku jiraan inaanan sababin isku dhac ama aanan muujin nafteyda, asxaabta kale, daneeyayaasha oo ay ku jiraan xubnaha bulshada, xarumaha mashruuca ama in aanan sabibin khatar hantiyeed.
d. Ula dhaqmo dumarka, carruurta (dadka da'doodu ka yar tahay 18 jir), iyo raggaba, si ixtiraam leh, iyada oo aan loo eegin: jinsiyad, midab, luqad, diin, siyaasad, fikrad, waddan, qowmiyad, asal bulsho, hanti, naafo, dhalasho, ama xaalad kale.
e. U isticmaalin af ama hab-dhaqan xun dumarka, carruurta iyo raggaba, taasi waa mid aan habboonayn oo keeni karta: dhibaatayn, aflagaado, kicin galmo, ceebayn ama dhaqan ahaan aan habboonayn hirgelinta shaqada.
f. In aanan ka qaybqaadan wax galmo xiriir la leh ama waxyeelaynta carruurta (qof kasta oo da'diisu tahay 18 ama ka yar) - oo ay ku jiraan ku shukaansiga warbaahinta dhijitaalka ah, iyadoo lagu danaysanayo. Aaminsanaanta khaldan ee ku saabsan da'da ilmaha ma ahan difaac oo lagu badbaadi karo. Oggolaanshaha ilmuhu sidoo kale ma aha difaac ama cudurdaar aad xukun kaga baxsan karto.
g. Ha ku lug yeelan nooc kasta oo ka mid ah dhibaataynta galmada ee qof aad wada shaqaysaan - tusaale ahaan, samaynta dalbasho galmo aan la soo dhawayn, codsiyo fududayn galmo, iyo dhaqan kale oo hadal ah ama jidheed oo dabeecad galmo leh abuuraya, kuwaas oo ay ku jiraan falaka aan qarsooneyn ee dhaqanka noocaas ahi wato. Tusaale; qof kor iyo hoos ka eegid; dhunkashada, jabaqda yuuska ama dharbaaxida; qof ku gaaf wareegidda; foorida iyo qaylada; bixinta hadiyado shaqsiyeed; Wax ka sheegista nolosha galmada ee qof iwm. Dhibaataynta iyo fara-xumaynta galmadu, waxay ka kooban tahay falal anshax-darro weyn ah, sidaas darteedna waxay sabab u tahay tallaabooyinka edbinta, oo ay ku jirto cayrin.

h. Ha ku lug yeelan nooc kasta oo fara-xumayn ama xadgudub galmeed ah– tusaale ahaan, ku beddelashada lacag, shaqo, alaab, adeegyo galmo, fududayn galmo, samaynta ballanqaadyo ama daaweyn wanaagsan oo ku xiran falalka galmada – ama qaabab kale oo bahdil ah, sharaf dhac ah oo dhaqan fara-xumayn ah wadata. Arintan haddii ay dhacdo waxa la heli doonaa gargaar kasta oo mashruuca la xiriira iyadoo la tixgelinayo xubnaha bulshada. Dhibaataynta iyo fara-xumaynta galmadu waxay ka kooban tahay falal anshax-darro weyn ah, sidaas darteedna waxay sabab u tahay tallaabooyinka edbinta, oo ay ku jirto soo cayrinta.
i. Ha ku lug yeelan anshax-xumo galmo, u isticmaal agabka mashruuca ama lacagaha si aad uga faa'iidaysato xubnaha bulshada.
j. Ula dhaqan xubnaha bulshada iyo asxaabta si xushmad leh, iyadoon loo eegayn jinsi, , midab, luqad, diin, ama xaalad kale.
k. Joogteeya kala fogaanshaha bulshada oo had iyo jeer raac tilmaamaha dawladda iyo WHO ee ka hortagga Covid-19
l. Gacmaha dhaqo, had iyo jeerna faya-dhowr lahow oo ilaali kala fogaanshiyaha bulshada, raacna tilmaamaha la cusboonaysiiyay ee WHO iyo DFS.
m. Raadi daryeel caafimaad haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadaha soo socda (inta aad joogto guriga ama shaqada): qufac, qandho, iyo neef qabasho.
n. Kahortagga shilalka laga baaqsan karo iyo ka warbixinta xaaladaha ama dhaqamada khatarta ku ah amniga iyo deegaanka.
o. Isha mari dhammaan hab-maamuuska amniga, si aad naftaada, jaalkaaga shaqada, iyo macaamiishaba uga ilaaliso khataraha amniga ee iman kara.
p. U hoggaansan dhammaan shuruucda qaranka iyo kuwa caalamiga ah.
q. Ka fogow ama ka warbixi xiisad walba oo khilaaf ah, sida: dheefaha, qandaraasyada, shaqada, ama nooc kasta oo fududayn, in aan la siin qof kasta oo lagu xiriirinayo dhaqaale, qoys ama shakhsi.
r. Ixtiraamidda tilmaamaha shaqo ee maangalka ah (oo ay ku jiraan wax ku saabsan caado deegaaneed ama bulsheed).
s. Ilaalinta iyo adeegsiga wanaagsan ee hantida (tusaale ahaan, si looga fogaado xatooyada, taxadar la'aanta ama luminta hantida);
t. U soo sheeg wixii xadgudubyo ah ee XAN wakiilada shaqaalaha, KD, ama guddiga xallinta cabashooyinka. Qof shaqaale ah oo soo sheega xadgudub ka XAN si daacad ah, lama dhibaateyn doono, waxaana ciqaab adag la saari doonaa shaqaalaha si kasta uga aargoosta shaqaalaha kale ee soo sheega xadgudubyada goobta shaqada ka dhacaya.

Heerarka kor lagu sheegay, ma qeexi karaan dhamaan xadgudubyada. Noocyada kale ee khuseeya ka faa'iidaysiga galmoodka ama dhaqanka xadgudubka galmada oo aan liiska sare ku jirin ayaa laga yaabaa inay sabab u noqdaan tallaabo ciqaab oo maamul.

Ku saabsan carruurta da'doodu ka yar tahay 18 jir:

i. Meel kasta oo suurtagal ah, hubi in qof kale oo weyni joogo marka uu qof weyni ka shaqaynayo meel u dhow carruurta.
ii. Ha ku casuumin gurigaaga carruurta aan lala socon ee aan ehelka ahayn, haddii ay halis ugu jiraan dhaawac ama khatar jireed mooyaane.

iii. Si habboon u isticmaal kombayuutar kasta, talefannada gacanta, ama fiidyowga iyo kamaradaha dhijitaalka ah, oo waligaa ha ka faa'iidaysan ,si aad u geliso sawirada-qaawan ee carruurta baraha bulshada (eeg sidoo kale "isticmaal sawirada shaqada loogu talagalay ee carruurtu leeyihiin").
iv. Jooji edbinta iyo ciqaabta jireed ee carruurta.
v. Jooji shaqaaleysiinta carruurta ee shaqada guriga ama kuwa kale, taas oo aan habooneyn marka loo eego da'dooda ama heerka korriintooda. Arintaasi waxay faragelinaysaa wakhtigii ay xoogga saari lahaayeen, kana faa'idaysan lahaayeen diyaar ahaanshahooda waxbarashada iyo nashaadyada madadaalada ama waxay gelinayaan khatar weyn oo dhaawac nafsi iyo mid jireed ah.
vi. U hoggaansan dhammaan sharciyada maxalliga ah ee quseeya carruurta, oo ay ku jiraan sharciyada shaqada ee la xiriira ilmo-shaqaalaynta.
vii. Isticmaal sawirada carruurta ee ujeedooyinkooda shaqo cadyahay, dhibaatana aan keenayn.
viii. Marka sawir laga qaadayo ama duubayo ilmaha arrimo la xidhiidha shaqada, waa in aad:
    i. Kahor intaadan sawirin ama duubin ilmo, qiimee oo ku dadaal inaad u hoggaansanto caadooyinka deegaanka ka jira ama xudduudaha soo saarista sawirrada shaqsiyeed.
    ii. Kahor intaadan sawir qaadin ama duubin ilmaha, ka hel ogolaansho la og yahay ubadka iyo waalidka ama qofka masuulka ka ah. Qayb ka mid ah hawshani, waa in aad sharaxdaa sida sawirka ama filimka loo isticmaali doono.
    iii. Hubi in sawirada, filimada, fiidiyowyada, iyo DVD-yadu u soo bandhigaan carruurta si sharaf leh oo ixtiraam leh oo aan ahayn hab bahdilaad ah. Carruurta waa in dhar ku filan loo xidho, si aan loo arkin xubnaha muujinaya cawradooda.
    iv. Hubi in sawiradu yihiin matalaad daacad ah oo ku saabsan macnaha guud iyo xaqiiqooyinka mashruuca looga dan leeyahay; iyo
    v. Hubi in summadaha faylalka aysan muujin macluumaadka aqoonsiga ilmaha, marka sawirada loo dirayo si elektaroonik ah.

**Ciqaab**

Waxaan fahansanahay in haddii aan jebiyo Xeerka Anshaxa shakhsiyeed, loo-shaqeeyahaygu uu qaadi doono tallaabooyin edbin ah, oo ay ka mid noqon doonaan:

i. Digniin aan caadi ahayn.
ii. Digniin caadi ah.
iii. Tababbaro dheeri ah.
iv. Mushaar joojin hal todobaad ah.
v. Shaqo ka fariisin (iyada oo aan la bixin mushaar), ugu yaraan 1 bil ilaa ugu badnaan 6 bilood.
vi. Shaqo laalid; iyo
vii. In loo sheego booliiska haddiila dammaanad qaaday.

Waxa aan halkan ku qirayaa in aan akhriyay xeerka anshaxa shakhsiga ah ee kor ku xusan, ogolahay in aan u hoggaansamo heerarka ku jira oo aan fahmo doorkayga iyo masuuliyaadkayga, si aan uga hortago, ugana falceliyo CBDB, CBS, GSJ iyo arrimaha GDC. Waxaan fahnsanahay in

tallaabo kasta oo aan waafaqsanayn Xeerka Anshaxa Shaqsiga ama  in lagu dhaqmo Xeerkan Anshaxa Shaqsiga ay keeni karto tallaabo edbin ah oo saamayn karta shaqadayda.

Saxiix: ______________________
Magac___________________________________________________
Booska/Xilka: _______________________________Taariikh:
_____________________________________

## LIFAAQ 4: SHURUUDAHA CAAFIMAADKA IYO BAD-QABKA SHAQAALAHA

Ujeedada shuruudahaani waa in la bixiyo macluumaadka caafimaad iyo badqab ee ku saabsan khataraha shaqada ee u gaarka ah macmiilka, naqshadeeyaha iyo wakiilka macmiilka. Khatarahani waa kuwo lagu dabaqi karo mashruucan, waxaana laga yaabaa in aanay khasab ahayn in ay noqoto aqoon loo wada leeyahay qandaraaslaha. Qandaraasluhu waa inuu xisaabta ku daraa macluumaadkan oo xaqiijiyaa in hindise-yaashoodu ay ku jiraan ilo ku filan, si ay wax uga qabtaan arrimaha ku faahfaahsan dukumeentigan. Waa in la hubiyaa ilaalinta shaqaalaha, qandaraasle-hoosaadyada iyo dadka kale ee ay saameeyeen hawlaha dhismuhu.

Tixraac waa in lagu sameeyaa qalabyada kale ee E&S oo ay ku jiraan CBS ee qodobada HMDB, HDB2 (oo ay ku jiraan KBA Tilmaamida Guud ee Caafimaadka iyo Badqabka Deegaanka (TGCBD), QMDB ee Mashruuca iyo dukumentiyada wax iibsiga heerka BA

UFM iyo la-taliyayaasha taageeraya hirgelinta shaqada waxay inta badan ku shaqayn doonaan xafiiska, halkaasoo halista CBS lagu qiimeeyay inay yartahay. Marka ay ku shaqaynayaan xafiiska ( khataraha iman kara waxa kamid ah: shoog koronto, dab, COVID-19),iyo sidoo kale in ay taxadaraan marka ay goob shaqo booqanayaan, waxana iman kara (shil taraafiko, ama khatarta la xiriirta cudurrada faafa…). Sidaa darteed, kooxdan shaqaalaha ahi waa inay raacaan dhammaan shuruudaha CBS ee HMS.

Qandaraaslayaasha sida ku badan Soomaaliya, waxaa inta badan ka maqan isticmaalka qalabka is-ilaalinta shaqsiyeed (QIS) iyo dhaqamada badbaadada leh ee goobta shaqada. Qalabka gacmaha lagu dhaqo, faya-dhowrka iyo af-xir inta badan lagama bixiyo goobaha shaqada. Ka faa'iidaysiga waayo-aragnimada iyo casharrada laga bartay mashaariicda la midka ah, Kuwa soo socdaa waa fureyaasha khataraha ee CBS ee la filayo, lana qiimeeyay intii lagu jiray hirgelinta mashruuca.

- Shilalka ay abuuraan wax soo dhacay: Qalab si khaldan loo rakibay, darbiyo furan, godad ku yaal waddooyinka, jaranjarooyinka aan laga taxadarin iyo biraha aan la iska ilaalin ayaa ah khatarta ugu badan ee keenta shilalka shaqada ee shaqaalaha dhismaha.
- Agab soo dhaca: Inta lagu jiro dhismaha, waxaa lagama maarmaan ah in la rakibo noocyo badan oo mashiinnada dhismaha, qalabka iyo walxo shaqada lagu fulinayo. Dhammaan qalabka culus iyo agabka iyo saadka ayaa laga yaabaa inay ka soo dhacaan meel sare oo koofiyadaha, shaqaduna aysan waxtar lahayn. Haddii goobta aan la xirin ama laga yaabo wax kasoo dhacay wiishka inay ku dhacaan meel ka baxsan goobta dhismaha, dadka lugeynaya ayaa sidoo kale laga yaabaa inay ku dhacaan walxahan.
- Shil ka dhashay kanaalada iyo godadka: Inta lagu jiro habka qodista iyo dhismaha bullaacadaha, burbur ayaa dhici kara. Haddii shayga la qoday uu aad ugu dhow yahay kanaal, bullaacadu way dumi kartaa oo keeni kartaa dhaawac halis ah
- Shoog koronto: Gaarista xargaha korantada badan leh ee mara xaga kor ama dhulka hoostiisa, waxay sababi kartaa dhimasho. Qalab koronto oo burburay ama gudbiyeyaasha korontada ayaa sidoo kale sababi kara dhaawac ka dhashay koronto.

- Dhaawac jireed shaqo adag awgeed: Dhaawacyada dhabarka ee ay sababto qaadista walxaha culus ama u qaadida qaab aan habboonayn.
- Agabka culus: Dhaawaca ayaa laga yaabaa inuu ka bilaabmo qalab culus. Mashiinnada ayaa laga yaabaa inay xumaadaan ama hallaabaan. Ku shaqaynta taxadar la'aanta ah ee wiishku , wuxuu sababi karaa dhaawacyo badan, sidoo kale waxqabadyada dhismaha ee ku xiran mishiinnada culus ayaa keeni kara sharqan badan oo dhaawac abuuri karta. Qaylada dheer, ee soo noqnoqota, iyo sawaxanka xad dhaafka ah ee wakhti dheer socdaa, wuxuu sababaa dhibaatooyin maqal, sida dhego la'aan. Sawaxanku waxa kale oo uu noqon karaa khalkhal khatar ah, waxana laga yaabaa in uu ka jeediyo shaqaalaha hawsha uu hayo, taas oo sababi karta shilal.
- Dikhowga yimaada marka cudurrada faafa dillaacaan waa dhibaato weyn. , Haddii aan la joogtayn nadaafada, si dhowna looga taxadirin, gaar ahaan nadaafadda gacmaha, iyo xidhashada af-xir, si ay uga hortagaan fursadahagudbinta fayraska qof ka qof), waxa dhici doonta dhibaato hor leh.

Heerka saameynta ee khatarahan sare ku xusan, waxaa lagu qiimeeyaa: mid yar ilaa mid dhexdhexaad ah, sida: (i) Saameyntu waxay ku kooban tahay goobta dhismaha, waxayna ku kala firiqsan tahay aagag gaar ah; (ii) muddada dhismaha oo gaaban; (iii) shaqaalaha waxaa lasiiyaa qalabka is-ilaalinta, waqti macquul ah oo wax lagu dhiso ayaa jira; (iv) tallaabooyin lagu yareynayo khatarahaan ayaa lagu bixiyay QMDB, waxaana shaqaalaha lagu tababbari doonaa badbaadada shaqada, badqabka taraafikada, fayadhowrka ka hor inta aysan bilaabin wax shaqo rayid ah. Qodobadaas ayaa qiimeynta tilmaami doona.

**Khataraha guud iyo halista ee qandaraasleyda**

- COVID-19
- Saaridda iyo dejinta qalabka
- Boorka iyo sawaxanka
- Gacan ka qabashada/shaqaynta walxaha guud
- Gacmo ku shaqaynta
- Mashiino wareegaya
- Dabka
- Adeegsiga dareere guban og
- Agab gacmeed
- Walxaha halista ah (kiimiko iyo gaasaska)
- Meesha khatarta ah (furinta)
- Nadaafadda
- qalabka is-ilaalinta shaqsiyeed
- Maamulka isbadalka
- Urka shidaalka
- Isku-darka iyo kaydinta agabka goobaha shaqada.
- Masaska iyo meelaha halaq galeenka ah

Alaabta iyo walxaha soo socdaa waxay leeyihiin, ama laga yaabaa, in loo isticmaalo ,waxaana loo aqoonsaday inay keeni karaan khataro caafimaad gaar ah inta uu socdo mashruuca. Tallaabooyin ku habboon ayaa loo baahan doonaa si loo cayimo xakameyntooda:

- Batrool
- Naafto
- Shaliidaha (shidaalka ceyriin)

Xeerarka badbaadada mashruuca iyo/ama shuruudaha soo socda waa in la dhawraa

**Xeerarka badqabka**

| | |
|---|---|
| COVID-19 | • Baaritaan maalinle ah waa in la sameeyaa<br>• Gacmaha dhaq oo si joogto ah u nadiifi<br>• Marwalba xirto af-xir<br>• Ha iman shaqada haddii aad xanuun dareento ama aad muujiso calaamadaha COVID-19<br>• Isla markiiba u sheeg kormeerahaaga haddii aad dareento xanuun intaad shaqada ku jirto |
| Gacan ka shaqaynta | • Dhabarkaaga toosi, Laab jilbaha, ha jiidin hana qaadin, Caawina u raadso alaabaha culus. |
| Kormeer maalinle ah | • Dhammaan qalabka la isticmaalo waa in uu maalin kasta kormeero isticmaaluhu iyo bishiina qof xirfadle ah in arko,xaqiijiyana tayadooda. |
| Isticmaal xumada agabka | • Si joogto ah u baar, u soo sheeg dhammaan cilladaha hal mar, u isticmaal qalabka si saxan oo badbaado leh. |
| Qalabka is ilaalinta | • Hubi inaad u isticmaasho QIS saxda ah, shaqada aad gacanta ku hayso |
| Nadaafada | • Shaqada nadiifka ah waa shaqo badbaado leh, isticmaal haamaha qashinka, dhig alaabta meel ammaana oo nadiif ah, Ka saar qashinka khatarta ah |
| Wadashaqayn kooxeed | • U qorshee dhammaan shaqada si badqab leh<br>• Ilaali dadka kula shaqeeya<br>• Hubi in aagga shaqadu ammaan yahay, ka hor inta aanay shaqadu bilaabmin |

**Bandhig**

Dhammaan shaqaalaha qandaraaslayaashu waa in ay maraan bandhig ka hor inta aan la bilaabin shaqada goobta mashruuca. Waqtiga ku habboon waa in loo qoondeeyaa tababbarka (bandhiga iyo kuwa kale) dhammaan shaqaalaha. Madnaqa helitaanka iyo fahamka soo-bandhigidda waa inay saxiixaan dhammaan dadka helaya shaqada.

Shaqaaluhu waxay masuul ka yihiin caafimaadka iyo badqabkooda iyo shaqayntooda ee goobta shaqada. Waa in lagu baraarujiyaa masuuliyadda saaran inta lagu jiro kulannada bandhigga iyo wacyigelinta, kuwaasoo ay ka mid yihiin:

- Barashada naftooda ee la xiriirta goobaha shaqada iyo habraacyada Caafimaadka iyo Badqabka;
- Ku shaqaynta hab aan khatar galinayn naftooda ama aan dhibaato u gaysanayn dadka kale;
- Ilaalinta nidaamka goobtooda shaqada;
- Soo sheegidda dhammaan shilalka / dhacdooyinka / caafimaadka-darrada shaqada iyo kuwa la waayo;
- Ka ilaalinta shaqaalaha kale dhaawaca;
- Ka warbixinta falal xunxun iyo xaalado xunxun;
- Ka warbixinta xaalad kasta oo khatar noqon karta;
- Fulinta amarada sharciga ah iyo addeecida xeerarka HSE.
- Ka warbixinta loo shaqeeyaha marka ay kasoo muuqdaan calaamadaha COVID-19, inta uu joogo shaqada ama guriga.
- Qandaraasluhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan shaqaalaha qandaraaslayaashu ay maraan guud oo dhanka shaqada ah, kaas oo saabsan khataraha guud ee baahsan, shuruudaha HMS, GRM, Xeerarka HSE iyo dhinacyada kale ee la xiriira.

**Diiwaan haynta**

Qandaraaslaha ayaa hayn doona oo ilaalin doona diiwaannada Caafimaadka iyo Badbaadada, si uu u muujiyo u hoggaansanaanta Cafimaadka iyo Badbaadada Shaqada iyo Sharciga. Qandaraasluhu waxa uu hubin doonaa in dhammaan diiwaanada shilalka, ganaaxa dhibcaha, tababarka iwm lagu hayo goobta. Dhammaan dukumeentiyada waxay diyaar u yihiin inay kormeeraan Macmiilka/Wakiilka Macmiilka ama Kormeerayaasha

**Sanduuqa Gargaarka Degdegga ah iyo Qalabka Gargaarka Degdegga ah**

Qandaraasluhu waa inuu lahaado kalkaaliye caafimaad oo la qoondeeyay, kaasoo u qalma baahidiisa. Qandaraasluhu waxa uu goobta ku bixin doonaa sanduuqyada Gargaarka Degdegga ah, oo si ku filan u kaydsan mar walba. Wuxuu hubin doona in Sanduuqa gargaarka degdega ah la heli karo oo uu si buuxda u kontoroolo Kalkaaliyaha caafimaad ee u qalma. Intaa waxaa dheer, meesha ay ku yaaliin sanduuqyadan waa in la muujiyaa, iyada oo la adeegsanayo Calaamadaha Caafimaadka iyo Badbaadada. Lambarka lagala xiriiro Kalkaaliyaha caafimaad ee shaqaalaha waa in lagu qoraa dhammaan meelaha ay quseyso.

**Qalabka Is-ilaalinta Shaqsiga (QIS) iyo Marashida**

Qandaraasluhu waxa uu samayn doonaa bixinta iyo haynta tiro ku filan oo ah QIS ama dhar ku habboon shaqada iyo goobta. Kuwaas waxaa lagu falanqeyn doonaaa iyadoo la adeegsanayo Qiimaynta Khatarta. Qandaraasluhu waa inuu xaqiijiyaa in sahaminta QIS la sameeyo, si loo go'aamiyo nooca QIS ee loo baahan doono iyo qaybta shaqada ee u baahan doonta QIS oo uu ku

jiro COVID-19. Diiwaanada arrinta QIS waa inay diyaar u ahaadaan dhammaan QIS la siiyo shaqaalaha goobta jooga, hubi in shaqaale kastaa u saxiixo QIS-kiisa.

Dhammaan shaqaalaha waa in loo tababbaraa ilaalinta isticmaalka iyo xaddidaadaha QIS ee loo soo saaray COVID-19, tan waxaa ku jiri doona dhaqidda, qalajinta iyo feereeynta af-xirka. Qandaraaslaha ayaa si cad u qeexaya hababka la qaadayo marka QIS ama dharku:

(a) Lumo ama la xado
(b) Dhammaado ama Waxyeeloobo
(c) Goorta iyo goobta ay tahay in la gashado ama la isticmaalo

**Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada**

Qandaraasluhu waxa uu ku siin doonaa calaamado ku filan goobta CBS. Calaamadaha CBS waxaa ku jiri doona, laakiin aan ku koobnaan doonin qalabka soo socda: , muraayadaha badbaadada, kabaha badbaadada ee la xidho; af-xir boor oo lagu xirtoo meelaha laga yaabo inay soo gaarto boorka xad dhaafka ah. Waxa intaa raaci kartadhego xirka la xirto, si looga baaqsado dhibaatada ka iman karta jabaq ka badan 85 dBa iwm. Qandaraaslaha ayaa mas'uul ka ah inuu ilaaliyo tayada iyo beddelka calaamadaha. Nooca calaamadaynta loo baahan yahay, waxaa lagu go'aamin doonaa khataraha goobta ka jira. Qandaraasluhu waxa kale oo uu hubin doonaa in waraaqaha COVID-19 lagu soo bandhigo macluumaad badan oo wax-ku-ool ah, lana geeyo dhammaan goobaha ay shaqaaluhu isugu yimaadaan ama ay ku qabtaan shaqadooda joogtada ah. **Shaqo joojinta ay sababto addeecid li'ida**

Wakiilka Macmiilka iyo Macmiilku waxay xaq u leeyihiin inay joojiyaan fulinta shaqooyinka iyo ogeysiisyada aan waafaqsanayn nolosha khatarta ah ee caafimaadka, badbaadada ama xadgudubyada deegaanka. Wax kasta oo ah adeecid li'i/natiijooyinka / indho-indhaynta ee la helo inta lagu jiro xisaab-xidhka / kormeerka waa in, marka ay suurtagal tahay, la shaaciyo, laga doodo,oo si toos ah loola xalliyo qandaraaslaha.

Shuruudaha keeni kara joojinta shaqada waxaa ka mid ah kuwan soo socda, laakiin kuma koobna, ee waxa jira kuwo kale oo dheeraad ah: Maamulka isbadalka: Tani waa marka ay jiraan isbeddelo ku yimaada jawiga shaqada (tusaale: maamulka / isbeddelka kormeerka) iyo / ama shaqada dhismaha, (tusaale wax ka beddelka naqshadeynta, marxalad kasta oo ka mid ah xilliga dhismaha, iyo / ama wax ka beddelka, iyada oo la tixgelinayo xeerarka Macaamiisha iyo / ama wax ka beddelka sharci;

- Falalka / dhaqamada xun ee shaqaalaha qandaraaslaha;
- Xaalado ammaan xumo oo ka dhasha khataraha lama filaanka ah, isbeddelka habraacyada shaqada, xaaladdaha cimilada lama filaanka ah iyo falalka xaasidnimada ah ee kharribaadda. Haddii ay dhacdo xaaladdo ammaan xumo oo uu qof kastaa garto, habka la raacayo waa in uu ahaadaa:
- Macmiilka/Wakiilka Macmiilka waa in isla markiiba lala socodsiiyaa.
- Hawsha shaqada waa in isla markaaba la joojiyaa oo shuruudo laga dhigaa, sida ugu badbaadsan ee suurtogalka ah.

- Shaqaalaha ay saamaysay waa in laga saaraa goobta shaqada, qandaraasluhuna waa in uu saxaa cilladaha Caafimaadka iyo Badqabka, isagoo u oggolaanaya dadka goobta jooga oo keliya in ay u qaadaan meel ammaan ah.
- Qandaraasluhu waa inuu hubiyo inaan wax shaqo ah laga qaban aagga shaqada inta lagu jiro wakhtiga dhibaatadu dhacday. Aagga waa in la xidhaa oo la dhejiyaa calaamad ay ku qoran tahay ereyada muujinaya arinta meesha ka dhacday. Halka ay lagama maarmaan tahay, waa in la dhigaa ilaalo si looga hortago gelitaanka.

**Amaanka iyo xaaladaha degsdega ah**

Qandaraasluhu waa in uu qiimeeyaa istaraatiijiyadda amniga iyo qabanqaabada looga baahan yahay dhammaan goobaha shaqada oo ay ku jiraan gaadiidka. Qiimayntan waxaa fulin doona khubaro xagga amniga ah oo u qalma, waxayna aasaas u noqon doontaa Istaraatiijiyadda Amniga iyo Qorshaha Goobta Shaqada, kaas oo ay soo gudbin doonaan, ansixin doonaanna UFM. Istaraatiijiyada iyo Qorshaha Amniga ayaa qeexi doona:

- Khataraha amniga iyo tallaabooyinka yaraynta/maamulka ee la aqoonsaday
- Doorarka iyo masuuliyadaha oo ay ku jiraan faahfaahinta qandaraaslaha iyo qandaraaslayaasha
- Ogaanshaha, la socodka iyo hababka maaraynta
- Qorsheyaasha kor u qaadista oo ay ku jiraan agabka

Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, ugu yaraan qandaraasluhu waa inuu sameeyaa qabanqaabo degdeg ah oo loogu yeero dhakhtarka iyo u qaadida dadka dhaawaca ah isbitaalka . Lambarada teleefoonada ee adeega degdega ah, magaca, ciwaanka, taleefoonka dhakhtarka iyo cisbitaalka kuugu dhow waa in laga helaa xafiiska qandaraaslaha.

Qandaraasluhu waxa uu hubinayaa in dhammaan shaqaalaha lala socodsiiyo oo ay ka warqabaan sida looga falceliyo xaalad degdeg ah, masuuliyadahana waa in la qeexaa. Tababarka macluumaadka iyo wacyigelinta waa la diiwaangeliyay, waxaana laga heli karaa dhammaan Goobaha Mashruuca.Ka warbixinta dhacdada waa inay noqotaa sida ku cad habraaca warbixinta dhacdada ee POM.